**International Islamic Federation of Student Organizations**

# ISLAAMKA IYO DHIGAALADA INOO DEGSAN

*Waxaa Qoray*

CABDILQAADIR CAWDAH

10

# ISLAAMKA IYO DHIGAALADA INOO DEGSAN

# الإسلام

## وأوضاعنا القانونية

الإتحاد الإسلامي العالمي
للمنظمات الطلابية
١٤٠١هـ - ١٩٨١م

دار القرآن الكريم
للعناية بطبعه ونشر علومه

Produced by

The Holy Koran Publishing House
P.O.Box 7492, Beirut, LEBANON

MIDOWGA ISLAAMKA CAALAMIGA
EE URURADA ARDAYDA

# ISLAAMKA IYO DHIGAALADA INOO DEGSAN

*Waxaa Qoray*

CABDILQAADIR CAWDAH

•

*Waxaa Tarjumay*

Cabdirisaaq Caqli

I.I.F.S.O
1401 A.H. – 1981 A.D.

بسم الله الرحمن الرحيم

IN THE NAME OF ALLAH,
THE MERCIFUL, THE COMPASSIONATE

## CUDUR DAARKA QAYNUUNKA

Waxa igu waajib ah in aan u cudur daaro qaanuunka. Bal maxaa igu kellifay in aan u cudur daaro qaanuunka. Tiiyoo ay hawshayduba tahay uun in aan ku dhaqaaqo sharaxiisa dabbaqaadiisa, suurtogelintiisa iyo ka rabidda cadowga.

Waxaan ugu Cudur daarayaa qaanuunka si aan u weeraro qaynuunada. Waxaan ka weerarayaa qaanuuka qodob ahaan iyo dhismo ahaan. Waxaan ka cudur daaranayaa qaanuunka haddii aan weeraro qaanuunka anigoo ah dadkiisa. Amma haddii aan dadka diirka uga qaado wax ugaga qarsoonaa xaqiiqdiisa. Ama aan u sharxo qaar ka qaadaya sharaftiisii oo dadka ugaga dhigaya mid fudud.

## QAANUUNKU WUXUU INOO DIIDAYAA HADALKA

Qaanuunku wuxuu u didayaa shaqaalaha gaar ahaan Garsooraysasha in ay ra'yigooda ka dhiibtaan masa'ladaha guud. Wuxuuna taasi ku tirinayaa in ay sanka la soo galeen siyaasaddii. Siyaasadduna sida ay la tahay kuwa qaanuunka sameeyey waa dhammaan wixii taabta masa'ladaha bulshada, dhaqaalaha, iyo maali-

yadda. Iyo dhammaan wixii la xidhiidha habaynta dawladda iyo xidhiidhka ay la leedahay afraadda, bulshooyi-nka dawladaha. Iyo dhammaan wixii la xidhiidha habka xukunka iyo wixii la xidhiidha madaxbannaanida dawladda, xornimadeeda iyo sharafteeda.

Kuwa qaanuunka sameeyey waxay doonayaan in ay dadka ka dhigaan qalab. Waxay doonayaan in uu garsooruhu indhiisa xidho oo aanu waxba arag. In uu dhegihiisana awdo oo aanu waxba maqal. In uu carrabkiisa xidho oo aanu hadlin. In uu ka baxo bani aadminimadiisa oo aanu waxba dareemin fekirinna.

## SIDEE BUU GARSOORUHU UGA FARAMADHNAANAYA

Ma u suurtogelinaysaa garsooraha inuu ka faramadhnaado dareen iyo shucuur. Kana faramadhnaado nimcada caqliga iyo fekiraadda. Isagoo ku dhex nool mashaakilkii xukunka iyo mamulka, hirdankii bulshada iyo xisbiga iyo soo noqnoqoshadii bulshada iyo siyaaasada. Isagoo maalin kasta indhihiisa ku arkaya dadkaasi liita ee dhi-bban. Dhegihiisana ay buuxisay noocyo kala geddisan oo ah addonsiga bulshada qallafsanaanta siyaasadda iyo kor ku noolaanshaha.



## GARSOORUHU MA KA FARAMADHNAAN KARAA UMMAD LA HAYSTO

Garsooraha ma u suurtogelaysaa in uu ka faramadhnaado sida uu qaanuunku doonayo, ummad la haytso. Ummaddaasi oo ay shuyuukhdeeda iyo dhalintooduba ay ku hoos dhasheen tiiyo uu shisheeye haysto. Weli ma uu laabta kaga sii jiro. Isagoo qabsanaya arladooda gacanta ku haya risiqooda, cuntodooda, cidhiidhi gelinaya xornimadooda, soo dhexgelaya siyaasaddooda, Gargaarsanayana qolo naftoodii ka iibisay shaydaanka oo ka fidnoobay diintoodii.

Ma ka fara madhnaan karaa Garsooruhu ummad uu Gumeysigii dulleeyey oo uu dhibay. Kuwii qabsadayna ay ka faramadhiyeen maalkeedii iyo akhlaaqdeedii. Dhi nac walbana ay fasahaadiyeen. Dhallintoodiina ay ku dhex beereen colaad iyo cadho. Kana dhigeen xisbiyo kala duwan oo ay qolo weliba teeda ku farax santahay. Taasi oo xisbi dusha laga moodo qaar wada socda hadana ay quluubtoodu kala wada jeedo. Kuwaasi oo colaadda dhex taallaa ay aad u darantahay. Ku wasoo noloshooda ku bilaabay iyagoo u halgamaya madax bannaanidooda. Haddii ay waayaanna doorbidaya dhimasha. Taasina ay keentay in nimankii xukumayey ay u dejisteen wax ay kurka

kaga guraan dadkaasi ku xeeran ee soo halgamay. Sidaasi oo dhiig ku daatay oo ay dhexdoodii ka oogantay colaad aan joogsan oo ah dhiig daadin, sharaf jebin, cadaadis iyo cagajuglayn.

## GARSOORUHU KAMA FARA MADHNAAN KARO UMMAD WADA KHARRIBAN

Garsooruhu ma ka fara madhnaan karaa dal la oggolyahay in dadka la tuhmo loo cadaabo si kulul si ay u qirtaan wixii ay sameeyeen iyo wax aanay samaynba. Kuwaasi oo cidiyaha laga soo saarayo. La garaacayana ilaa ay suuxaan oo ay miyir doorsoomaan. Kuwaasi oo jidhkooda lagu kaawiyadaynayo dab, la shaabuugaynayo, loona diidayo cuntada iyo biyaha. Laguna xadgudbayo sharaftooda oo bir iyo qoryo dabada laga gelinayo. Looguna caga juglaynayo in sidaasi oo kale lagu samayn doono hooyooyinkood, haweenkooda iyo carruurtooda. Askartuna ay haysanyaan guryahooda maalmo iyo todobaadyo tiiyo waxa joogaa ay yihiin haween keliya. Waxaasi oo idil ama badhkood ay soo gaadhayaan kuwii qaanuunka oogayey. Waxbana aanay ka qaban karin. Maxkamadda horteedana la keenayo waaxaasi oo idil. Kuna celcelinayaan dad badan oo kuwaasi la tuhmay ahi. Una taageerayso waraaqaha rasmiga ah iyo caddaynadii dhakhtarku. Taasi oo nabadsugiidda guud aanay



marnaba isku dayen in ay xaqiijiyaan tuhumaadaasi foosha xun si ay ugu yaraan u dhowraan sumcadda qaanuunka iyo sumcadda kuwa oogaya.

Ma ka faramadhnaan karaa dal ay ogyihiin waxa ku nool oo idil in ay xumaan iyo kharaabnimo ku noolyihiin. Taasi oo xada hantida, laguna suurto gelinayo dulmiga. Hawlaha dawladda iyo khayradkee duna ay ku egyihiin uun rag gaar ah. Nifaaquna uu yahay qaabkii lagu liibaanayey nolosha. Akhlaaqda oo la tuuro iyo wax kasta oo layska xalaalaystaa ay yihiin sida ugu dhow ee lagu gaadhi karo talo iyo Magac.

Ma ka framadhnaan karaa Garsooruhu dal kunool xiligii dhul goosiga. Taasi oo ay noloshu ku qotonto in ay kuwa xooggani ku dulnoolaadaan kuwa tabarta yar ee shaqaalaha ah. Taasi oo ka tabarta yari uu u dhibboonayo sidii uu wax uu afka geliyo u heli lahaa.. Waxuuna u halgamayaa sidii uu ku heli lahaa hoy iyo dhar. Taasi oo halgankasi iyo dhibtaasi uu samaynayo miskiinkaasi tabarta yari uu isku bedelayo dahab ku shubma jeebadaha kuwaasi iska fadhiy-a. Kaasi oo ay iska siinayaan oo ay ka dhigayaan sidiiyo ay cid walba uga xaq leeyihiin. Haddii uu kaasi tabarta yari ka dacwoodana dhigaalkani mar waxaa loo cuskanayaa baahidiisa Marna qaanuunka. Ilaa ay tabaryaradiisu ku qasabto qaanuunkaasi ilaalinaya inuu isku dibo.

## GARSOORUHU MA KA FARAMADHNAAN KARAA UMMAD KA LEEXATAY DIINTII IYO AKHLAAQDII

Ma ka faramadhnaan karaa Garsore uu dalkiisu Islaam yahay, qodobkiisa Distoorkunna u sheegayo in diinta dawladda ee rasmiga ahi ay tahay Islaam tiiyo hadana ay madaxdiisa iyo dadka xukumayaa ay diidanyihiin Islaamkii. Ishortaagayaan kii u shaqaynaya Islaamka, eryayaana kuwa isku gargaarsanaya wanaagga iyo Alle-cabsiga, ilaalinayaanna kuwa isku gargaarsanaya denbiga iyo colaadda?.

Faraha ma ka qaadi karaa Garsooruhu dal laga siibay akhlaaqdii, ka leexday wanaagii, diidan samaantii iyo naxariistii. Iskana tuuray tussalooyinkiisii sareeyey isagoo raacaya duqaydiisii iyo madaxdiisii kuna dayanaya kuwaasi tumanaya.

## GOORMA AYEY U SUURTOGELEYSAA GARSOORAHA IN ANU LUG KU YEELAN

Wuxuu garsooruhu ka caramadhnaan kara ceeb oo idil ummad ixtiraamaysa sharciyadeeda. Fulinaysana qodobaha qawaantiinteeda. Iskuna dardaarmaysa xaq iyo caddaaladda. Laakiin ummad ka arradan xikmad, diin sheeganaysa aanse ixtiraamayn diinteeda. Dejinaysa qawaaniinteeda aan se fulinayn. Ku dhaqaaqaysa in ay oogayso xaqa, caddaaladda, iyo xornimada iyo wixii kale ee caynkaasi ah ee la mid ah oon hadana waxba ka fulinayn. Ummad aan afraadeeda kula dadaarmayn xaqa, ku baaqayn khayrka, aan isfarayn wanaagga, xumaantana aan isku diidayn. Ummadda arrinkeedu caynkaasi yahay uma suurtogeylayso Garsooraha in uu xumaan ka faramadhnaado xataa haddii uu ka digtoonaado. Tiiyo ay ugu wacantahay sabab keliya oo fudud. Taasi oo ah in aanu kari karin.



## CIDDII DOONAYSAA HA CADHOOTO

Dadka qaarkood ayuu sankoodu cadho la casaan marka ay hadalkani akhriyaan. Kuwaasi oo u hiilinaya sanamyada casrigan aynu ku jirno. Sanamyaduna wax kale maahee waa qaanuunadaasi ay madaxa hoos ugu wada dhigayaan. Qaanuunadaasi ay u hoggaansanyihiin muslimiintu wax ilaahay kaga cadhaysiinaya. Taasi oo ay dawladaha Islaamku xaarantimaynayaan wax uu ilaahay xalaaleeyey. Xalaalaynayaanna wax uu ilaahay xaarantimeeyey.

Wax ka cadhoon waayo mid ka mid ah horseedyadii sanam-yada ayaan caasiyey oo beeniyay. Waxayna la yaabi doonaan sida uu Garsoore ka mid ah kuwii u adeegi jirey qaanuunku uu u weerarayo qaanunka oo

uu u beeninayo. Waxayna meel walba isugu qayladiran sidii ay gacanta u gaban lahaayeen ninkani ka hor intaanu burburin nidaamyadooda, jejebinna sanamyadooda. Laakiin maaha fikrad qof iska leeyahay ee waa wacyi ummadeed. Maaha baaq afka ah ee waa baaq iimaan. Waa halgankii Islaamka dartii. Waa jihaad. Waa jihaad aynu ugu dhowaanyanno ilaahay.

## GARSOORE AYAAN AHAY LAAKIIN MUSLINBAAN A HAY

Haddii aan ahaan lahaa Garsoore aan Muslin ahayn, marna carrabkayga kama qaadeen u mahadnaqidda qaanuunka sida ay reer galbeedkuba yeelaan. Haddii aan ahaan lahaa Garsoore muslin ah oo ka jaahil ah Islaamka, waxaan ku dayaan lahaa reer Yurub. Waxaanan muujin lahaa rumaysnaanta qaanuunka. Laakiin Waxaan ahay Garsoore Muslin ah. Taasi oo Ilaahay igu mannaystay in aan Islaamka ka barto wax aanay ka aqoonin Garsoorayaal Farabadani. Ogaadayna sida ay qawaaniinta la dejiyey u khilaafsantahay Islaamka. Taasi oo in yari uun ogtahay.

Garsooraha Muslinka ahi waxaa u suurogelaya in uuna lug ku yeelan sida uu ku waajibinayo qaanunku, dhammaan wixii taabanaya danaha ferdiga ah, wixii la xidhiidha dhoolotuska xisbiga, ama taabanaya Islaamka, nidaamyadiisa sharciyeynta, Ijtimaaciga iyo



xukunka, wixii taabanaya caddaalad bulsheedka iyo Garsooridda, wixii taabanaya xuquuqda iyo waajibaadka, wixii taabanaya akhlaaqda iyo wanaagga iyo tusaalaha baniiaadminada, wixii taabanaya nabad gelyada dawladda ee xilligan la joogo iyo mustaqbalkaba. Laakiin Garsooraha Muslinka ahi waxaasi oo idil kama fara madhnaan karo ilaa uu beeniyo Islaamka. Ama ilaa uu noqdo mid xoolo ah oo sida dugaagga u fekiraya. Sida xoolahana wax uun u cunaya.

Distoorka gundhigga u ah qofka muslinka ahi waa sharicadda Islaamka. Qaanuun kasta oo la dejiyo oo waafaqsan qodobadeeda lana socda mabaadiideeda guud iyo ruuxeeda sharciyeynta waa mid tin iyo cidhib uu addeecayo macsida Ilaahay.

Qofkasta oo musin ah oola yimadda wax uu ogyahay in ay khilaafsantahay Islaamka waa faasiq. Haddii uu la yimaaddoiisagoo immaatinkeeda xalaalaynayana waa mid diintii ka baxay oo ilaahay ka gaaloobay. Shakina ku ma jiro in qof kasta oo muslin ahi necbay necbaysanayo in uu sifadaasi ku yeesho waxa isaga iyo Illaahay ka dhexeeya, iyo waxa isaga iyo dadka ka dheexeeya.

## MAAHA INUU MUSLINKU ADEECO MACSIDA ILAAHAY

Wuxuu Islaamku waajibinayaa in uu qofka muslinka ahi adeeco ilaahay iyo rasuulkiisa marka hore. Mar labaadkana uu adeeco ka talada u haya. Laakiin hadana wuxuu Islaamku waajibinayaa in aan qofna lagu adeecin macsida ilaahay: « **kuwa rumeyayow adeeca Ilaahay oo adeeca rasuulka iyo kuwa talada idiin haya ee idinka mid ah. Haddii aad arrin isku Qabaataanna u daaya Ilaahay iyo tasuulkiisa haddii aad rumeysantihiin Ilaahay iyo maalinta aakhiro sidaasi ayaa idiin khayr badan oo idin wanaagsan** ». Alnisaa' 59.

Wuxuu qodobkani uu siinayaa madaxda xaqa ay talada u leeyihiin. Wuxuuna afraadda faray-aa inay waajib ku tahay adeeciddu. Laakiin wuxuu isku xidhayaa xaqa iy o waajibka oo wada socda. Qof talinaya maaha inuu faro wax khilaafsan Islaamka. Ha ahaado kaaso wax la farayaa mid shaqaale ah ama yaanu ahaanin e. Taasi oo ka cad hadalka ah: « **haddii aad arrin isku qabata-an u daaya Ilaahay iyo rasuulkiisa** ». Iyo hadalkii rasuulka ee uu yidhi: « laguma adeecayo qofna macsida Ilaahay ». Iyo hadalkiisa ah « Kii ka mid ah madaxda ee idin fara wax aan ahayn daacada Ilaahay ha adeecina ».



## WAXAA LA GUDBOON QOFKA MUSLINKA AH WANAAGGA OO UU FARO IYO XUMAHA OO UU DIIDO

Wuxuu Islaamku ku waajibinayaa qofka muslinka ah in uu wanaagga faro oo uu diidana wixii xumaan ah. Taasi oo ku xusan quraanka: « **Waa in ay idinka mid noqotaa ummad ku baaqaysa khayrka, wanaagga is faraysa xumahana isku diidaya. Kuwaasi waa kuwa liibaanaya** ». Aal. Cimraan Io4. « **Waxaad tihiin ummad tii ugu khayrka badan ee dadka loo soo saaray wanaagga faryasa, xumahana diidaysa** ». Aal-Cimraan-115. « **Muuminiintu rag iyo haweenba qaarba qaarbay u weli yihiin oo ay farayaan wa nagga una diidayaan xumaanta** ». Tawba-71 « **Kuwa haddii aanu arlada ku sugno, oogaya salaadda, bixinayaana sakada faraya wanaagga diidayana xumaanta** ». Al-xaj-41. « **Waxay ahaayeen qaar aan isku diidayn xumaha ay faleen. Waxay ku hoggeen wixii ay falayeen** ». Al-Maaida-79.

Waxay axaadiistii Rasuulku timid iyadoo cadday-naysa micnahaasi oo sii taageeraysa. Waxaana laga soo weriyey Abuubakar ilaahay raali ha ka noqdee in uu ku yidhi khudbad uu akhriyey: « Dadyahow waxaad akhriyaysaan aayadani. Waxayduuna ku sheegaysaan si aan ahayn sharaxeeda ». « **Kuwa**

**rumeeyayow waa idinku naftiina. Idin dhibi maayo kii lumaa haddii aad hanuuntaan** ». Aniguna waxaan maqlay Rasuulkii Ilaahay oo leh « Mar haddii ay qolo sameeyaan macsiyado oo ay ku dhex jiraan qaar awoodi kara in ay diidaan. Oo aanay sidaasi yeelin. Waxaa laga yaabaa in uu ilaahay ka wada siimo cadaab xaggiisa kaga timaada ».

Wuxuu kaloo nebigu yidhi: « Waxaydun fari wanaagga waxaydunna diidi xumaanta. Haddii kale waxaa laydunku sallidi kuwa idiinku shar badan. Markaasi ayey kuwa idiinku khayrka badani ilaahay baryi oo la yeeli waayey ».

Wuxuu kaloo yidhi: « Hawlaha wansagsani waxay jihaadka marka la garab dhigo yihiin sidii candhuuf badweyn ku dhacday oo kale ». Wuxuuna yidhi: Waxaa shuhadada ummadayda ugu fadli badan qof ku kacay imaam daalin ah. Oo faray wanaagii una diiday xumaantii. Oo uu markaasi sidaasi ku dilay. Kaasi ayaa shahiid ah. Halka uu jannada ku leeyahayna waa meel u dhaxaysa Xamse iyo Jacfar ».

Wuxuu Kaloo yidhi: « Waxaa hoogay qolo aan sinnaanta isfarayn. Waxaana hoogay qolo aan wanaagga isfarayn. Iskuna diidayn xumaha ». Wuxuu kaloo yidhi: « Kii idinka mid ah ee arka xumaan waa in uu gacantiisa ku bedelaa. Hadii uu kari waayo waa in uu afkiisa ku bedelaa. Haddii uu kari waayo waa in uu qalbigiisa ku bedelaa. Kaasibanaa ugu liita iimaanka».

Wanaagga oo lays faraa waa iyadoo la donaa in



dhammaan hadalka iyo ficilkuba ay ku dabbaqanyihiin qodobada shariicadda Islaamka. Xumaanta oo laysku diidaana waa tiiyoo laga dheeraado dhammaan wixii la rabay in la dhaafo ama la bedelo iyadoo ka tegiddaasi waafaqsantahay shariicadda Islaamka. Waxaana laysku raacsanyahay in wanaagga oo lays faro iyo xumaanta oo laysku diido ayna ahayn mid ay xaq afraaddu ugu leeyihiin in haddii ay doonaanna ay yeelayaan, haddii ay doonaanna ay iska dhaafayaan, ee waa mid waajib ku ah afraadda oo aanay marna ba la gudboonayn in ay faraha ka qaadaan. Waana waajib ay dhibtiisu dusha ka saarantahay.

Waxuuna u waajibiyay Islaamku wanaagga oo lays faro iyo xumaanta oo laysku diido si ay bulshadu u oogto khayrka. Afraadina ay ku soo koraan wanaagga. Yaraato macsida iyo denbiyadu. Dawladuhu waxay farayaan wanaagga. Waxayana diidayaan xumaanta. Bulshaduna waxay faraysaa wanaagga. Waxayna diidayaan xumaanta. Sidaasi ayuu bulshada dhexdeeda ugu sugnaanayaa wanaaggii lays farayey. Lagagana adkaanayaa fasaadkii iyo xumaantii isgargaarsigaasi khayrka iyo cabsida, iyo la halgankooda denbiga.

## WAA KAASI XUKUNKA ISLAAMKU

Sidaasi ayey qof kasta oo muslin ah ula gudboontahay in ay ku diidaan dawladaha wixii la faro ee ah macsida eebbee. Wuxuuna Islaamku ka xaarantimaynayaa qof kasta oo muslin ah in uu adeeco amar khilaafsan shariicada Islaamka. Kana baxsan xuduudda waxa ay Ilaahay iyo rasuulkiisu inna fareen.

Sidaasi ayuu Islaamku ugu waajibinayaa qof kasta oo muslin ah in uu wanaagga faro, xumahana diido. Taasi oo uu faro wixii Ilaahay faray. Una diido wixii uu Ilaahay u diiday. Wuxuuna Islaamku ku waajibinayaa qof kasta oo muslin ah oo arkay xumaan in uu gacantiisa ku bedelo mar allaale markii ay taasi suurto gasho. Haddii kale carrabkiisa iyo qalinkiisa. Haddii uu kari waayana qalbaigiisa « Ilaahayna nafna ma kellifo wax aan karaan keeda ahayn ».

## QOF KASTA OO MUSLIN AH WAXAA LA GUDBOON IN UU GUTO WAAJIBKIISA

Waa kaasi xukunka Islaamku. Waana kaasi jidka muuminiintu. Waxayna inna hadheeyey xilli ay xumaantii badatay. Daka badiboodiina ay xumaadeen.



Afraaddu ma diidayaan xumaan ay sameeyeen. Mana farayaan wanaag. Kuwa wax xukumaya iyo afraaduba waxay caasiyaan Ilaahay. Waxayna xalaalaynayaan wixii uu Ilaahay xaaraantimeeyey. Waxay caasiyaan Ilaahay. Waxayna xalaalaynayaan wixii uu Ilaahay xaaraantimeeyey. Waxayna madaxdu u dejinayaan muslimiinta qanaaniin ka doonaysa gaalnimo. Kana leexinaysa Islaamka. Sidaasi awgeed qof kastaa oo muslina waxaa ku waajib ah in uu xilkiisa ka guto xilligaasi kulul ee lagu jiro.

Qof kastaa oo muslin ah waxaa ku waajib ah, ha ahaado shaqaale ama yaanu ahaane, ha ahaado Garsoore ama yaanu ahaane, in uu weerar ku qaado qawaaniinta iyo dhigaalada khilaafsan Islaamka. Muslinka goobaha kala duwan ku noolla waxaa la gudboon in ay isku bahaystaan sidii ay u bedeli lahaayeen qawaaniinta iyo dhigaalada khilaafsan Islaamka, iyo sidii ay gacmahooda ugu burburin lahaayeen. Haddii ay dadka qaarkii u tabar waayaan inay ka soo qayb galaan sidii ay gacmahooda ugu burburin lahaayeen, waa in ay carrabkooda ku bedellan. Kuna weeraran qalimadooda iyagoo garabsanaya saaxiibadooda karaya in ay gacmahooda ku bedelaan. Haddii uu qof ka mid ah muslimiintu u tabar waayo ficil iyo af toona, waa in uu naftiisa u diidaa qawaaniintaasi khilaafsan Islaamka. Qalbigiisana ka naedala kuwaasi oogaya qaanuunkaasi.

Waxaa muslimiinta ku filan si ay u gutaan waajib-

kooda oo ay uftu guuleystaan in ay is gargaaraan kooga dhow iyo kooga fogi, kooga xooggan iyo kooga tabarta yari sidii ay u dumin lahaayeen sanamyadaasi iyo qawlaystadaasi.

Waxa ugu horreeya ee waajib ku ah in uu walaalkiisa muslinka ah la garabsado waa wanaagga oo lays faro iyo xuma oo laysku diido: « **Isku gargara wanaagga iyo cabsida. Hana isku caawinina denbiga iyo colaadda** ».

Waa in ay muslimiintu isku gargaaraan sidii ay u dumin lahaayeen xumaantaasi. Ilaahayna wuu ku gargaari oo uu u soo fidin guushiisa. Gacanta ilaahayna waxay la socota ururka. Ilaahayna waa kii gargaaraya addoonkiisa inta uu addonku gargaarayo walaalkiis.

Waa in uu qof kasta oo muslin ahi gutaa waajibkiisa sidii uu ula dagaali lahaa qaanuunada iyo dhigaalada khilaafsan Islaamka. Waxbana kuma aha qofka oo muslin ahi waxay leeyihiin ama ay samaynayaan kuwaasi jaahiliinta ahimar haddii uu diintiisii xaqa ahayd ku taaganyahay. Si yaqiin ahna u garowsanyahay arrinkii eebihii. « Kuwa Ilaahay rumeeyayow waa idinku naftiinna idinma dhibayaan kuwa lumay haddii aad hanuunsantihiin Al-Maaida-Io5.

## HAWSHA QAANUUNKA

Waxaan u cudurdaarayaa qaanuunka. Waxaanan weerayaa qawaaniinta. Waxaan ugu cudurdaarayaa qaanuunka micne ahaan. Waxaanan qawaaniinta



ka weerarayaa qodobka iyo dhismaha.

Qaanuunku micne ahaan waa baahi aanay geesna uga carari karin bulshadu. Waana baahi aanay sina uga maarmi karin baniiaadminimadu. Qaanuunka ayaa lagu habeeyaa bulshada, lagu joojiyaa dulmiga, lagu dhawraa xuquuqda, lagu fidiyaa caddaaldda laguna jeediyaa dadweynaha.

Baahida banii'aadmiga iyo danahooda ayaa abuuray qaanuunka. Waana ta sugtay jiritaankiisa iyo sharciyeytiisa. Kelliftayna ixtiraamkiisa iyo addeeciddiisa. Waxay baahidu ku qasabtay kooxda in ay nafteeda habayso, si ay uga faaiidaysato dedaalka afraadeeda. Waxayna ku qasabtay in ay dulmiga u diido afraadeeda, dhawrto xuquuqdooda, caddaaladdana dhexdooda ku qaybiso si ay xasilooni iyo nabad ugu wada nooladaan iyagoo isgargaarsanaya, iskuna garabsanaya wixii badhaadhe u keenaya kooxda ee u jeedinaya khayr iyo dhammi. Waxay baahidu ku qasbaysaa kooxdeeda in ay afraadeeda siiso tawjiih gaar ah, si ay lafahaantooda ugu kacaan hawlo u dan ah ururka. Ama ay diidaan arrin ay dani ugu jirto ururka. Sidaasi ayey qawaaniintu tahay mid loo dejiyey baahida ururka iyo si ay ugu gudaan danihiisa una ilaaliso wixii u dan ah.

Sidaasi ayaanu qaanuunku ahayn mid ka baxsan ururuka oo ka madax bannaan. Sidaasi oo kalena aanu ahayn, sida ay dadka qaarkii u malaynayaan mid ka sareeya. Qaanuunku na runnhaantii wax kale

maahee waa awood ay bulshadu u dhalisay danaheeda. Waana qaab ay dhibta kaga ilaalinayso afraadeeda.

Hawsha Qaanuunkuna waa mid guud. Taasi oo ah u adeegidda bulshada iyo u dhammays tiridda danaheeda. Qaanuun kastana wuxuu leeyahay waajib uu gudanayo. Taasi oo awgeed loo dejiyay. Si kasta oo ay isku khilaafaan noocyada qawaaniintu, waxay dhammaantood u wada jeedaan uun sidii ay ugu adeegi lahaayeen bulshada oo ay u badhaadhin lahaayeen. Qaanuunka waajibinaya waxbarashada qasabka ahi, hawshiisu waa in uu ugu adeego bulshada ji-dka faafinta waxbarashada iyo la dagaalanka jahliga. Qaanuunka ciqaabaya eedaysanyaasha, hawshiisu waa in uu bulshada ugu adeego jidka dhawridda nabadda oo ay ka mid tahay denbiyada oo lala dagaalamo. Qaanuunka diidaya in ay dadku dhexdooda iska dulmaan, hawshiisu waa in uu u adeego bulshada jidka dhawridda xuquuqda fardiga iyo qaybinta caddaaladda iyo xasilooni ka dhex dhacda afraadda dhexdooda.

Haddii uu qaanuunkastaa uu ka soo qaadanayo jiritaankiisa iyo sharciyeyntiisa baahida ay bulshadu u qabto, qaanuun kastaa wuxuu ku fadhiyaa sidii uu bulshada ugu gargaari lahaa qodobadiisa oo la taago si u badhaadhe yeelo bulshada, una buuxiyo danaheeda ku kallifay dejinta qaanuunkani.

Haddii ay hawsha qaanuunku tahay inay u adeegto bulshada una dhammaystirto danaheeda, qaanuun



kastaa ooxaanay qodobadiisu xaqiijinin hawshaasi, ama ay ka baxaan waxaa ka lumaya wixii loo dejiyey iyo wixii loo sharciyeeyey. Haddii mar ay qaanuun ka lumaan wixii loo dejiyey iyo wixii loo sharciyeeyay waa baadil. Mana habboona in la adeeco. Mana istaahilo in la ixtiraamo.

Waxaynu soo ogaannay in qaanuunka dhab ahaantiisu uu yahay uun awood ay bulshadu u dhilisay shaqadeeda. Iyo qaab lagaga ilaalinayo dhibaatada afraadeeda. Haddii ay caddaato in awoodaasi aanay u adeegayn bulshada, una keenayso dhibaato afraadee-dii, waxaa caqli gal ah in la baabiiyo awoodaasi faasidka ah. Qofna in aanu isku deyin isticmaalkeeda. Waayo isticmaalkeedii ayaa ah bulshadii oo laga baxo, la xumeeyo, lana tuuro faaiidadeedii iyo masaa-liixidi afraadeeda.

## QODOBADA QAANUUNKA

Waxayn horey ku soo sheegnay in uu qaanuunku micne ahaantiisa yahay baahi aanay sina uga baxsan karin bulshadu. Iyo baahi aanay sina banii'aadminima-du uga maarmi karin. Qaanuunka ayaa lagu ha-beeyaa bulshooyinka, lagu joojiyaa dulmiga, lagu dhawraa xuquuqda, lagu qaybiyaa caddaaladda, lagu jeediyaa shacbiga.

Laakiin qodobada qaanuunka iyo tiirarka uu ku dhisanyahay had iyo jeeraale ma wataan micnahaasi

sarreeya, ee uu qaanuunku gaar u leeyahay micne ahaan. Maxaa ka muuqda qodobada qawaaniinta ra'yida madaxda iyo garsoorayaasha iyo kuwa dejiyey. Iyo aragtida caqliyadahooda. Waxayna sharxaan annaaninimadooda iyo xumaantooda. Waxayna tustaa niyad xumidooda, iyo u luminta tusaalooyinkii heerka sare ahaa si ay u raalli gelliyaan damacooda, una dherigiyaan shahawaadkooda ay doonayaan.

Qaanuunkuna-micne ahaan-waa qodobbo laysla garanayo oo gundhiggooda laga dhigayo tiirarkiisa. Halkaasina ay danihiisu ku dulwareegayaan. Laakiin madaxdii iyo kuwii samaynayey ee ka mid ah kuwii dejinayey, ayaa kharribay qodobadaasi oo baabiyey. Wixii ugu xumaa natooda ayey ku bedeleen badi qodobadaasi iyo intii ugu fiicnayd.

Qodobada qaanuunku way farabadanyihiin. Laakiin farabadiidooda waxa looga jeedaa in ay xaqiijiyaan danihii awgood loo sameeyey qaanuunka. Iyo in uu qaanuunku u guto hawshiisa sida ugu fiican ee ugu dhow dhammaystirni. Qodobada qaanuunka iyo ay hawsha qaanuunku tahay in loo adeego bulshada, loona dhammaystiro baahideeda, waxay qodobada qaanuunku yihiin gundhigyadii ay ku qotantay adeesidii baahidaasi loo fulin lahaa, gidda bulshada iyo mabadaaiida ay ku soo noqonayso



## QAANUUNKA UMMAD KASTAA WAA QAYB KA MID AH

Gundhigga ugu horreeya ee qaanuunku waa in qaanuunka ummad kastaa iyada ka yimaaddo iyadana ku noqdo. Waa qayb ka mid ah xilligeedii hore iyo xilligan lagu jiro. Wuxuu ka taaganyahay bilowgeedii iyo horumarkeedii. Wuxuuna ka taaganyahay akhlaaqdeedii iyo dhaqankeedii; asluubteeda iyo nidaamkeeda; diinteeda iyo waxay rumaysanthay.

Gudhiggaasi ayey ku kala geddisanyihiin qawaaniintu sida ay dadkuba u kala geddisanyihiin. Qaanuunka Jabbaanku wuu ka Geddisanyahay qaanuunka Hindida. Hadba in leeg sida uu shacbiga Jabbaanku uga geddisanyahay shacbiga Hindida abuurahaan, horuhorumar ahaan, akhlaaq ahaan, dhaqan ahaan, asluub ahaan, nidaam ahaan, diin ahaan, caqiido ahaan. Qaanunka Ingiriiskuna wuxuu uga geddisanyahay qaanuunada Jabbaanka iyo Hindida hadba sida uu shacbiga Ingiriisku ugaga geddisanyahay shacbiga Jabbaanka iyo Hindida intii aynu hore ku soo sheegnay oo dil. Qaanuunka Ruushkuna wuu ka wada duwanyahay Qaanuunadii aynu soo sheegnay oo idil hadba in leeg inta u dhexaysa shacbiga Ruushka iyo shacbiyada kale. Sidaas oo kale weeyaan Qaanuunada Faransiiska, Jarmalka iyo dhamaan Qaanuunada kale.

Sidaasi awgeed ayaa Qaanuunada loogu nisbeeyaa ummadaha iyo shacbiyada. Loona yidhaahdaa Qaa-Qaanuunka *Ingiriiska*, ka *Jarmalka* iyo ka *Jabbanka*. Ku nisbanyta Qaanuunka ummadda lagu nisbaynayo waxaa la sugaa mar allaale marka la sugo goorta uu ka dhex curtay. Ama uu la xidhiidhay taariikhdeeda ee uu raad ku yeeshay caadooyinkeedii iyo dhaqankeedii. Lana socday arrimaheeda ijtimaaciga ah, kuwa siyaasadeed, iyo kuwa diineed. Mar haddii ay sugnnato qaanuunka oo lagu nisbeeyo ummaddu, waxaa sugnaanaya xaqa uu u yeelanayo sharciyeyntiisa iyo xukunkiisa. Sidaasi ayaanad u arkayn ummaddii oo diidan ixtiraamka qaanuunka iyo adeecidoiisa. Waayo marka ay xaaladdu sidani oo kale tahay iyada lafteedii ayaa is xukumaysa. Waxayna dabaggelaysa wixii ay ku hirato ee ah caadooyin, dhaqan, asluub, nidaam iyo caqiidaba.

Sidaasi ayey kuwa dejiya Qaanuunku ee dal kasta oo caalamka ahi ugu dedaalaan haddii ay ummad uga soo qaadaan Qawaaniinta ummad kale in ay habeeyaan waxa ay soo qaadanayaan si uu ula kulmo Qawaaniinta ummadda oo uu u waafaqo habkeeda. Waayo waxay ogyihiin in haddii ummad lagu waajibiyo qaanuun kale iyadoon la sii dabagelin waxa labada ummadood u dhexeeya ee ah khilaaf in ay taasi micnaheedu tahay tiiyo labadii ummadood midkood ay ka tagto caadooyinkeedii, dhaqankeedii, asluubteedii, haabkeedii iyo sharciyadeedii. Taasi oo micnaheedu yahay in



ay labadii ummadood midkood faraha ka qaaday nidaamkeedii ijtimaaciga ahaa, diinteeda, diidayna caqiidadeedii.

## QAWAANIINTEENNU WAA MID SHISHEEYE

Laakiin tiirkaasi ugu horreeya ee qaanuunka ayaa
Laakiin tiirkaasi ugu horreeya ee qaanuunka ayaa si weyn loogu hilmaamay qawaaniinta deggan ee lagaga dhaqmo *Masar* iyo dalal badan oo Islaam ah. Waxaa loo soo guuriyey qawaaniintii Yurub oo soocan iyadoon la sii baandhayn. Waxaana lagaga dhigay qawaaniin ku qasab ah dal uu ka talinayo Islaamku, oo uu xukumayey muddo saddex iyo toban qarni ah. Tiiyo ah dal ay badidiisu ku hirato Islaamka. Doonayaanna oogidda sharciyantiisa iyo axkaamtiisa. Iyo diididda wixii uu u diiday ee ah amarro iyo axkaam. Waxaana caqli galka ahaa in ay arrintaasi ku sii xeeldheeraadaan kuwaasi u soo guuriyey qawaaniinta Yurub dalalka Islaamka. Laakiin waxay ahaayeen qaar aan wax khayr ah lahayn. Sidaasi ayey qawaaniintoodu ku ahayd mid shisheeye ah dalalka Islaamka. Taasi oo aanay la xidhiidhayn xilligoodii hore iyo kan haatan lagu jiro. Kana taagnayn bilowgoodii iyo horumarkoodii. Wax xidhiidh ahna aanay la lahayn caadooyinka dadka deggan. Waxbana aanay ka wadan aadaabtooda iyo akhlaaqdooda, meelnaba aanay

ka soo gelayn diintooda iyo caqidadooda.

Dadyahow musliinta ahi, qawaaniinteennu waa qaar innagu shiisheeye ah, oo loo soo raray ciid aan ciideedii ahayn iyo jawi aan jawigeedii ahayn, iyo dad aan wax xidhiidh ah la lahayn. Kuwaasi oo diidan oo Ilaahay ka baryaya sidii ay u dumi lahaayeen. Waa qawaaniin lagu gaaloobayo oo bannaynaysa jidkii Alle-diidnimada. Iyo habab in wax kasta layska xalaashado bannaynaysa. Meelna kagama abtirsato Islaamka. Waana qawaaniin aan ku qotomin tiirarkeedii. In laynoogu abtiriyaana ma habboona. Waa sidii caruur garac ah oo kale oon aabbe gaar ah lahayn.

## QAANUUNKU WUXUU ILAALIYAA CAQIIDADA :

Tiirka labaad ee qaanuunku waa in uu fuliyaa danta bulshada, una dhammaystiraa baahideeda. Fidiyaana nabad, iyo xasilooni afraadeeda dhex marta. Baahida ugu weyn ee lagama maarmaanka u ah bulshada waxaa ka mid ah ilaalinta caqiidadeeda iyo nidaamkeeda iyo ixtiraamka caadooyinkeeda iyo dhaqankeeda. Dalalka Islaamkana waxay bulshadu u hoogaansantahay Islaamka. Nidaamkeeda ijtimaaciga ahina wuxuu ku qotoma Islaamka. Caqiidada dadka badidiisuna waa Islaam. Akhlaaqdooda, asluubtooda iyo caadooyinkooduba waxay ku milanyihiin Islaamka. Waxaa hadaba caqli gal ahaa in ay qawaaniinta dalalka



Islaamku waafaqsantahay tusaalooyinka Islaamka. Lana socoto caqiidadan muslimiinta, ay dhowraysaa dareen kooda. Laakiin qawaaniintaasi waxay noqde n qaar khilaafsan Islaamkii. Oo welba ku xadgudbaysa muslimiinta, ku dheel dheelaysa caqiidadooda, dilaysa dareenkooda oo ku ciyaaraysa wixii muqaddaska u ahaa, kana boobaysa xuquuqdooda. Kalana dhex geleysa iyaga iyo waajibaadkoodii. Sidaasi ayey qawaaniintaasi u tahay mid ka xadgudubtay hawshoodii. Halkaasina ay kaga luntay wixii loo dejiyey awgeed. Tiiyo ay ugu wacantahay in ay astaamaheeda ku weydo, iyadoo ku qotonsatay tiirarkeedi qaar aan ahayn. Kuna dhaqaaqday wax aan ahayn himiladeedii iyo qaayaheedii toona.

Foolxumadu ma saarna qaanuunkaasi miskiinka ah. Ee waxaa ceebta iska lch kuwaasi soo guuriyey, iyagoon waxba moogayn. Kuwaasi oo qawaaniintii Yurub u soo maanguuriyey dalalkii Islaamka.

Iyagoon xisaabtaba ku darsan kala geddisnaanta diinta, bulshada iyo taariikhdaba. Iyo iyagoon garowsanin in hawshoodaasi awgeed ay qawaaniintii ka qaadeen dabiicadoodii, garabmariyeenna qaayaheedii. Qawaaniintii ay ahayd in ay badhaadheeyaan bulshada oo ay ku dhex fidiyaan xasilooni afraadda dhexdooda, ayey ka dhigeen qawaaniin dhibaysa dareenka, madoobaynaysa qalbiga, fidinaysana xumaan iyo Qudhun. Bulshadana u soo jiidaysaa dhibaato iyo xanuun.

## QAANUUNKA KHAYRKA AYUU KU ADDIYAA SHACBIGA

Waxaa ka mid ah tiirarka qaanuunka in uu shacbiga ku aadiyo khayrka iyo dhammida. Laakiin qawaaniinta reer Yurub ee loo dejiyey dalalka Islaamku waxay dadka u horseedaysaa sharka iyo colaadda. Waxayna shacbiga ku dhaqaajinaysa fasahaadka iyo burburka. Daliil ka ugu runtabadani waa waaqaca taagan. Waayo qawaaniintaasi ka hor waxaynu dadka ugu foojignayn xagga khayrka. Waxaynuna uga dhoweyn xagga samafalka. Waxaynuna ugu dhakhso badnayn, gargaarka iyo naxariista. Ilaa ay qawaaniintani inoo timid. Innaguna kelliftay in aan farabaxno caadooyinkeenii wanaagsanaa iyo dhaqankeenii sharfanaa. Waxayna innagu qasabtay in aan iskaga tagno akhlaaqdii heerka sare ahayd, iyo baniiaadminimadii wanaagsanayd ee heerka sare ahayd. Waxayna inoo wanaajisay annaaniimadii. Waxayna innagu dhex beertay dabaroorka maadadaasi xadgudubsan. Waxayna bulshadeenii ku qotonsatay faaiido iyo maslaxad doon. In badan oo innaga mid ahna waxay u horseeday inay wax kasta iska bannaystaan oo ay iska xalaalaystaan. Waxayna u gediday dad ku nool tusaale heer sare ah, iyo akhlaaqdii quraanka, xoolo dabarooraya qariisadooda iyo dugaag raq raadsanaya.



## QAANUUNKA WUXUU SHACBIGA U DIIDAYAA KORKUNOOLAANSHO

Waxuu qaanuunka asal ahaantiisu yahay mid loo dejiyey sidii uu shacbiga uga ilaalin lahaa korkunoolaanshaha, isasarraysiinta iyo dad la dullaysto. Laakiin qawaaniinta la dejiyey ee haatan t⁵agani waa qaar loo dejiye in ay ilaaliso gumeystaha. Una suurtogeliso sidii ay ugu kornoolaan lahaayeen shacbiga muslinka ah. Layskagana sarraysiin lahaa dhallinta dalka. Kana raalli noqon lahaayeen dulliga iyo hooseynta.

Bal tusaale ahaan aan *Masar* soo qaadanno. Tiiyoo ay dhifna ku tahay dalalka Islaamka mid aanu tusaalahaasi qabanaynin.

Wuxuu *Ingiriisku* ka soo baxay dagaalkii sannadkii 1945 iyadoo ay *Masar* ku leedahay dayn dhan shan boqol oo Milyan oo Gini. Dayntaasi oo lagu magacaabo kaydka Istarliiniga ah. Ma kuu muuqata in ay *Masar* ka maarmi karto tiradaasi lacagta ah ee farahaasi leh, si ay *Ingiriiska* u amaahiso? Mise wuxuu Igiriisku weydiistay *Masar* amah, markaasi ayey lacagtaasi amaahisay? Maya! Ilaahaybaan ku dhaartee maaha arrinku sidaasi. Ee waa korkunoolaansho, boob, iyo tuugo uu qaynuunku eegayo oo uu ilaalinayo.

Wuxuu qaanuunka *Masaaridu* u bannaynayaa

*Ingiriiska* in ay ku kornoolaadaan Masaarida. Ka dhacaan maalkooda oo ay ka xadaan luqmadda afkooda. Qaanuunka oo caawinaya awgeed, ayey *Ingiriiska* ugu suurtogashay inuu helo kaydkaasi *Isterliiniga*. Haddii ay doonaanna in ka badan ayey heli karaan.

Qaanuunka *Masar* wuxuu u bannaynaya Ban–iga Ahliga oo asal ahaantiisa ah Ingiriis-in uu bixiyo lacagta waraaqaha ee *Masar* haddii la siiyo qiraallo caddaynno ah oo ka socda khasnadda Ingiriiska halkii uu ka qaadan lahaa kayd dahab ah. Taasi oo ah in mar allaale marka ay Ingiriisku u baahdaan in ay dhacaan hantideenna, in ay garabsanayaan qaanuunkeenaasi loo dejiyey maslaxadooda. Taasi oo ay siinayaan Bankiga ahliga qiraallo khasnadda Ingiriiska, si ay u qaataan wax allaale wixii ay doonaan ee ah maalka Masaarida. Qaanunka iyo kuwa sameeyeyba waxa keliya ee la gudbooni waa in ay gajoodaan *Masaaridu* Marka uu Ingiriisku dhergayo. In ay *Masar* sabool noqoto marka uu Ingiriisku hore u kacayo.

Waxaa dhammaaday dagaalkii markuu sannadku ahaa 1945. Markaasi ayaan bilownay codsi in la soo celiyo deyntii. Laakiin *Ingriiskii* wuu inna meer meriyey Wuxuuna madaxdii *Masar* qaarkood ka doonay in ay deynti faraha ka qaadaan oo loo qaato ilaalintii uu inna ilaaliyey ayaamihii dagaalka. Sidiiyoo aynu innagu weydiisannay ilaalin, iyo in ay ku sii waaran



dalkayaga. Iyo sidiiyoo uu dagaalku ahaa mid naloo caddaystay ama aanu annaku caddaysannay.

Ta mawduuca oo idil ugu muhmisan weli waxba kumaynaan qaadan. Waayo Qaanuunku waa qaanuunkii uun. Welina wuxuu Ingiriisku ku qaataa hantideenna isagoo qiraallo aanaan qaadi karin qiimahooda dhaafsiisanaya. Waa maxay hadaba qaanuunka sidaasi ahi? Waana maxay ragga oogayaa?

Waxay Ingiriisku innaga xadayaan waxa aynu innaku aad ugu baahannay ee ah cunto iyo dhar. Subax walbana waxay innaga ohacayaan waxa suuqeenna yaalla ee ah khudrad iyo hilib. Waxay innooga tagaan wax yar, oo ay baahideenna awgeed sicirka sare u qaaddo. Taasi oo ay u suurto gasho uun inta kari karta. Waxayna fuqarada iyo dadka meel dhexaadka ahi noqdaan waxba la'aan. Wuxuu *Ingiriisku* si joogto ah faraha ugu dhigaan wixii suqeenna yaala ee ah bir, loox, sibidh, iwm, ee ah alaabo waxtar leh. Si askartooda guryo ugu dhisan. Guryo balballadhanna ay ugu sameeyaan saraakiishooda. Waxaasi oo idilna waxay ku qaadanayaan lacag la'aan. Waxaasi oo idilna wax kale maahee waa uun in ay xadayaan quudkeenna, dhacayaan waxaynnu soo saarno, faqriyaynayaan dalkeena, iyadoo ay qawaaniinteenu ilaalinayso, kuna tiirsan xukuumadeenna.

## QAWAANIINTA MASAARIDU WAA QAAR U ADEEAYA GUMEYSIGA

Qawaaniinta *Masaarida* waxaa lagu qotomiyey masaar ay ugu adeegayaan gumeysiga, jecelyihiinna shisheeyaha. Dadka kalena loo suurtogeliyo sidii ay u nuugi lahaayeen dhiigga *Masaarida*. Loogana leexin lahaa Masaarida jidka khayrka. Iyo sidii ay mudadii ugu dheer ugu sii waari laheeyeen jahliga iyo tabaryafida. Uguna jiri lahayd gacanta gumeysiga iyo korkunoolaanshihiisa.

Qawaaniinta cashuurta iyo dhaqaalaha ee magaca *Masar* xanbaarsani waxay ka soo qaadaysaa jeebadaha *Masaarida* Fuqarada ah, si ay u buuxiso jeebadaha *Ingiriiska* maalqabeenka ah. Qofna kuma qaldana hadii uu qof yidhaahdo ujeedada ugu weyn ee laga lahaa qawaaniintaasi waa ilaalinta ganacsiga *Ingiriiska*. Waxaana inna soo maray xilli alaabada jaban loo diidi jiray inay *Masar* soo gasho, haddi ay suuqa ku cidhiidhyeyso alaabada Ingiriiska. Waxaynuuna dhammaanteen wada xasuusannahay in baabuurta, qalabka raadiyaha iyo wixii kale ee alaabo ah ee ka iman jiray *Jabban* aan la goyn kari jirin cashuurtooda tiiyo ah sababtu ahayd in alaabdaasi ay ka jabnayd shan jeerintii ay alaabada *Ingiriisku* joogtay



Qawaaniinta Masar waxay ka dhigeysaa *Masar* samadeeda, dedaalka dhalinteeda iyo handtideedaba mid u adeegeysa gumeysiga. Waxay qawaaniintani innagu waajibinaysaa in aan jidad sameynno oo aan u diyaarinno *Ingiriiska*. Dhisno waddo tareen oo aan ku bixinno danaha *Ingriiska*. Dhisno dekadaha oo aan ballaadhinno si ay ugu soo xidhaan maraakiibta Ingiriisku. In aan ballaadhinno telefonada iyo telegeraamada si ay ugu adeegaan Ingiriiska. Tiiyo ay intaasi oo idil jirto ayey *Masar* soo geleyaan waxyaalaha ay ciidamada Ingiriisku u baahanyihiin, iyo kuwa gaashaanbuurteeda oo idil ee ah qalab dagaal, cunto iyo dhar. Taasi oo aanay *Masar* waxba ka faaiidaysanayn. Waayo waa laga dhaafay cashuurta. Taasi oo uu Ingiriisku Isticmaalayo tareenka *Masar* si uu ugu rarto qalabkiisa, cuntodiisa, askartiisa, Una isticmaalayo si ka badan karaanka ilaa ay wada qabsadaan tareen iyo baabuur oo idil. Sidoo kalena ay isticmaalayaan Telefoonka iyo Telegraakaba. Tiiyo ay waxaasi oo idili jiraan ayuu gumeystahan bakhaylka ahi waxba bixin jirin. Oo ay na moodayeen qaar ku qanacsan cudur daaraha ay bixinayaan.

Qawaaniinta *Masar* waxay u oggolaanaysaa shisheeyaha aqoonta leh ee maalqabeenka ah in ay ribo kula macaamalaan Masaarida juhalada ah ee saboolka ah. Taasi oo u rogeysa hantida Masaarida iyo dadaalkooda hanti ku jirta gacan shisheeye. Kana buuxsanto *Masaaridu* deyn, faqri iyo dulli. Wax aan sidaasi

ahaynna marnaba ma suurtogeleyso maadaama ay labada qolo midkood ku roontahay maalkii iyo cilmigii. Ta kalena ay ku tabaryartahay faqri iyo jahli. Taasina waa mid loo qorsheeyey in ay *Masar* ku waarto dhib iyo hoog, hantideeda oo idilna ay gacan shisheeye gasho. Shisheeyuhuna ay noqdaan ilihii dhaqaalaha iyo nolosha ee dalkan. Bankiyada iyo shirkadaha shisheeye ayaa leh. Madaxa maalka badidiisana shisheeye ayaa leh. Dhoofinta iyo keeniduna gacan shisheeye ayey ku jirtaa.

Oggolaanshaha ribadu waxay ku ahayd dhirbaaxo xooggan dalkan Islaamka ee ay diintiisu xaaraantimaynayso ribada. Taasi oo ah in haddi ay qofka muslinka ah ku qasabto in uu soo deynsado maal ribo la soo dulsaaray, waxaa isaga ka xaaran ah in uu ribo dadka sii saaro, ama uu kula macaamalo aasaas ribo ku qotoma. Sidaasi ayuu muslinka dhibbani yahay mid joogto loo xadayo. Aan marnabana soo ceshan karin wixii laga xaday. Sidaasi ayuu dhibtaasi ugu jirayaa ilaa uu ka maalqabeenka ahi kaga faaiidayo ribadaasi uu dulsaarayo.

Waxay qawaaniinta Masaaridu ku bannaynaysaa khamriga dal Islaam ah, oo ay diintiisu xaraantimaysay khamriga. Maalintii ay *Masar* xalaalaysay Khamriga, lagama helayn Masar hal qof boqolkiiba oo garanayey waxa uu Khamriga yahay. Mana jirin Masar oo idil qof keliya oo doonaya in Khamriga la fasaxo. Ama ka dacwoonaya xaaraanteedii. Waayo diinta Islaamku



haddii ay qofka Muslinka ah ka xaaraantimeysay Khamriga, kamay xaaraantimayn qofka aan Muslinka ahayn. Laakiin madaxdii Masar ee Muslimiinta ahayd ayaa ka baxay Islaamkii oo caasiyey axkaamtiisii. Tiiyo ay ugu wacantahay uun si ay ugu dhadhawaadaan shisheeyaha. Una raalli geliyaan gumeystaha. Ama in ay u diidaan naftooda tuhunka ugu sharafta badan. Kaasi oo ah tuhunka ku dheggenaanta Islaamka iyo axkaamta Islaamka.

Sidaasi oo kale ayey qawaaniintii *Masar* ku bannaysay sino dal ay diintiisu xaaraantimaynayso sinada. Akhlaaqda dadka degenanina aanay oggolayn sino. Caadooyinkooduna ay diidanyihiin bannaynta sinada. Laakiin qaanuunku wuu ka baxay diintii, akhlaaqdii iyo caadadiiba. Wuxuuna banneeyey sinanadii, fududeyeyna dhillaysigii. Si uu naagaha Masaarida ugu gacan geliyo shisheeyaha, iyo askarta gumeystaha. Sidii uu horeyba Khamriga ugu oggolaaday. Dawladahaasi Islaamka iyo qawaaniintooda kharribani ma waxay kaga bakhayli gumeysahaasi shisheeyaha ah ku raaxaysiga khamriga iyo naagaha iyagoo u soo fidiyey wixii dal oo idil yaalley ee ah dhul, biyo, hawo maal, cunto, iyo sharaf.

Qawaaniinta xadidaysa xornimadeenna guuritaanka, kulanka iyo wax qoriddu waa mid loo dejiyey inay ilaaliso gumeysiga. Innoma suurtogeleyso in aan ka guurno dal oo aan dal kale oo Islaam ah tagno iyadoo dhibi innaga soo marto mooyee. Waxaabay-

naan gaadhi karin dalka dhinac kale oo ka mid ah. Sida uu xaalku hadda yahay *Masar* iyo *Soodaanba*.

Qaanuunka isku soo ururka, mudaaharaadka, kulanada, iyo qaanuunka daabacadda, iyo ururaduba waa qaar u adeegaya gumeysiga uun. Sidaasi ayaa loo qariyey dadweynihii oo lagu dhex riday qafas. Xaqiisa xallilaadiisuna waxuu ku jiraa xornimo iyo sinaan.

Qanuunka hubka ee dadka u diidaya hub qaadas-hada nooc kasta ha ahaadee. Xataa makiinadda yar ee afka keliya leh. Miyaan taasi loo dejin in la farama-dhiyo gacanta dadweynaha. Lagana tabaryareeyo sidii uu iskaga caabiyi laha cadowga. Lagana xaaraan-timeeyo xaqiisa dabiiciga ah ee daafacaadda naftiisa. Lana kala dhex galo isaga iyo wax[5] ay diintu ku waajibinayso; ku waajibinayso raganimadu. Ku waa-jibinayso sharaftidu ee ah la jihaadka gaalada ilaa dalka laga saarayo iyagoo liita?

Waa kuwaasi tiirarka faasidka ah ee ay ku qoto-maan qawaaniinteennu. Waana kuwaasi tiirarka saxa ah ee lagama maarmaarnka ah in uu qaanuunku ku qotonsado. Qaanuunkuna micne ahaantiisa waa mid wax dulmaaya. Waxaana ugu Wacan kuwaasi inoo dejiyey. Waxay inoo dejinayaan qawaaniin aan ku habboonayn in naloo sharciyeeyo. Waayo ma waafaq-sana diinteenna, iyo shariicadeenna. Mana dhawrayso danaheenna. Mana buuxinayso baahideenna. Wax aan shar iyo xumaan ahayn innooma keenayso. Way



inna dullaynaysaa. Inna faqrisiinaysaa. Dad kalena u suurtogelinaysaa in ay qoorta iskaga keen taagaan. Waa qawaaniin gumeysi ee maaha qawaaniin aynu leenahay. Waa silsilado qoorta noo sudhan maxa inooga dhib badan qawaaniintaas laynoogu magac darayo.

Waxay innagu xukumaysaa hanuun la'aan. Waxayna inoo geynaysaa gaalnimo iyo faqri. Waxayna innagu dhex ridaysaa xumaan iyo qolo qolo.

## GOORMA AYUU QAANUUNKU YEELANAYAA AWOOD

Waxaynu hore ku soo sheegnay in uu qaanuunku micne ahaan yahay baahi aanay dhinacna bulshadu uga baxsan karin inta lagu noolyahay noloshan adduunyada. Qaanuunka ayaa lagu habeeyaa bulsha-da, laguna qaybiyaa caddaalad bulsheedka, ummadna loogu jeediyaa khayrka iyo dhammida.

Lakkin qaanunku micne ahaan, uma suurtogeleyso in uu danihiisa fuliyo, ilaa lagu daro qodobbo dhawra-ya micnihiisa qaanuuneed ee sarreysa. Kuwaasoo ka ilaalinaya, beddelaadda, leexinta iyo illowga. Qodobadaasina waa kuwa aan ku magacowno jidhka qaanuunka. Taasi oo ay dejiyaan Garyaqaanada, madaxda iyo kuwa xaqa u leh sharciyenta.

Waxaynu odhan karnaa markaasi in uu qaanuunku yahay sida qofka nool oo kale. Leeyahayna jidh iyo

qaanuun. Jidhka qaanuunka waxaynu u soo garanay in uu yahay qodobada uu dejinayo ka sharciga dhigayaa, si uu u xaqiijiyo danihii awgood loo dejiyey qaanuunka. Ruuxa qaanuunka waxaan uga jeedna awoodda uu qaanuunku ku leeyahay dadweynaha. Qaanuun aan awodd lahaynna waa jidh bilaa ruux ah. Iyo qodobbo aan qiimo lahayn. Hagaagsanaanta qaanuun kasta oo xukuma dadka waxaa lagu qadiryaa sida uu awood dadka ugu leeyahay. Hagaagsanaantaasina waxay ku kale duwantahay iyadoo loo eegayo xoogga awoodda qaanuunka iyo tabaryaridiisa.

Awooda qaanuunku ku leeyahay dadweynuhu wuxuu ku qotomaa laba cunsur oon mid saddexaad lahayn:

1. Cunsur ruux soocan ah. Taasi oo ah sida ay qodobada qaanuunku ku gaadhayaan nafta afraadda iyo quluubtooda, kana dhigaysa in ay aqbalaan qodobada qaanuunka, aqbalaan addeecideeda, dhawraanna ixtiraamkeeda. Naf ahaantoodana ay ka dareemaan in ay denbi geleyaan haddii ay khilaafaan.

Cunsurkaasi ma suurto geleyo in la helo ilaa ay qodobada qaanuunku ku qotomaan caqiido ay dadweynuhu aaminsanyihiin. Ama diin ay ku soo hiranayaan. Ama mabaadii ay qadarinayaan ama caado ay ku bedaalayaan ixtiraamkeeda.

2. Cunsurka waajibinta qaanuunka. Kaasi oo ah qaybta uu ku qaadayo qaanuunku kuwa khilaafa, sida ciqaabta, ganaaxa, fasakhaadda, burinta iyo



wixii la mid ah.

*Noocyada Qaanuunka:* Qawaaniinta iyo sharciyada caalamka oo idili waxay ku noqonaysaa daddex nooc iyadoo loo eegayo hadba inta ay awood leedahay.

*Nooca Kowaad:* Waa ka ay awoodiisu ku qotonto cunsurka ruuxiga iyo cunsuurka waajibinta oo wada socda. Nooca sidaasi ah ee sharciyeynta ayaa ugu waari og. Waana ka dadweynaha ugu awood badan. Waayo wuxuu xukumayaa asluubta dadka ee hoose ilaa uu la xidhiidho caqiidooyinkoodii iyo caadooyinkoodii. Wuxuuna xukumayaa asluubtooda muuqata. Taasi oo ah abaalmarinta uu ku waajibinayo. Tiiyo caawinayso xukunka asluubtooda muuqata caqiidooyinkooda iyo dammiirkoodu. Taasi oo uu ka wada talinayo asluubtoodii muuqatay iyo asluubtoodi qarsoonayd, siinaynna jiho keliya. Sidaasi ayey qaanuunkii u addeecayaan caddaan ahaan iyo qarsoodi ahaanba, hadii ay liitaan iyo ay ladanyihiinba. Taasi oo ay addecidda hore ugu dhaqaajinayso quluubtooda aaminsan, iyo naftooda is canaananaysa.

*Shariicada Islaamku waa ta ugu fiigan noocaasi:* Waxaa tusaale noocaasi ah ugu fiican shariicada Islaamka. Tiiyo ay jirto in ay hoos imanayaan qawaaniinta la dejiyey qaarkood. Taasi oo loo baahanyahay in aan loo fahmin taasi in dabiicada shariicada Islaamku ay la mid tahay dabiicada qaanuunka. Waayo shariicada iyo qaanuunada la dejiyey waxay leeyihiin khilaaf

aasasi ah oo ku noqonaya khilaafka dabiicada labada sharci.

Khilaafka ugu weyn ee dabiicada shariicada Islaamka iyo dabiicada qaanuunku waa:

A) *Dhinaca cunsurka ruuxiga:* Gunsurkani xagga shariicada Islaamka wuu kaga xoogganyahay qaanuun kasta iyo shariicad kasta oo arlada dusheeda ah. Waayo shariicada Islaamku waxay cunsurka ruuxiga ka siinaysaa qayb qodob kasta oo sharci ah. Iyo saldhig kasta oo sharciyeyn ah. Ha ahaado mid gebia-haaneed ama mid laan ah. Taasi oo ah in uu Islaamku ku waajibinayo qof kasta oo muslin ah in uu hagaajiyo akhlaaqdiisa, caadadiisa, dhaqankiisa, aadaabtiisa iyo xidhiidhka uu dadka kale la leeyahay. Iyo wixii isaga ka soo fula oo idil ee ah hadal iyo ficil. Taasi oo uu u wado sida ay diinta Islaamku farayso. Tiiyoo ay shariicadda Islaamku tahay amarro, wax diid, iyo tusaalooyinkii uu la yimid Islaamku Taasi micneedu waa in qodob kasta oo ka mid ah qodobada shariicaddu uu ku qotomo diinta, iyadana taabanayaan quluub-tooda iyo naftooda.

Arrinku sidaasi maaha marka la eego qawaaniinta degsan. Taasi oo ah Haddii qodob ka mid ahi ku qotomo diinta, ama akhlaaqda, ama caadada, ama dhaqanka ay agtiisa jiraan boqolaal qodob oo kale oo ku qotoma wax ay madaxdu doonayso iyo damacooda. Sidaasi ayaanay u suurto gelayn in cunsurka ruuxigu



ku yeesho qayb wareegga qawaaniinta la dejiyey. Marka laga reebo in yar oo ka mid ah saldhigyada qaanuunka.

Sida la ogsoonyahay, in aas⁵askii qawaaniinta la dejiyey ee Yurub oo idil yahay q⁵anuunkii Roomanka. Waxaana qaanuunkaasi la helay oo la dhammaystiray ka hor diinta Kiristaanka, ee dalalka Yurub diinta u ah. Markii ay diintu timid meel muhiin ah kumay yeelan qaanuunka gaarahaan. Iyaduna lamay iman sharcii u gaar ah. Sidaasi ayey kuwii sharciga dejinayey ugu ekaadeen in ay qaanuunka ku kordhiyaan qodo-bada qaarkood, oo ay ku jiraan jiritaanka diinta cusub, dawladaha oo ku qotonsada, iyo in laysku hawliyo sidii dadka loogu dhex fidin lahaa.

B) *Dhinaca akhlaaqda:* Waxay shariicadu ku tirisaa akhlaaqda wanaagsan arrinta ugu horreysa ee ay bulshadu ku taagantahay. Sidaasi awgeed ayey ugu dedaalaysaa il⁵alinta akhlaaqda. Waxayna sii xooji-naysaa ilaalintaasi ilaa ay ku dhowaato in ay ciqaabto dhammaan hawlaha taabanaya akhlaaqda. Laakiin qawaaniinta la dejiyey waxay ku dhowyihiin in ay u hilmaamaan masa'ladaha akhlaaqda si buuxda. Xilna aanay iska saarin ilaa ay dhibaato toos ahi haleesho afraadda, ama nabadda, ama nidaamka. Qawaaniinta la dejiyaa tusaale ahaan ma ciqaabto sinada ilaa labada qof midkood la qasbo. Ama ay sinadu ahayd mid aan si buuxda raalli looga ahayn. Waayo sinada

labadaasi jeerba waa mid dhibaatadeedu toos u taabanayso afradda iyo nabadda guudba. Laakiin shariicadda Islaamku way ciqaabaysaa sinada weji kasta oo ay leedahay iyo si kasta oo xaalku yahay. Waayo waxay ku tirinaysaa sinada denbi taabanaya akhlaaqda. Haddii ay akhlaaqdu xumaatana, bulshadiina way xumaan. Waxaana haleeli xumaan weyn. Qawaaniinta la dejiyey badidoodu ma ciqaabaan Khamri cabidda. Sakhraanimadana laf ahaanteeda lama ciqaabo. Ee wax⁵a la ciqaabaa sakhraanka haddii suuqa laga dhex helo isagoo si cad u sakhraansan. Waayo xaaladdaasi oo kale waxay joogiddiisu u keenaysaa dadka dhib iyo xadgudub. Ciqaabtuna maaha mid ku eg sakhraanimada laf ahaanteeda oo xumi lagu tirinayo, Khamricabiddana lagu tirinayo mid dhibato u keenaysa caafimaadka, saaraysa maalka, oo xumaynaysa akhlaaqda. Laakiin shariicadu waxay ciqaabaysa Khamri cabidda. Xitaa haddii aanu sakhraamin ka cabbayaa. Waayo waxay masa'ladda ka eegaysaa dhinaca akhlaaqda. Waayo hadii ay hallowdo akhlaaqdu waxaa hallaabaya caafimaadkii, maalkii dhiiggii, nabad ilaalintii iyo nidaamkiiba.

Cilladda ku jirta shariicaddi Islaamka oo xil weyn sidaasi iskaga saartay akhlaaqdu waa tiiyo ay shariicadu ku qotonto diinta, Diintuna ay farayso akhlaaq wanaag, kuna dhiirigelinayso wanaagga. Una jeeddo sidii loo abuuri lahaa bulsho suubban oo khayr leh. Tiiyo diintu aanay oggolayn in la beddelo



ayey taasi micnaheedu tahay in ay shariicaddu ku taagnaanayso ilaalinta akhlaaqda.

Cilladda fududaysiga qawaaniinta la dejiyey fudu daysatay akhlaaqdu waa tiiyo aanay qawaantaasi ku qotomin aasaaska diinta, xataa haddii ay jirto qodobaddeda qaarkeed ay xil iska saaraan diinta.

Qodobadooda inta badanina waxay ku qotomaan aasaaska waaqaca, iyo waxa uu dadku ka garanayo. Saldhigyada qaanuunada la dejiyaa waa qaar la bedbedeli karo. Waxaana dejintooda iyo bedelaadooda ku kaca afraadda ka muuqda bushada iyagoo isla kaashanaya madaxda. Waxaana hawshooda ku lug leh hawooyinkooda iyo tabaryaridooda baniiaadminimo, iyo doonistooda u dabiiciga ah in ay xadhkaha ka madax bannaanaadan. Waxaana iska dabiici ah markaasi in ay qawaaniinta la dejiyey iska hilmaamaan masa'ladaha akhlaaqeed tartiib tartiib. Ilaa la soo gaadho xilli ay wax kasta oo layska bannaystaa noqotay saldhiggii iyo akhlaaqdii suubaneyd. Waxaana laga yaabaa in dalalka lagu dabbaqayo qawaaniinta la dejiyey ay ilaa heerkaasi gaadheen.

C) *Dhinaca Unkanka:* Waxay shariicadu ka soo baxdaa Ilaahay. Waayo waxay ku qotontaa diinta Islaamka. Taasi oo xagga Eebbe ka timid. « **diinta Ilaahay agtiisa ahi waa Islaamka** ». « **Ka wax aan Islaam ahayn diin ka dhigta la ga aqbli maayo** ». Laakiin qawaantiinta la dejiyaa waxay ka soo baxaan dadka

banii'aadmiga ah ee qawaaniintaasi dejinaya. Waxayna jiritaanka shariicada Islaamku leedahay laba natiijo oo muhim ah. *Natiijada kowaad:* Saldhigyada sharciga oo loo ixtiraamo si buuxda ha ahaado mid talinaya iyo mid loo talinayaba. Waayo labadooduba waxay rumeysanyihiin in ay xagga Eebe ka timid. Waajibna ay tahay in la ixtiraamo. Rumeysnaantaasi lafahaanteeda ayaa ku dhaqaajinaya afraadda in ay adeecaan saldhigyada sharciga. Waayo daacadu waxay ku dhoweynaysaa Ilaahay sida diinta Islaamku dhigeyso. Caasinimaduna waxay keenaysaa ciqaabta adduunyada iyo ka sii daran oo ah ciqaabta Aakhiro. Shariicadaasi Ilaahay loo nisbeynayo ayaa keentay in afraadu ixtiraamaan oo ay adeecaan. Shariicad kasta oo caalamka jirta waxaa lagu qadariyaa qiimaheeda hadba sida ay nafaha afraaddu ugu hayaan adeecid iyo ixtiraam. Mana jirto caalamka oo idil maanta mid ugu soo dhawaan karta shariicada Islaamka waxay ay awood leedahay. Shakina kuma jiro in mar kasta oo ay afraaddu ixtiraamaan shariicadooda, addeeccaan oo ay jeclaadaan, waxaa sugnaanaya amuurahooda, waxaana hagaagaya xaalkooda. Waxayna firaaqo u heleyaan amuuraha adduunyadooda.

*Natiijada labaad:* Sugnaanta saldhigyada sharciga iyo joogtadooda. Xataa haddii ay madaxdu isbedesho, ama ay is khilaafaan nidaamyada xukunka. Taasi oo ay iskugu mid ka tahay haddii ay guddiga talinayaa yihiin joog to ama mid cusub. Iskugu midna yihiin haddii uu nidaamka xukunku yahay Jamhuuriyad ama Boqortooyo. Waayo waxaasi oo idili raad kuma yeelanayaan saldhigyada sharciga. Waayo saldhigyada sharciga ahi kuma xidhna hay'adda talinaysa. Kumana xidhna nidaamka xukunka. Ee waxay ku xidhantahay diinta Islaamka een isbedelayn. Taasi oo uu rumeysanyahay madax kasta oo taliyaa. Una shaqaynayo nidaam kastaa. Arrinkuna sidaasi maaha marka la eego qawaaniinta la dejiyey ee ay u dejiyeen madaxdu mabaadii ay wataan awgeed. Iyo si ay ugu gargaarto nidaamyada ay oogayaan. Waayo qawaaniintaasi waa mid si joogto ah isku bedelaysa. Waxayna dabiicadeedu tahay sugnaan la'aan. Waxaana ku filan in ay hay'adda talinaysaa isbedesho ama nidaamka taagani isbedelo si ay isku bedesho qawaaniintu oo la aqalabaa gediiyo dhigaalada.

Waa sidaasi shariicadda Islaamku iyo waxay wadato Ilaahay oo lagu nisbaynayaa. Laakiin qawaaniinta degsani sidii aynu horeyba u soo sheegnay waa mid ay samaysay qolada talinaysaa. Marka ay dejinayaanna waxay eegayaan maslaxaddooda oo laga hormariyo dadka kale. Waxayna isku dayayaan in ay qawaaniinta ku ilaaliyaan dadka talinaya, ee xukunka haysta, iyo mabadaadiida ay wataan, iyo nidaamyada ay oogayaan. Haddii ay qolodaasi tagto oo ay qolo kale meesna qabsato, waxaa isbedealaya qawaaniintii si ay u ilaaliso qoloda cusub, mabaadiida cusub, iyo

nidaamyada cusub. Sidaasi ayey qawaaniintu isku bedeleysa marka ay isbedelaan kuwii talinayey, mabaadiidii iyo nidaamyada uu xukunku ku qotomo. Mar walbana waa tii sidaasi uun isku bedesha. Waxayna taasi keenaysaa qaanuunkii oon la ixtiraamayn iyo awoodii uu nafta ku lahaa oo dhimatay.

Waxaynu aragnaa xisbiyada mucaaridka ah ee caalaamka oo ugu baaqaya dadkooda gacanta siinaya in ay fududaystaan qaanuunka oo ay diidaan axkaamtiisa, si ay danahooda u gaadhaan. Xisbiyadaasi mucaaridka ahi wax denbi ah kuma laha waxa ay ku baaqayaan. Waayo waxay arkaan in ay qaanuunada sameeyeen afraad la mid ah oon ka khayr badnayn. Iyo nidaamyo xun sida iyagu u arkayaan.

Waxa maanta ka dhacaya dalalka Yurub oo ah isbeddel nidaamyo, madax iyo wejiyo xukummadeed ayaa daliil innagu qancinayo ah in ay haybaddii ka guurtay qaanuunkii, awoodiisiina baaba'ayso haddii uu xaalku sidaasi ku sii socdo. Waxaana dhawaan iman doona xilli ay qawaaniinta la dejiyey ka lunto qiimahoodii. Dhaafsiisnaynna waraaqahaasi lagu qoray.

*Nooca Labaad:* Kaasi oo ta ay ku qotonto awoodda qaanuunku ee ah cunsurka waajibinta oo keliya. Awoodda noocaasi ah ee qaanuunku waa mid tabar yar. Waayo qaanuunku wax xidhiidh ah lama laha nafta iyo qalbiga. Waxayna dadku qaadanyaan iyagoo karahsan. Mana qaadanayaan iyagoo addecsan. Waana kuwii khilaafa haddii ay ogyihiin inay ka baxsan karaan ciqaabtiisa.



Dadkuna heer kasta oo ay ka gaadheen aqoon, iyo heer kasta oo ay ka gaadhsiisanyihiin waxgaradnimo, weligoodna uma soo joogsadaan baaq aan ahayn mabda'iyo caqiido, ama aanay ahayn akhlaaq heer sare ah, ama aanay ahayn dan iyo maslaxad. Haddii uu qaanuunku ka madhnaado waxa la xidhiidha mabaadiida iyo caqiidada, ama uu ka madhnaado akhlaaq iyo wanaag, oo ay ferdiga ugu jirto dan iyo maslaxadi khilaafadda qaanuunka, way ku yartahay in la nabad geliyaa qaanuunka.

Waxaana noocaasi oo kale hoos yimaadda badi qaanuunada u degsan caalamka. Gaar ahaanna qawaaniinta ay ka maqanyihiin diinta, caqiidada, akhlaaqda iyo wanaagga baniiaadminimo.

## QAWAANIINTII KA HOR KACAANKII FARANSIISKA IYO KA DIB:

Waxaa run ku qotonta haddii aynu nidhaahno, qaanuunada degsani waxay ahaayeen qaar awood leh wixii ka horreeyey kacaankii Faransiiska. Waxayna awoodiisu iskugu jirtay cunșurka ruuxiga oo xadidan iyo cunsurka waajibinta. Waxayna qodobada qaanuunku iskugu jireen saldhigyada wax faridda iyo diidka, ee laga dhaxlay Roomanka iyo kuwo kale. Waxaana ka mid ahaa qaar ah mabaadiida akhlaaqeed,

caadooyinka, dhaqanno, iyo xukun horraado. Waxaana tarraxayey in yar oo ah saldhigyadii diineed oo isku khilaafsan hadba sida ay u kala geddisanyihiin diinaha iyo madaahibtu.

Ka dib kacaankii Faransiiska ayey kuwii sharciyada habayn jiray ee reer Yurub ka saareen qawaaniintii degsanayd wixii taabanyey ee ah diin, caqiido, akhlaaq, iyo wanaag baniiaadminimo, ilaa ay heer weyn ka dhammeeyeen. Waxayna qawaaniintaasi noqotay qaar ku eg uun habaynta cilaaqaadka afraadda ee maadiga ah. Iyo wixii taabanayaa nabadgelyada, nidaamka xukunka iyo nidaamka bulshada. Halkaasi ayaa lagaga joojiyey cunsurkii ruuxiga qaanuunkii. Waxaana halkaasi lagu waayey awoodii uu ku lahaa afraadda iyo shacbiga.

Waxayna keentay hilmaankii diinta iyo caqiidadu, iyo fogeyntii akhlaaqdii iyo wanaagii laga fogeeyey, natiijooyinkiisa qasabka ah. Waxaa xumaatay akhlaaqdii, waxaa shaacday qaskii iyo qalaanqal. Waxaa ku beermay dadweyinihii inay fududeystaan qaanuunka. Waxaa farabatay kacaanadii. Waxaana tirobatay afgenbiyadii. Waxayna nidaamyadii isku bedbedeleen sida hawada. Waxaana laga waayey xasilooni iyo degenaansho noloshii dadka.

Waxay nimankii sharciyada habaynayey galeen qaladkaasi fooshaxun. Tii yoo ay ugu wacnayd in ay dooneen in ay xaqiijiyaan mabda'a sinnaanshaha ee afraadda dhexdooda. Iyo in ay dabbaqaan mabda'a



xornimada caqiidada. Waxayna arki waayeen qaab kale oo loo dabbaqo labadaasi mabda' oo wada socda ilaa ay qaanuunka ka saaraan wixii taabanaya caqiido iyo akhlaaq. Dabbaqaadaasi fooshaxumi waxay u keentay natiijooyinkaasi murogada leh. Haddii ay qaadi lahaayeen jidka shariicada Islaamka, way u suurto geli lahayd waxay doonayeen ee mabaadii ahi. Xumaantaasina kumay dhaceen.

*Siday uga gudubtay shariicadu hadimadani:* Shariicada Islaamku waa shariicad aasaaskeedu yahay Islaam. Dabeecad ahaanteeda waa shariicad diineed. Waxaana saldhigyadeeda ugu horreeya ka mid ah inay u simantahay muslimiinta iyo kuwa aan Muslimiin ahayn ee loo yaqaan Dimmiyiin. Mabaadiida ay shariicaddu u timid kuwa ugu muhimsan waxaa ka mid ah mabda'a sinnaanshaha iyo mabda'a xornimada caqiidada. Waxaana kulminta mabaadiidaasi kala kulantay shariicadu isla mushkiladdii ka hortimid qaanuunada degsan. Bal hadaba waa yaabee sidee ayey shariicaddii yeeshay? Waxay mushkiladdii u xallishay sidii ugu fiincayd ee u gu fududayd. Taasi oo ay Muslimiintii iyo Magantii (Dimmah) u sintay wixii ay ka sinnaayeen.

Kuna kala gediday wixii ay ku kala duwanaayeen.

Waxay Magantu kaga geddisanyihiin Muslimiinta wixii ku xidhiidha caqiidada uun. Sidaasi awgeed ayaan laga sinnayn wixii caqiidada la xidhiidha oo idil. Sida waaqaca ahna haddii ay sinnaanshaha dadka

simani caadilnimo dhab ah tahay, simidda dadka is khilaafsani waa dulmi cad. Suurtogalna maaha in tani lagu tiriyo arrin ka baxsan saldhigyada sinnaanshaha. Ee waxaabay sii adkaynaysaa sinnaanshihii. Caddaaladina ma jirayso haddii laga simo Muslimiintii iyo Magantii wixii la xidhiidha caqiidada diined. Waayo taasi micnaheedu waa in ay Muslimiintu qaadaan wax waafaqsan caqiidadooda. Magantuna qaadaan wax khilaafsan caqiidadooda. Waxay kaloo taasi micnaheedu tahay in aanay ka hor iman Muslimiintu waxay rumeysanaayeen. Laguna qasbo wax aanay diin ka dhiganayn. Ugu danbayn micnaheedu waa ka bixitaanka qodobka Quraanka ee ohanya: « **diinta layskuma qasbo** » Al-Baqr-256.

Tusaale ahaan, arrimaha ay shariicaddu ku kala geddiyeyso Muslimiinta iyo Magantu waa denbiyada ku qotoma aasaas dii need sida Khamri cabidda, cunidda hilibka Doofaarka. Shariicaddu way xaaraantimaysaa cabbitaanka Khamriga, iyo cunidda hilibka Doofaarka. Waxaa caddaalad ah in xaaraantimayntaasi lagu dabbaqo qofka Muslinka ah ee ay diintiisu xaaraantimaysay cabidda Khamriga iyo cunidda ih libka Doofaarka. Laakiin waxaa dulmi ah in lagu dabbaqo qofka aan Muslinka ahayn ee rumeysan in cabidda Khamriga iyo cunitaanka hilibka Doofaarku aanay xaaraan kà ahayn. Haddii saldhigyada sinnaanta loo qaato si indho li'i dhego li'i ah waxay Magantu qaadanayaan arrimo aanay xaaraan u haysan. Taasina waa



dulmi cad. Waxayna caddaaladdu ku jirtaa in xaaraantimayntii lagu soo koobay uun Muslimiinta. Taasi oo ah haddii uu qofka Muslinka ahi cabbo khamri ama uu cuno hilib Doofaar uu denbi gelay. Laguna ciqaabayo. Laakiin qofka Maganta ah laguma tirinayo Khamri cabkiisa iyo cunidda hilibka Doofaarkadenbi.

*Nooca saddexaad:* Kaasi oo ah waxa ay ku qotonto awoodda qaanuunka ee ah cunsurka waajibinta oo keliya. Laakiin ay qodobada qaanuunku ka horimanayaan caqiidada bulshada. Kana baxsanyihiin akhlaaqdii la dhaxlay, iyo wanaagii laysku yaqaannay. Qaanuunka caynkaasi ahna waxaa lagu tiryaa mid ka madhan awood, wanaagoodii xanuunjinayana dammiirkooda.

Awood lagama filayo qaanuunkani oo kale. Waxaa laga filayaa cadaadis xooggan, colaad xun, iyo ka hortegid wax laynaysa oo qaanuunka iyo wixii difaacayaa galabsadaan. Ciqaabina waa mid lagama maarmaan u ah qaanuunkani. Laakiin si kasta oo ay dadka caqiidada leh aanay cabsi gelin ciqaabtu. Kana korjoogsan karin waxay doonayaan.

Tusaale ahaan qawaaniinta noocaasi ah waxaa ka mid ah kuwa ka katalinaya Masar iyo dalal kale oo muslin ah.

Kuwaasi oo shariicaddii ku beddeshay qawaaniin la dejiyo. Qawaaniintaasi ooynu horey u soo sheegnay

in ay ka leexdeen hawshoodii. Kuna qotoamin tiirarkoodii. Innakana aan laynagu nisbayn karin. Danaheenana aan ka shaqaynayn. Wax awood ahna aan nafteenna ku lahayn. Meelna aan kaga jirin caqliyadeenna iyo qalbigeenna.

*Gumeystahaa inoo keenay qawaaniintaasi:* Waxaa dabeecadda Islaamka ah in uu xukumo dal kasta oo uu soo galo. Haddii uu Islaamku diin yaheyna waa shariicad buuxda oo qof kasta oo Muslin ah. Sidaasi ayey shariicada Islaamku u ahayd qaanuunka keliya ee dal kasta oo Islaam ah ilaa maalintii uu Islaamku soo galay. Sidaasi ayaanay ahayd ilaa uu gumeystihii gacanta ku dhigay dalalkii Islaamka. Wuxuuna soo geliyey qawaaniintii la dejiey ee Yurub. Ama madaxdii uu dusha ka ilaalinayey ayuu ku qasbay inay soo geliyaan. Xujada lagu celcelinayey ee loo yeelay soo gelinta qawaaniintaasi waa iyagoo yidhaa waxay doonayeen in ay qaataan sababaha ilbaxnimada iyo horumarka reer Yurub. Sidiiyo ilbaxnimadii iyo horumarkii reer Yurub ay keentay qawaaniintaasi banii'aadmigu sameeyey. Iyo sidiiyo dibudhaca Muslimiinta iyo tabaryaridooda ay ugu wacantahay shariicada Islaamku.

Waxay xujadaasi madhani heshay caqliyo madhan ee dalalka Islaamka oo rumeysanaya, aaminsanna. Kuwa dhigaya dugsiyadii waxbarashada. Kuwaa sugaya kutubta waxbarashada.



Waxaana u sahlanaa kuwaasi aan waxba ogeyn haddii ay yara fekiri lahaayeen in ay ogaan lahaayeen in ay xujadoodu tahay waxba kama jiraan. Qawaaniintani ay ku xeel dheeraadeenna in ay xujadoodu tahay waxba kama jiraan. Qawaaniintani ay ku xeel dheeraadeenna ay asal ahaantoodii yihiin uun kuwii dawladdii Roomanka. Qawaaniintaasina aanay ka joojin carabtii iyo Muslimiintii in ay dumiyaan dawladii Roomanka. Qawaaniintaasina aanay ka celinin Yurub oo idil guuldaradii fooshaxumayd ee loo geystay dagaaladii saliibiyiintii.

Waxaa kuwaasi u sahlanaa hadii ay yara fekiraan in ay ogaadaan in shariicadda Islaamku ahayd shariicaddi Muslimiintii hore. Taasi oo ay xukumaysay iyago tabar yar, tiro yarna. Kana cabsanayen in ay dadka boobaan. Taasi oo iyagoo ku hoos nool shariicadani, ka dib labaatan sano, geeridii *RASUULKA*nnekha, ay u suurto gashay inay tirtiraan dawladdii *FAARIS*, kana qaadaan dawladdii Roomanaka Shaam, Masar, iyo waqooyi Afrika. Noqdaanna saadadii caalamka, iyo hoggaamiyaashii banii'aadmiga in ka badan kun sano. Iyagoo shariicadaasi ku hoos noolna ay burburiyeen Saliibiyiintii, kana guuleysteen Tataarkii, weerareenna bariga Yurub, koonfurteeda, iyo galbeedkeeda. Haysteenna boqolaal sano.

Waxaa u sahlana kuwaasi aan waxba ogeyn, in ay dib ugu laabtaan cahdigii dhowaa si ay u ogaadaan in Masar oo Islaam ahayd cahdigii Maxamed Cali

Baasha, ay ahayd mid in door ah ka xooggan, kana weyn in badan oo falalka Yurub ah. Kari kartayna in ay dalkeeda ka cayriso Faransiiskii. Kagana hortagto Ingiriiskii badda.

Kanaadkaato Giriigga iyo ciidamadii ay dawladaha Yurub u soo fidiyeen. Sidaasi oo kalena ay u suurtogashay in ay soo xerogeliso xijaas' Soodaan iyo Shaam. Weerarto Turkiya ilaa ay ciidamadii Masaaridu ku sigtaan inay galaan Qisdandiiya. Haddii aanay soo dhex gelin dawladihii Yurub oo aanay u shir qoolin Masartaasi carbeed ee Muslinka ahayd. Waxayna Masar waxaasi oo idil samaysay iyadoo ku hoos nool shariicada Islaamka, oon ku hoos noolayn qawaaniinta la dejiyey. Markaasi sideebuu qof u odhan karaa qawaaniinta la dejiyey ayaa horumarka Yurub ugu wacan. Shariicadda Islaamkuna ay tahay ta dib u dhigtay ummadaha Islaamka. Miyaanay taasi ahayn moogaan iyo qaradka wax indha tiraya ee dhegaha la'? Miyaanay kuwaasi taariikhda akhriyin si ay wax uga gartaan dawladaha Islaamka iyo ilbaxnimada Islaamka. Iyo si ay u ogaadaan sirtii fufka Yurub. Iyo wixii ay ku qotontay ilbaxnimadii galbeedku? **« Miyaanay arlada socon si ay u yeeshn quluub ay wax ku gartaan ama dhego aywax ku maqlaan. Ma aragti beelaan indhuhu ee waxaa aragti beela Quluubta laabta »** Al aj-46.



## DIBUDHACA MUSLIMIINTA UGUMA WACNA SHARCIGU

Dib u dhaca Muslimiintu maaha mid ku soo noqonaya nidaamka iyo sharciyeynta. Shariicadda Islaamka ayaa ka wanaagsan kana sarreeysa qaanuun kasta oo arlada dusheeda jooga. Aragti kasta oo qaanuunku qaatayna ilaa maantadani aynu joogno waa mid ku xusan shariicada Islaamka iyadoo leh wejiga ugu wanaagsan, si buuxdana u dhammaystiraan. Aragti kasta oo cusub oo ay culimada qaanuunku ku dhaqaaqeen, ama ay ka fekireen, waa tii iyadoo faahfaahsan laga helo shariicadda oo weliba ka sii fiican waxa ay sharxayaan ra'yida iyo aragtiyuhu.

Dib u dhaca Muslimiintu maaha ku noqonaya nidaaminta iyo sharciyeynta. Ee wuxuu ku noqonayaa tusaalooyinkii Islaamka ee laga tegay. Muslimiinta maanta ee dalalka caalamka oo idili waxay Muslimiin ka yihiin uun magacyadooda iyo carabadooda. Eekama aha iimaankooda iyo hawlahooda, in yar oo ilaahay u naxariistay mooyaane.

Haddii ay sharciyeynta cusubi tahay ta ay dadku hore marayaan, waxay Biljanku noqon lahayd dawlad ka xooggan oo ka weyn Ingiriiska. Waayo qawaaniinta Biljanku waa kuwa ugu cusub. Qawaaniinta Ingiriiskuna waa kuwii ugu horreeyey. Qaarkoodna waxay

ku noqonayaan xilligii aan Ingiriiska la aqoonin, ee aanay meelna kaga jirin caalamka.

Haddii ay run tahay in sharciyeynta cusubi ku leedahay raad horumarka shacbiga, waxay shacbiyada Islaamku noqon lahaayeenkuwa ugu xooggan uguna hormarsan shacbiyada caalamka oo idil. Waayo shariicada Islaamku, tiiyo ay duug tahay, ayey hadana ka cusubtahay dhammaan qawaaniinta la dejiyey ee ku qotoma sidii aynu horeyba u soo sheegnay qaanuunadii Roomanka. Qaadanayaan, kuna dhegganyihiin aragtiyihiisa, ujeedadiisa, taasi oo ay hore u mareen uun hadba intii ay duruuftu u oggolaatay, iyagoo salka ku haya oo ku eg soohdintii tiirarkii fiqigii Roomanka.

Waa in ay Muslimiintu ogaadaan in uu Islaamku yahay kii ka abuuray waxba la'aan. Kana dhigay ummad tii ugu khayrka badnayd ee dadka loo soo saaray kana kor mariyey dawladihii caalamka. Waana in ay ogaadaan in ay shariicada Islaamku tahay tii edbisay ee wax bartay. Dareensiisayna sharafta iyo karaamada. Una fidisay xoogga iyo casiimada. Kana soo dhex saartay halyeeyo dalalkii furay, qotomiyey boqortooyado, rag culimo ah, iyo suugaanyahanno.

Miyaanay Musliimiintu ogeyn in ay shariicada Islaamku tahay shariicadii ugu horreysay ee sinnaanshaha buuxa iyo caddaalad dhammaystiran taabbo gelisay. Kuna waajibisay in ay isku gargaarsadaan



wanaagga, iskuna diidan xumaanta. Taasi oo aanay ilaa maantadan gaadhin qawaaniinta la dejiyey, wax aan ahayn wax ay hore ula timid shariicadda Islaamku. Miyaanay ogeyn Muslimiintu in ay shariicadda Islaamku gudatay waajibkeedii markii ay Muslimiintu ku dhegganaayeen. Laakiin markii ay iskaga tageen oo ay hilmaameen axkaamteedii ayuu horumarkii ka tagay, kana qaldamay horukacii. Dibna ugu laabteen muqdigii ay ku indhaha la'aayeen ka hor Islaamka. Waxayna noqdeen qaar tabaryar oo layska addoonsanayo. Cidna aan iska caabiyi karayn ay ku soo xadgudbuto. Iskana horjoogsan karin mid daallin ah.

Way aamineen Muslimiintii hore. Waxayna wanaajiyeen iimaankooda. Markaasi ayuu illahay u suurtogeliyey arladii. Kii ugu suurto geliyey iyagoo yar oo tabar yar wuu awoodi karaa in uu inoo suurtogeliyo arlada hadii aynu rumeynno oo uu iimaankeennu hagaago. Taasina waa ballan uu ilaahay addoomadiisa u qaaday. Ilaahayna cid ka ballan oofin badani ma jirto. « **Ilaahay wuxuu u ballan qaaday kuwa rumeeyey ee idinka mid ah ; wanaagana faray, in uu dhaxalsiiyo arlada sidii kuwii idiinka horreeyeyba uu u dhaxalsiisyey** ». Al-Nuur-55

« **Waxaa Ilaahay idiinka yimid nuur iyo kitaab cad. Kaasi oo Ilaahay ku hanuuninayo kii raaca raalli ahaanshihiisa jidadka nabadda. Wuxuuna ku hanuuninayaa jidka qumman** ». Al-Maa'ida – 15

## QAWAANIINTA LA DEJIYO · WUU BURINAYAA ISLAAMKU

*Qawaaniinta Qhilaafsan quraanka iyo Sunnaha* : Haddii ay qaanuunadii noqdaan qaar khilaafsan Quraanka iyo sunnada, kana baxsan mabaadiida shariicada guud iyo ruxeeda sharciyeynta guud, waa qaar si buuxda u buraya oo baadil ah. Qofna lama gudboona in uu adeeco. Ee waxaaba qof kasta oo Muslin ah la gudboon in uu la diriro.

Waxayna taasi salka ku haysa in wax faridda iyo wax diididdu aanay dhayal u iman. Ilaahayna u soo dejiyey Kitaabkisa una soo diray Rasuulkiisa si loo addeeco, oo loogu camal falo wixii uu la yimid. Qofkii ku camal fala wixii uu Rasuulku la yimid wuu hagaagsanyahay. Waayo wuxuu yeelay amarkii ka wax sharciyeeyey. Ka khilaafana wuu gefay. Waayo wuxuu khilaafay amarkii kii wax sharciyeeyey. « **Uma soo dirno rasuul in dadka Ilaahay lagu adeeco mooyee** » Al-Nisa-64 « **Wixii uu rasuulku idiin keenay qaata, wixii uu idin diidayna iskaga taga** » Al-Xashr-7

« **Kuwa ilaahay rumeeyeyow, addeeca Ilaahay? adeecana rasuulka** ».

**Daliilka burinta qawaaniinta degsan :** Waxay burinta qawaaniinta degsani ku noqonaysaa qodobada Quraanka iyo qodobada sunnaha. Waana halkii ugu horreysay ee sharciyeynta. Waxayna qodobada Quraanka iyo sunnadu si cad u sheegayaan in la buriyo wax kasta oo khilaafsan Islaamka. Taasi oo la ixtiraamayo qodobadaasi cad, lana burinayo wixii khilaafsan. ahaana intaasi oo idil inoo caddaynaya:



1. Ilaahay wuxuu faray in la raaco shariicadda Islaamka. Wuxuuna inoo diiday in la raaco wixii khilaafsan. Maxa hadaba looga dhigayaa qof Muslin ahi in uu qaanuun ka dhigto wax aan ahayn shariicadda iyo mabaadiideeda guud, ama ruuxeeda sharciyeynta wax si buuxda uga xaaran ah Muslimiinta. Taasi oo lagu caddaynayo qodob cad oo Quraanka ah. Taasi oo uu Ilaahay u qaybiyey laba qaybood oon mid saddexaad lahayn: In la yeelo Ilaahay iyo Rasuulkiisa oo la raaco wixii uu Rasuulku la yimid. Ama in la raaco hawada. Wax kasta oo aanu inoo keenin Rasuulku waa hawo. Taasi oo uu Quraanku inoo caddaynayo. « **Haddii ay ku yeeli waayaan ogow inay raacayaan hawadooda. Bal Yaa ka hallowsan ka hawadiisa iska raacay een hanuun Ilaahay ku socon** » Al Qisas–50.

Sidaasi ayuu Ilaahay ugu dhaartay jidka xukunka dadka dhexdoodu in uu yahay laba uun. Oon mid saddexaad jirin. Ka kowaad oo ah xaqa. Kaasi oo ah waxyigii lagu soo dejiyey Rusushiisa. Ka labaad oo ah hawo. Taasi oo ah wixii khilaafsan waxyiga oo idil. « **daa'uud oow, Waxaanu kaaga dhignay arlada khaliif. Ee dadka ku kala xukun xaqa. Hana raacin hawada**

**yaanay kaa leexin jidkii Ilaahay e** Saad-27.

« **Waxaanu kaa yeelnay mid shariicadda arrinkiisu yahay ee raac. Hana raacin hawada kuwa aan waxba garanaynin** » Al-Jaasiya-18. Waxaana arrinkii loo qaybiyey shariicadda uu Rasuulku keenay iyo hawa-daasi kuwaasi aan waxba garanayn. Taasi oo ta hore lays faray, layskuna diiday ta labaad.

« **Raaca waxa uu Ilaahay idin soo dejiyey hana raacina wax aan isaga ahayn oo weli idiin noqda. Yaraa inta aad wax garansanaysaan** ». Al-Acraaf-3.

Wuxuu Ilaahay inna faray in la raaco wixii uu inoo soo dejiyey. Wuxuuna caddeeyey in kii raaca wax aanu Ilaahay soo dejin, in uu raacay awliyo aan Ilaahay ahayn.

Sidaasi ayey qodobada Quraanku si caddaan ah u xarrimeen dhammaan wixii khilaafsan mabaadiideeda guud, ama ruuxeeda sharciyeynta. Waxayna si cad u diiday in lagu hawlgalo wax aan ahayn shariicaddii.

Waxayna ka dhigtay kii ku shaqeeya wax aan ahayn shariicadda in uu yahay mid raacsan hawadiisa, oo uu hoggaansan hallow, lunsan, dulmay naftiisii iyo dadkii kaleba. Kana gaaloobay wixii uu Ilaahay soo dejiyey. Naftiisiina dabageliyey wax aan Ilaahay ahayn.

2. Ilaahay kama yeelin qofka muuminka ah mid ka raalli ah xukun aan ka Ilaahay ahayn. Ama in uu isku xukumo wax aanu Ilaahay soo dejin. Waxaabu Ilaahay faray in uu beeniyo xukun kasta oon xukunkiisa ahayn. Wuxuuna ku tiriyey wax aan xukunkiisa ahayn oo raali laga noqdo hallow aad u dheer, iyo shaydaan la raacay. « **Miyaanad arag kuwa ku doodaya in ay rumeeyeen wixii lagugu soo dejiyay, iyo wixii hortaaba Lagu soo dejiyey. Kuwaasi oo doonaya in laysku xukumo daaquudka (xadgudubka). Taasi oo la faray in ay beeniyaan. Wuxuuna shaydaanku doonayaa in uu si fog u lumiyo** ». Al-Nisa-60.



Kii isku xukuma wax aanu Ilaahay soo dejin. Lana iman rasuulkii. Waxaa xukumaya Daaquud. Daaquudkuna waa dhamman wixii uu addoonku kaga gudbo soohdiintiisa ee ah caabudaad, raacid iyo addeecid. Daaqudka qolo kastana waa kuwa isku xukumaya wax aan ahayn wixii Ilaahay iyo Rasuulkii-sa. Ama caabudaya wax aan Ilaahay ahayn. Ama raacaya wax aan hanuun Ilaahay ku sugnayn. Ama adeecaya wax aanay ogeyn in ay tahay adeeciddii Ilaahay. Kii Ilaahay rumeeyey lama gudboona in uu rumeeyo wax aan isaga ahayn. Mana aha in uu aqbalo xukun aan xukunkiisa ahayn.

3. Ilaahay kama yeelin qof muumin ah in uu u dooro naftiisa ama uu raalli kala noqdo wax aan ahayn wixii ay Ilaahay iyo rasuulkiisii u dooreen. Kii doorta wax aan taasi ahaynna waa lunsanyahay, mana garanayo jidka iimaanka qalbigiisa:

« **Mana aha in nin muumin ah iyo naag muuminad ahi tooni ay arrinkooda doortaan? Mar haddii uu Ilaahay iyo rasuulkiisu ay gooyaan** ».

4. Ilaahay wuxuu faray in uu xukunku noqdo mid

waafaqsan wixii uu Ilaahay soo dejiyey. « **Ku xukun dhexdooda wixii uu Ilaahay soo dejiyey** ». Al–Maada–49 « **Waxaanu kugu soo dejinnay kitaabka xaq ahaan si aad dadka ugu dhex xukuntid wuxuu Ilaahay ku tusay** ». Al–Nisaa–105. Wuxuuna ka dhigay ka aan wax ku xukumin waxa uu Ilaahay soo dejiyey mid gaal ah, oo daallin ah'oo faasiq ah.

« **Ka aan waxku xukumin waxa uu Ilaahay soo dejiyey kuwaasi waa gaalo** ». Al–Maaida – 47.

Waxaana laysku raacsanyahay in qofka muslimiinta u dejiya qawaaniin aanu Ilaahay soo dejin. Ee iska dhaafa dhammaan ama badh ka mid ah wixii uu Ilaahay soo dejiyey isagoon u haysan qiil, waxaa ku run noqonaya waxa uu Ilaahay ku tilmaamay. Ka diida xukunka tuugada ama cayda, ama sinada, oo ka doorbida qaar kale oo uu banii'aadmi sameeyey, waa gaal dhab ah. Ka cillad kale awgeed, oonay dafiraad iyo diidmo ka ahayn awgeed ku xukuma waa daalin, haddii ay xukunkiisa ku lumeen xaq, ama uu ka tegay caddaalad iyo siinaansho. Haddii kale se waa faasiq.

**5.** Ilaahay wuxuu u diiday iimaanka addoomadiisa, waxaanu ku dhaartay haftiisa, ilaa ay Rasuulka u talo saartaan wixii dhex mara-ha ahaadeen wax weyn iyo wax yarba e. Sugnaanshaha iimaankuna kuma koobnaan uun xukunkaasi. Ee waxaa lagu xidhay muumin nimadooda, in ay laabtooda ka madhnaato wax diiqad ah oo ku saabsan xukunka rasuulka.



Iskuna dhiibaan si buuxda. Una hoggaansanaadaan rasuulka. Rasuulkuna kuma xukumayo wax aan ahayn waxa uu Ilaahay soo dejiyey. Iyo waxa uu Ilaahay xusay.

Waxaa hadaba qofka muuminka ah la gudboon in uu wax ku xukumo waxa uu Ilaahay soo dejiyey. Waana in uu rumeeyaa in uu‹yahay wax lagu xukumo ka ugu fadli badan, uguna qumman. Xataa hadii ay dadku yidhaahdaan mid kale ayaa ka fiican. Waayo muumin ma noqonayo ilaa uu si buuxda u adeeco. Uguna hoggaansamo si dhaamaystiran, dhamman wixii ay fareen Ilaahay iyo rasuulkiisii.

« **Ilaahaybaan ku dhaartee, ma rumeynayaan ilaa ay kuu talo saartaan waxa dhex maray. Oo ay naftooda ka waayaan wax cidhiidhya waxaad goysay. si buuxdana ay isku dhiibaan** ».

**6.** Dhamman waxa khilaafsan Islaamku waa ka xaraan Musliminta. Xataa hadii ay faraan ama ay u banneeyaan kuwa talada hayaa. Waayo xuquuqda ay u leeyihiin sharciyeyntu wuxuu waafaqsanyahay mabaadiida Islaamka. Haddii ay kuwa talada hayaa iskood iskaga bannaysteen in ay ka baxaan soohdintii hawshooda, soona saaraan qawaaniin aan waafaqsanayn Islaamka, oo ay ka yeelaan qaar la fuliyo, hawshoodu ma baanayn karto qawaaniintaasi xaraanta ah. Umana bannana qofka Muslinka ah in uu raaco ama uu fuliyo ama uu dabbaqo ama uu wax ku xukumo. Ee waxay ahaanaysaa uun mid si buuxda uga xaaraan

ah qof kasta oo Muslin ah. Waxaana dadka la gudboon in ay ka dheeraadaan raacitaankeeda. Waxaana hawl wadeednada la gudboon in ay diidaan fulinteeda.

Taasi oo ah in adeecidda qofka talada haya aanay ahayn mid soohdin la'aan ah. Ee waxay ku waajibaysaa uun haddii ay sugayso addeecidda rasuulka. Kuna egtahay xududda wixii uu inna faray Ilaahay iyo rasuulkiisu. « **Kuwa Ilaahay rumeeyeyow, addeeca Ilaahay, adeecana rasuulka iyo kuwa talada idin haya ee idinka mid ah. Haddii aad arrin isku qabataanna, kula noqdo Ilaahay iyo rasuulka haddii aad rumeysantihiin Ilaahay iyo maalinta aakhiro. Taasi ayaa idiin khayrroon** ». Al-Nisa–59.

Ilaahay wuxuu farayaa addeeciddiisa iyo addeecidda rasuulka. Addecidda rasuulka ee lagu soo celcelinayo waxa laga dareemayaa in addeecidda rasuulku ay tahay mid waajiba haddii ay tahay wax uu quraanku inna faray iyo wax aanu inna farin. Dhaafidda ficilka daacada marka la sheegay kuwa talada hayaa waxay inna tusaysaa in addecidda kuwa talada hayaa aanay ilow iyo illowba ahayn. Ee ay ku egtahay uun addecidda Rasuulka. Ta kale ee la hormariyey addeecidda Ilaahay iyo addecidda Rasuulku waa in aan la addeecin ka talada haya ilaa la fuliyo addeecidda Ilaahay iyo ta Rasuulka.

Waxaa la addeecayaa kuwa talada haya haddii ay raacanyihiin Ilaahay iyo Rasuulkiisa. Kii ka mid ah ee fara wax waafaqsan Ilaahay iyo rasuulkiisa,



waa waajib addeecidiisii. Kii fara wax khilaafsan waxa uu inoo keenay rasuulku, maqal iyo addeecid toona innaguma laha.

7. Sunnadu waxay caddaysay soohdinta addeecidda kuwa talada haya. Waxay diiday in lagu addeeco wixii khilaafsan waxa uu Ilaahay soo dejiyey. Waa sax in uu Rasuulkii Ilaahay yidhi: « Qofna laguma addeeco macsida Ilaahay ». Wuxuuna yidhi: « addeeciddu waa wixii san. Wuxuuna ka yidhi kuwa talada haya: « Ka ka mid ah ee idin fara wax macsi ah maqal iyo addeecid toona idinkuma laha ». Wuxuu yidhi: « Waa in uu maqlaa oo uu addeecaa qofku wixii uu jecelyahay iyo wixii uu necebyahayba, ilaa macsi la farayo. Markaasi oon maqal iyo addeecid toona lagu lahayn. Wuxuuna yidhi: Waxaa dabaday iman doona qaar talada idiin qaban doona, oo sunnadii bakhtiinaya, lana imanaya bidco, salaadana dib uga dhigay xilligeedii. Markaasi ayuu ibna mascuub ku yidhi: Rasuul allow. Maxaan ka yeelaa haddii aan soo gaadho? Wuxuu yidhi. Inacabdi hooyadiiyow, lama addeeco qof Ilaahay caasiyey. Saddex jeer ayuu ku celiyey ».

8. Ka dib geeridii Rasuulka-nnekha. Waxaa laysku raacay in lagu addeecayo kuwa talada haya soohdinta waxa uu Ilaahay soo dejiyey. Fuqahada ummadda iyo kuwa ijtihaadku waxay isku raacsanyihiin in ay addeeciddu ku waajibayso uun wixii uu Ilaahay ama ray. Iskumanay khilaafin hadalka ah in aan qofna

lagu addecayn macsida Ilaahay. Taasi oo haddii la bannaysto wax xaaraan ah sida sinada iyo sakhraani-mada, lana bannaysto ka gudubka xuduudda Ilaahay, iyo caddillaadda axkaamta Islaamka, lana sharciyeeyo wax aanu Ilaahay bannayn, ay tahay gaalnimo. Taasi oo in laga baxo xaakinka Muslinka haddii uu gaaloobo ay tahay mid waajib ah. Ka bixidda xaakinkana waxaa ugu yar tiiyoo la diido amaradiisa khilaafsan Islaamka.

**9.** Kuwa talada haya, marka la eego sida u dhigan mabaadiida Islaamka, ma laha xaq sharicyeyn aan soohdin ku ekayn. Xaqooda sharciyayntuna wuxuu ku eegyahay laba nooc oo sharciyayn ah;

*Ka kowaad:* Sharciyo la fulinayo. Kuwaasi oo looga jeedo dammaanadda fulinta qodobada sharii-yada Islaamka.

*Ka labaad:* Sharciyo nidaamin ah. Kuwaasi oo lagu nidaaminayo bulshada iyo ilaalinteeda. Laguna dham-maystirayo baahideeda iyadoo ku qotonta aasaaska mabaadiida shariicadda Islaamka. Sharciiyadaasina waxay yihiin uun wixii ay ka aamustay shariicaddu ee aanay u samayninqodobbo gaar ah.

Sharciyadaasina waxaa u shardi ah qaar waa-faqsan mabaadiida shariicadda guud iyo ruuxeeda sharciyaynta. Waa sharciyo loo dejiyey iyadoo looga jeedo fulinta mabaadiida shariicadda guud, sidaasi awgeed ayey xaqiiqo ahaan yihiin nooc kale oo ah sharciyada la fulinayo.

Kuwa talada hayaa marka ay ka leexanayaan



sharciyadii dhignaa, waxay uga leexanayaan tiiyo laga dhigayo laba mid uun. In ay yihiin qaar Rasuulkii u khaalif ah ama in ay yihiin qaar wakiil ka ah bulshada Islaamka. Haddii ay yihiin Khulafadii Rasuulka, lama gudboona in ay ka baxaan wixii uu la yimid Rasuulku. Waayo waxay uga khaliif noqdeen si ay u fuliyaan wixii uu la yimid. Haddii ay yihiin qaar ka wakiil ah bulshada Islaamka, ma aha in ay ka baxaan waxa bulshada u diinta ah. Waayo bulshadu waxay madax uga dhigatay si ay u oogaan diinta, laguna xukumo bulshada gundhigyada shariicadda Islaamka.

**10.** Shariicadda Islaamku waa distoorka aasaasiga u ah Muslimiinta. Wax kasta oo waafaqsan distoorku waa sax. Wax kasta oo khilaafsanina waa baadil. Taasi oo laga simanyahay si kasta oo ay xilliyadu isku bedelaan, horena u maraan rayiyada sharciyeyntu. Waayo shariicadu waa mid xagga Eebbe ka timid. Iyadoo uu inoo keenay Rasuulkiisii-nnekha. Taasi oo uu innoogu soo diray si loogu camal falo xilli kasta iyo meel kastaba. Waana mid wajib ah in la dabbaqo ilaa inta la tirtirayo ama la nasakhayo. Mana suurtogelayso in la tirtiro ama la nasakho. Waayo gundhigga aasaaska u ah shariicadda Islaamku waa in qodobna aanu nasikhi karin qodob la xoog ah ama ka nooggan mooyaane-mid kale. Taasi oo ah qodob ka soo baxay isla kii sharciyeeyay, ama mid ka awood sarreeya.

Qodobada wax nasakhayaa markaasi waa in

ay noqdaan Quraan ama sunne, si ay u suurtogasho in la nasakho waxa aynu haynno ee ah Quraan iyo sunne. Rasuulkii wax dabadii yimid oo Quraan ahina ma jiro. Waayo halkaasi ayuu waxyigii ku go'ay. Mana jirin Sunne ka danbayn karta geeridii Rasuulka. Suurtogalna maaha in la yidhaahdo waxa ay banii'aadmigu dejiyaan ayaa gaadhsiisan heerkii Quraanka iyo Sunnada, si loo tiritiro waxa aynu haysanno ee ah Quraan iyo Sunne.

## QAWAANIINTA LA DEJISTAY WAA QAAR BAADIL AH

Mar haddii ay qawaaniinta la dejiyaa baadil yihiin marka lagu qaado axkaamta shariicada Islaamka, islamarahaantaas qawaaiintu waa baadil xukunkoodana iyo aasaaska mabaadiida guud ee ay ku qotonto qawaaniintaasi. Waxaana taasi inoo caddaynaya sida soo socota.

## DIS TOORKU WUXUU BURINAYAA WIXII KHILAAFSAN ISLAAMKA

Wuxuu distoorka Masaarida, oo ah qaanuun la dejistay, dhigayaa in diinta dawladda ee Rasmiga ahi ay tahay Islaamka. Taasina micnaheedu waxa weeyey in nidaamka aasaasiga ah ee ay ku qotonto



dawladdu uu yahay nidaamka Islaamka. Islaamkuna uu yahay goobta laga soo qaadanayo iyo meesha layskula no qonayo. Iyo halka talada laga soo qaadanayo ee arrini ay ku danbaynayso.

Ku jiritaanka distoorka Masaarida ee qodobkaasi wuxuu dhigayaa in qodobada shariicadda Islaamka ay ku koobanaadaan qawaaniinteenna siyaasaddeenna, iyo nidaamkeenna gudaha iyo ka dibadeedba. Iyo dhammaan wixii aynu qabanaynno oo idili. Taasi oo ah in aynaan xalaalayn wixii ay shariicaddu xalaalaysay mooyee wax kale. Aynaan xaaraantimaynna wixii ay xaaraantimaysay mooyee wax kale. Aynaan ka bixinna mabaadiida shariicadda iyo ruuxeeda marka aynu dejinaynno qawaaniinteenna iyo nidaamkeenna.

Waxaana qofka Muslinka ah, marka loo eego qawaaniinta la dejiyo, ay la tahay in wax kasta oo distoorka khilaafsan ee ah qawaaniin lagu tirinayo qaar baadilah. Waayo distoorka ayaa u ah sharciyaynta aasaasiga ah dalalka lagu xukumayo qawaaniinta la dejiyay. Wax kasta oo khilaafsan sharciyadiisana ma habboona in la dabbaqo. Waayo wuxuu ka baxsan yahay gundhigyadii aasaasiga ahaa ee uu caddeeyay distoorku.

Haddii aynu mabdaa'asi ku dabbaqno qawaaniinta la dejiyay ee ka hor i.manaysa waxa uu distoorku dhigayo ee ah in diinta dawladda ee Rasmiga ahi ay tahay Islaam, waxaa waajib ah in aan qawaaniintaasi

ka saarno dhammaan qodobada khilaafsan Islaamka, ama ka baxsan mabaadiidiisa guud iyo ruuxiisa sharciyaynta. Waxaa waajib ah in aan iska hilmanno qodobadaasi, kuna tirino sidii qaar aan jirin oo kale. Waayo waxay khilaafsantahay distoorka, kaasi oo ah qaanuunka ugu sarreeya ee ugu xaq leh in la raaco.

## II
## QAWAANIINTA OO SHARIICADA KHILAAFTAA WAXAY BURINAYSAA QAWAANIINTA

Saldhigyada wareegga qawaaniinta degsan waxaa ka mid ah in haddii ay qodobadu is khilaafaan waxaa adkaanaya qodobka xooggan, xataa haddii uu qodobkaasi tabartyari ka cusub yahay. Waana isla aragtidaasi ta lagaga door biday distoorka qodbada qawaaiinta. Haddii aynu salhdiggani degsan ku dabbaqno qodobada shariicada iyo qodobada qawaaniinta degsan, waxaa innagu waajib ah in aan qodobada shariicada ka kormarino qodobada qawaaniinta.

Waayo qodobada shariicaddu waa qaar taagan. Lama tirtirin. Suur togalna maaha in la titiro. Kuwa talada haya ee awoodi kara in ay tirtiraan qawaaniintu, ma awoodi karaan in ay tirtiraan shariicadda ama ay xadeeyaan qodobadeeda. Ama ay wax ka tirtiraan. Qodobada aan oggolayn tirtirid iyo wax ka bedelidi way ka xoogganyihiin qodobada oggol in la beddelo



ama in wax laga bedelo. Haddii aynu masa'lada ka eegno dhinaca ka wax sharciyaynaya waxaynu gaadhaynaa isla natiijadii. Waayo shariicadu waa mid xagga Eebbe ka timid. Qawaaniintuna waa qaar ay banii'aadmi dejiyeen. Mana suurtogelayso in aan isgarabdhigno banii'aadmi iyo Ilaahay. Sidaasi ayey qodobada shariicaddu u noqonayaan qaar ka xoogaan qodobada qawaaniinta la dejiyay, hadii aynu ka fiirinno dhinaca ka wax sharciyeeyay iyo dhinaca dabiicadda qodobada.

Innakoo u cuskanaynaa saldhigyada qawaaniinta la dejiyay lafahaantooda ayey innala gudboontahay in aan qodob shariicadda ka sarraysiinno qodobada qawaaniinta la dejiyay mar allaale marka ay is khilaafaanba. Iskana hilmaanno qodobada qawaaniinta haddii ay khilaafaan shariicadda. Kuna tirino sidii wax aan jirin oo kale.

## QAWAANIINTA OO KA TAGTA HAWSHOODII IYO TIIRARKOODI WAA MID BURINAYSA

Saldhigyada Qawaaniinta la dejiyay waxaa ka mid ah in qodob kasta oo ka taga hawsha qaanuunka iyo hadafyadii uu lahaa, ama ka baxa tiirarkii ay qawaaniintu ku qotontay in ay ku waaiib tahay in uu ku ekaato soohdinta xuduudda qaanuunka, iyo dabbadiisa laga daaweeyo wixii ku jira ee ah leexsanaan

uu kaga baxay tiirarkii laysla yaqaanay. Qawaaniinta laga soo guuriyay dalal aan Muslin ahaayn ee loo soo guuriyay dalal Muslin ahi, waxa la gudboon in layska dhaafo dabbaqaadooda dhamman wixii khilaafaya Islaamka. Haddii aan loo yeeli karin qaab waafaqa Islaamka, maadaama ay bulshadaasi Muslinka ah ee loo soo guuriyey qaanuunkaasi ayna ka bixin Islaamkii.

inoo degsani uga tageen hawshoodii iyo tiirarkii qaanuuneed ee laysla yaqaannay. Haddii aynu ku dabbaqno saldhiggaasi degsan, waxaa waajib noqonaya in aan iska dhaafno qodobada khilaafsan shariicada Islaamka, iyo in aan burinno hawshooda.

## MAXAY INO GEYSTEEN QAWAANIINTA LA DEJIYEY

## WAXAY QAWAANIINTAASI INNA DHAXALSIISAY ISKA HORIMAAD IYO KHALKHAL

Qawaaniintaasi oo asal ahaantoodii loo dejiiyey dalal aan dalalkeenna ahayn, iyo dad ay ka badantahay waxa ay innagga geddisanyihiin, inta ay innagala midka yihiin.

Qawaaniintaasi waxay inoo soo guurisay khayrkoodi iyo sharkkoodiiba iyo wax caqiidadeenna



wafaaqaya iyo wax ka hor imanaya, iyo wax la soconaya akhlaaqdeenna, dhaqankeenna iyoo caadeooyinkeenna iyo wax ka hor imanayaba. Wax aynu oggolnahay oo aynu ka raalli nahay iyo wax aynu ka didaynno oo aynu diidaynno. Qawaaniintaasi waxay innaga fasahaadisay fikradeennii. Waxay tirtirtay xikmadeenii. Waxayna fasahaadisay nolosheenii. Waxayna dhooqaysay nadiifnimadeenii. Waxay nafteennii ku ridday xanuun iyo jahowareer.

Waxay qawaaniintaasi inoo yeeshay fikrad khalkhalsan. Iyo xikmad jaagowracan. Taasi oo aynu isla mar keliya arrin xalaallaynaynno, xaaraantim aynaynana. Oggolaanaynno oo aynu diidaynno. Ilaa ay taasi noqotay mid ka mid ah nolosheenna haddii ay xuntahay iyo haddii ay santahayba.

## BAL TUSAALLE AAN U SOO QAADANNO MASARTA MUSLINKA AH

Bal aynu Masar u soo qaadanno tusaale ahaan khalkhalkaasi iyo iskahorimaadkaas ka talinaya dalalka Islaamka, wixii la xidhiidha arrimaha Islaamka oo idil. Haddii aynu ka hadalno Islaamkana waxaa qasab ah in aan ka hadalno dhammaan arrimaha nolosha oo idil. Waayo wuxuu Islaamku u yimid in uu dadka ku xukumo wax yar iyo wax weynba ee la xidhiidha arrimaha adduunyadooda, si uu ugu diyaariyo nolol

fiican aakhiradooda. Taasi oo uu qofka Muslinka ahi ku cibaadaysanayo xukunka, siyaasadda iyo maamu-mlka iyo dhammaan wixii la xidhiidha akhlaaqda' bulshada, dhaqaalaha iyo qaybinta hantida. Cibaada-daasi oo la mid ah sida uu ugu cibaadaysanayo Soonka, Salaadda, Xajka iyo Sakadaba, haddii uu u guto sidii uu Islaamku ka rabay.

## MASAR WAA DAL ISLAAM AH OO KU QOTODHEER ISLAAMKA

Dalkani Islaamka ah ee Masar la yidhaa, wuxuu caalamka oo idili ku tiriyaa qalbigii Islaamka. Islaamka Masarna waa mid qotodheer. Waayo wuxuu Islaamku ku soo gacangalay gacmihii asxaabtii Rasuulka. Taasi oo ahayd xilli haatan lagu joogo saddex iyo toban qarni. Tiiyo ay dadkii degganaa si fiican u aqbaleen Islaamkii. Ilaa ay noqotay tiradii inta aan Muslimiinta ahayn mid aan marnaba dhaafsiisnayn boqolkiiba shan.

Masarna waxaa ku taalla **As-har**. Oo ka mid ah Jaamicadaha adduunka ugu horreeyay, uguna weyn. Wuxuuna u gaar yahay barashada cilmiyada Islaamka. Iyo in uu soo saaro culimo leh aqoon Islaam ah oo ku xeeldheer axkaamta Islaamka. Halkaasi oo ay iskugu soo ururaan dhammaan ardayda dalalka caalamka ku yaal. Intii karaankooda ahna ay ka qaataan cilmi-



yada Islaamka. Markaasina ay ku noqdaan dalalkoodii si ay dadkoodii u baraan wixii ay soo barteen ee ay ku xeeldheeraadeen.

Waxaana lagu tirin jiray Masar berigii hore in ay tahay Maskaxdii Islaamka. Waayo iyada ayaa bur-burisay Saliibiyiintii iyo Tataarkii. Iyadaana ku kacday welina ku kacsan Sahyuuniyadda iyo gumeysiga.

Iyadaana ka caabiday, welina ka caabiyaysa shirqoolka cadowga Ilaahay iyo cadowga Islaamka.

Xilliyadii la soo maray oo idil waxay Masar ahayd Mannaaraddii Islaamka iyo halkii ay iskugu soo ururayeen culimada iyo kuwa wax hagaajiyaa. Iyo halkay iskugu imanayeen Mujaahidiinta halgamaysa iyo ragga xorta ah ee la cidhiidyay.

Masar ayay ka soo unkameen fufafkii hore ee Islaamku, sida ay kuwa maantuba iyada uga soo bilaabmaan. Iyadana ah fufkii weynaa uguna xooggana wixii taarikh inna soo maray oo idil. Waayo waxay isku kala bixisay laga bilaabo Masar ilaa dalalka Islaamka oo idil. Waxayna isku xidhay dalalkaasi. Waxayna ka abuurtay Muslimiintii fac midaysan oo dhinac u wada jeeda, lehna himilo keliya. Kuwaasi oo ka dhigtay Quraanka distoor, Rasuulkiina – N.N.E.-K.H.A. – madax. Kana dhigtay Ilaahay dartii oo loo dhinto mid ay doonayaan. Ilaahaybaan ku dhaartee waxay kaga rumeeyeen wixii ay Ilaahay ugu ballan qaadeen. Waxaa ka mid ah qaar ay tii Alle u timid iyo qaar sugaya. Marnabana isma bedelaan.

Masar waxay hore ugu fidisay welina u fidinaysa Islaamka gacan, iyo wacyi. Islaamahoo bisil. Taasi oo lagu tiriyo halkii ay ku xidhnaayeen himilooyinka Muslimiintu. Laguna tiriyo raaca ugu horeeya ee baaqa iyo xoogga Islaamka ee dhammaan dalalka Islaamka.

Waa taasi Masar. Waa dal Islaam ah oo ay ku qotodheertahay Islaaminimadu. Hore waxay u hurtay nafteeda sidii ay u difaaci lahayd Islaamka. Uguna fidin lahayd dhammaan arlada. Waa kasi oo wuxuu maanta bixinayaa intii karaankiisa ah sidii uu u baraarujin lahaa Muslimiinta. Una sixi lahaa caqiidooyinkooda. Una simi lahaa safafkooda. Una midayn lahaa hababkooda. Uguna dhaqajin laha jid keliya sidii loo soo noolayn lahaa dawladda Islaamka. Sarena loogu qaadi lahaa erayga Islaamka.

## MAXAY MASARTII MUSLINKA AHAYD KU SAMAYSAY IS LAAMKII

Bal intaasi ka dib ayeynu yara fiirinno waxay Masarta sidaasi ahi ku samaysay nafteedii iyo Islaamka ay rumaysantahay' ee ay sidaani la yaabka leh ugu foojignayad. Bal aynu eegno waxa ay maanta ku samaynayso Islaamka iyadoo ay raad ku leeyihiin qawaaniinta la dejiyay, ee laga soo maanguursaday Faransiiskaasi gaalka ah. Ama Ingiriiskaasi u nool shirqoolka Muslimiinta. Ama Talyaanigaasi ku dham-



maystay noloshiisa isagoon ku liibaanin, sidii uu uu ula diriri lahaa Islaamka. Qawaaniintaasi laga soo qaaray dawlado aan Muslin ahayn, oo ku andacooda Masiixiyiin aan se ahayn. Kuna andacooda rumaysnaanta Nebi Cise, nabadgelyo kor kiisa ha ahaate. Laakiin rumaysan uun shirki, gaalnimo iyo xadgudub.

## DAWLADDA MASAR WAXAA U DIIN AH ISLAAMKA WAXAANAY CADDILAYSAA ISLAAMKA

Masartaasi Muslinka ah ee uu ugu sareeyo Boqor Muslin ahi, lehna dawlad Islaam ahi, waxay ku dedaashay in ay ku dhawaaqdo in diinta dawladda ee Rasmiga ahi ay tahay Islaam. Taasina waxay ku caddaysay distoorkeedii. Waxayna u xilsaartay dawladdii in ay maamusho arrimaha Islaamka oo idil. Waxayna dawladdii gacanta ku dhigtay waxbarashadii, iyo aqoontii Islaamka, iyo cibaadooyinkii iyo hawlihii Islaamka. Waxayna dawladda nafteedii ka dhigeen mid gacanta ku haysa dabbaqaadda mabaadiida Islaamka, ee bulshada, dhaqaalaha, suugaanta, akhlaaqda iyo hawlaha xukunka iyo siyaasadda iyo wixii la xidhiidha. Mana aha astaamaha dawlada Islaam ah in ay intaasi oo idil ka yeelato wax khilaafsan axkaamta Islaamka.

Laakiin dawladda Masar ee Muslinka ah kamay horjoogsan Islaamnimadaasi ay ku caddaynaysay

qoraaladaasi rasmiga ah, in ay caddisho sharciyada Islaamka. Iyo in ay xaaraantimayso wax uu Islaamku oggolyahay. Xalaalaysana wax uu xarrimayo Islaamku

Waxaa dawladda Masar ay u oggolaatay xikmadeedu in ay Muslimiinta ku dabbaqdo qawaaniinta reer Yurub, halkii ay kaga dabbiqi lahayd shariicada Islaamka. Tiiyo ay jirto in ayna qawaaniintaasi dhinacna ka soo gaadhin heerka ay dhariicaddu ka gaadhsiisantahay cilmi ahaan iyo fan ahaanba. Iyo Iyo tiiyoo ay jirto in qawaaniintaasi ay khilaafsantahay axkaamta Islaamka. Sidaasi ayey dawladdi Masar u caddishay shariicadii Islaamka. Shariicaduna waa urursigii axkaamta Islaamka.

Islaamkuna uma oggola qof Muslin ah in uu wax aan shariicada Islaamka ahayn ka dhigto qaanuun. Ee wuxuu ku waajibinayaa in uu raaco wixii uu Ilaahay ku soo dejiyay.

« **Waxaanu kaa dhignay mid arrinkiisu yahay shariicada ee raac. Hana raacin hawada kuwa aan waxba garanayn** ».

« **Raaca wixii idiinka yimid rabbigiinna hana raacina wax aan isaga ahayn oo idiin taliya. Alla yaraa inta aad wax garowsanaysaan** ». Al-facraaf-8.

Qofka Muslinka ahna laguma tirin karo Muslinimo, kuna xukumo dhammaan wixii isaga iyo dadka kale dhex mara:

« **Ilaahaybaan ku dhaartee, kuma rumaynayaan ilaa ay kuu talo saartaan wixii dhexdooda mara oo ay markaasi ka wayaan naftooda wax cidhiidhi ku ah wixii aad goysay oo ay si buuxda isku dhiibaan**»



Al-Nisaa – 65

Ka aan wax ku xukumin waxa uu Ilaahay soo dejiyay ama ku xukuma wax aan shariicaddii Ilaahay ahayn, waa gaal aanay wax yar oo Islaamnimo ahi aanay ku sii hadhin qalbigiisa. Xataa haddii loogu yeedhayo magac Muslimiinta, ama uu ku abtirsanayo laba waalid oo Muslimiin ah, oo uu ku andacoodo in uu Muslin yahay taasi oo uu Ilaahay inoo caddeeyay:

« **Ka aan wax ku xukumin waxa uu Ilaahay soo dejiyey kuwaasi waa gaalo** »

Haddii uu yahay kaasi xukunka Islaamka ee ay caddileen, welina caddilayaan dawladaha dalalka Islaamku, waxa qof kasta oo caqli leh si sahlan u garanayaa halka ay dawladahaasi ka taaganyihiin Islaamka. Waxaanu si aan shaki ku jirin u odhanayaa in ay dawladahaasi ugu baaqayaan dadka Muslimiinta ah gaalnimo oo ay u sii jiidayaan.

## DAWLADDA MASAR EE MUSLINKA AHI WAXAY BANNAYSAY XAARAANTII

Masartaasi Muslinka ah ee ka dhi gaysa diinta dawladda ee Rasmiga ah Islaamku, waxay bannaynaysaa in lagu dhaqmo wejiyada kala duwan ee ribada. Ee weliba dawladdaasi Masar waxay ku guubaabinay-

saa dadkeeda Muslimiinta ah in ay ku dhaqmaan ribada. Si ay hantideeda guud ee farahabadan uga faaiidaysato hantidooda u gaarka ah ee yar. Tiiyo ay tahay dawlad Islaam ah oo og in uu Islaamku xaaraantimeeyay ribada weji kasta oo ay leedahay.

Masar oo Islaam ah, kana dhigaysa diinta rasmiga ah ee dawladda Islaamka, waxay xalaalaysay Khamriga, Khammaarka iyo Hilibka Doofaarka. Waxayna dawladdu u oggolaatay rag iyo haweenba in ay furtaan Naadiyo iyo fagaarayaal lagu ciyaaro Khammaarka, laguna cabbo Khamriga, laguna cuno cunto kasta oo xaaraan ah. Dawladda Masar ee Islaamka ahina waxaasi oo idil ayey bannaynaysaa. Tiiyo og in Ilaahay uu ku xaaraantimeeyeey Kitaabkiisa iyo carrabkii Nebigiisaba:

« **Waxaa laydinka xaaraantiimeeyey, maydka, dhiigga iyo hilibka doofaarka** » Al-Maaida – 5.

« **Khamriga; qammaarka, ansaabta, iyo aslaamtuba waa mid ka mid ah hawlaha shaydaanka ee ka fogaada** ». Al-Maaida – 9

Waxaana laga soo weriyay Nebigii – N.N.E.K.H.A – in uu yidhi: « Wax kasta oo lagu sakhraamaa waa Khamri. Wax kasta oo lagu sakhraamaana waa xaaraan ». Wuxuuna yidhi: « Wuxuu Ilaahay nacdalay Khamriga, wuxuuna nacdalay ka cabba, iyo ka shubaya, iyo ka sameeya, iyo ka loo sameeyo, ka iibiya iyo ka iibsada, ka qaadaya iyo ka loo qaadayo iyo ka lacagtiisa cuna ».



Wuxuuna arrinkii dawladda Masar gaadhay in aanay ka xishoon iibinta Khamriga iyo in ay ku bixiso dabbaaldegyada Rasmiga. Sidaasi ayey dadkii hawlwadeenada dawladda ka ahaa ay naftoodii ugu soo jideen nacdashii ka shubaya iyo ka iibinaya. Haddii aanay weliba u sii dheerayn nacdasha ka cabbaya iyo qaadaya.

Masartaasi Islaamka ah ee ka dhigaysa in diinta dawladda ee Rasmiga ahi ay tahay Islaam, waxay bannaynaysaa sinada. Waxayna naagihii u Sahlaysaa dhilaysigii, Raggiina tumashadii. Waxay oggolaanaysaa cawaysyada lagu ciyaaro. Taasi oo ay u oggolaanayso haween iska qaawani, in ay la ciyaaraan ragga shisheeyaha. Tiiyo ay dhammaantood wada madax mareen Khamrigii, oo ay qariisadahoodii ka xoog roonaadeen. Taasi oo ah dhiirigelin xumaan iyo faaxishad. Islaamkuna intaasi oo idil ayuu xaaraantimeeyay.

« **Ha u dhowaanina sinada waa faaxishad iyo jid xun e** ». Al-Israa – 32

« **Kuwa jecel in ay faaxishadu ku dhex fiddo kuwa rumeeyey waxay leeyihiin cadaab kulul adduunyo iyo aakhiraba. Ilaahay ayaa garanaya ee idinku garanmaysaan** ».

Wux Islaamku gaadhay in uu xaaraantimeeyo guurka dhex mara naag sinaysata iyo nin hagaagsan ama nin sinaysta iyo naag hagaagsan.

« **Ka sinaystaa ma guursado mid sinaysata oo**

**mushrikad ah mooyee mid kale. Ta sinaysataanna ma guursato cid aan ahayn mid sinaysta ama mushrik ah. Taasina waa laga xaaraantimeeyey muumiinta ».**

## DAWLADAHA ISLAAMKU WAX AY DIIDANYIHIIN BARASHADA DIINTA ISLAAMKA

Masar taasi Muslinka ah ee ay diinta dawladda ee Rasmiga ahi tahay Islaam, waxay u bannaynaysaa kuwa fidinaya diimaha kale ee ah Ingiriis, iyo Faransiis Iyo Talyaani in ay ka furaan dugsiyo lagu dhigo diinta Masiixiga oo lagaga fidneeyo carruurta Muslimiinta ah diintoodii. Tiiyo ay Islaaarahaantaa ay dawladda Masaaridu ay u diidantahay in lagu dhigto dugsiyada diinta Islaamka Xilna aanay iska saarin sidii ardayda loogu dhigi lahaa barashada taariikhda Islaamka. Tiiyo Islmarahaantaasi xil layska saarayo barashada taariikhda Yurub. Waxaa laga yaabaa in ayna dawladahaasi Islaamka ahi ogayn in waxa ugu horreya ee la gudboon qofka Muslinka ahi ay tahay in uu barto waxa uu Islaamku ku qotomo. Taasi oo ah ta uu Rasuulkii leeyahay: « Waxaa Islaamka lagu qotomiyey shan:

1. In la qiro in Ilaahay mooyee aanu Ilaah kale jirin oo Maxammedna Rasuulkii Ilaahay yahay.
2. Salaadda oo la oogo.
3. Sakada oo la bixiyo.



4. Ramadaan oo la soomo.
5. Xajka oo uu tago qofkii kari karaa.

Shaantaasi arrimood ayey ku waajibinaysaa dabiicadda Islaamku qof kasta oo Muslin ah. Waxaana waajibaya in la barto oo lagu camal falo,

Waxaa laga yaabaa in ayna dawladaha Islaamku ogeyn in ay waajib tahay in la barto waxa uu Islaamku ku qotomo.

« **Haddii aanay qolo kasta ka mid noqdeen qaar ku qotodheeraada diinta oo u diga dadkooda haddii ay ula yimaadaan** » Al-Tawba - 122.

Wuxuuna Rasuulku - N.N.E.K.H.A - yidhi: « Kii uu Ilaahay khayr la doonayo wixuu si qotodheer u baraa diinta ». Wuxuu kaloo yidhi: « Ilaahay laguma caabudin ka fadli badan ku xeeldhaaraanta diinta. Faqiih keliya ayaa shaydaanka kaga daran kun wax caabudaya. Wax walbana tiir ayey leeyihiin. Tiirka diintanina waa tiiyo lagu xeeldheeraado ».

Wuxuu kaloo yidhi: « Waxaa diintiinna ugu khayr badan fududaanteeda, cibaadadana tiiyo diinta lagu xeeldheerado ».

## DAWLADAHA ISLAAMKU WAXAY ERYAYAAN KUWA ISLAAMKA KU BAAQAYA

Masartaasi Islaamka ah ee Islaamkii ka dhigtay diintii Rasmiga ahayd ee dawladda, waxay la dagaalaysaa qof kasta oo ku baaqaya Islaamka saxa ah, ee u diidaya dawladda jidkaasi hallaysan ee ay ku socoto. Taasi oo iyadoo u gargaarsanaysa qawaaniinteeda kharriban, ay afka qabanayso, qalimadana ka caddilayso dadka ku baaqaya Islaamka. Una furayso Xabsiyo iyadoo marinaysa cadaab tii ugu xumayd. Waayo waa Muslimiin ay Islaamnimadu dhabka tahay, oon afkooda soo marinayn wax aan Islaam ahayn.

Dawladahaasi Islaamka ahi ma oga in uu Islaamku ku waajibinayo qof kasta oo Muslin ah in uu wanaagga faro, xumahana diido.

« **Waa in ay idinka mid noqotaa ummad ku baaqaysa khayrka, wanaagga faraysa xumahana diidaysa** » Aal–Cimraan–104.

Waxaynuna horey u soo caddaynnay waxa uu wanaaggu yahay iyo waxa ay xumaantu tahay. Rasuulku – N.N.E.K.H.A – wuxuu yiri: « Kii idinka mid ah ee arka xumaan, ee kari kara in uu gacantiisa ku beddelo, waa in uu ku beddelaa. Haddii uu kari waayana waa in uu qalbigiisa ku beddelaa. Kaasi ayaana iimaanka ugu tabar yar ».



## DAWLADIHII ISLAAMKA OO KA LEEXDAY ISLAAMKII

Masartii Islaamka ahayd waxay ka leexatay Islaamnimadii. Sakadii waxaa caddilaya qaanuunkeedii. Waayo sakadu waa faral uu Islaamku dhigayo. Qaanuunka u degsan Masarna wuxuu soo qaadanayaa tobanaan qaanuun oo maraykan, Yurub iyo Aasiya laga kala keenay. Waxaana suurtogalayey in mid u dhigmo loo dejiyo, oo weliba ka fiican, kana mid ah axkaamta Islaamka. Maxkamadaha sharciga ahna mar walba waxaa ka sii yaraanaya astaamihii Islaamka. Machadkii Fiqiga Islaamkuna ee Miisaaniyadda loogu daray fan, wuxuu noqday mid layska hilmaamo. Waayo wuxuu noqonayaa mid u baaqa Islaamka.

Alla la fududaa dawladaha Islaamka in ay xukunka Islaamka ku beddeshaan xukun ku qotoma axkaam gaalnimo. Lana adakaa in ay ku soo yara noqdaan Kitaabka Ilaahay.

Sidiiyoo aanay dawladahaasi ogeynba in ay hawsha dawladda Islaamku tahay, in la oogo Islaamka. Quraanku na uu ku waajibiyay dawladda Islaamka in ay tirtirto shirkiga oo ay suurtogeliso Islaamka, oogto salaadda, gurto sakadda, wanaagga farto, diiddo xumaanta. Dadkana ku xukunto caddaalad oo ay ugu kala garsoorto soohidinta wixii uu Ilaahay soo dejiyey.

**« Wuxuu Ilaahay ugu ballan qaaday kuwa rumeeyey ee idinka mid ah, ee falaya samaha, in uu dhaxalsiiyo arlada sidii uu u dhaxalsiiyay kuwii idinka horreeyey. Una suurtogeliyo diintoodii uu raalida uga noqday, uguna beddelo cabsidii ka dib nabad. Iyagoo i caabudaya oon waxbana iigu shariig yeelayn. Kuwii markaasi ka dib gaalooba, kuwaasi waa faasiqiin »** Al-Nuur – 55.

**« Kuwa haddii aanu arlada u suurtogelino, oogaya salaadda, bixinayana sakada, isfarayana wanaagga, iskuna diidaya xumaanta. Ilaahay ayaa iska leh caaqibada arrimaha »** Al–Xaj – 41

## U DAGAALANKII GOBANIMADA IYO ISLAAMKII OON KA LEEXANNAY

Masar, sida ay dadkuba u ogsoonyihiin waxay u halgamaysaa gobonimadeedii iyo madaxbannaandeedii. Bal aynu eegno sida y dawladdasi Muslinka ahi u doonayso xornimadeeda ee ay ugu halgamayso madaxbannaanideeda. Waxaynu markaasi arki hooga iyo balanbalka ku dhacay iyo khasaaraha ay nafteedii u soo jiidday. Waayo waxay ka dheeraatay Ilaahay, waxayna ka leexatay Islaamnimadii.



## SIDEEBUU INGIRIISKU U SOO GALAY MASAR

Wuxuu Ingiriisku soo galay Masar sannadku markuu ahaa 1882. Tiiyo uu jiro dagaal qolo, isagoo ku andacoonaya in uu Masar nabadgelinayo. Horena waxay dhawr jeer iskugu dayeen in ay soo galaan Masar. Hase ahaatee way u suurtogeliweyday. Laba jeer isku dayeen in ay Masar soo galaan ka dib markii ay Faransiisku ku duuleen, waxaana ku dhacay Jab weyn. Mar saddexaad ayey isku dayeen in ay soo galaan xilligii Maxamed Cali waxayna Masar kaga hortagtay badda oo ay dib ugu celisay dalkoodii. Waxayna ka dib bilaabeen in ay u shirqoolaan ilaa ay fursad u helaan. Mar laysku dirirayey qolo qolo. Masarna umay soo gelin in ay damiyaan fidnada, ee waxay u soo galeen si ay u qabsadaan oo ay cagahooda ugu sugaan. In ka badan todobaatan jeer ayey ku dhawaaqeen in joogitaankooda dhulka carabtu uu yahay ku meel gaadh. Laakiin hadana mar walba waxay kaga baxayeen ballanqaadkooda. Waxayna sii joogeen Masar iyagoo xadaya hantidooda, dhacayana cuntadooda oo ku dheelaya sharafta dadkeeda.

## XIKMADDII MADAXDA

Ka dib markii si cad loo ogaaday niyaddii kuwaasi wax dhacaya, ayey Masar isku uruursatay sidii ay iskaga caabbiyi lahayd. Waxayna dhallintoodii ku dhaqaaqeen sidii ay u saari lahaayeen. Waxayna madaxdii iyo hoggaamiyayaashii u horseedeen dad-weynihii himiladoodii. Iyagoo u halgamaya madax-bannaanidooda iyo xornimadoodii iyo gobanimadoo-dii ku dooneen jid nabadgelyo iyo baryo ah. Waxayna xikmadoodii siisay in ay xuquuqda Masar ku xidhnaato kuwaasi boobay xuquuqdoodii. Waxayna taasi lagu tilmaami karaa arrin ku qotonta jahli iyo moogaan dabiicadda baniiaadmiga iyo socdaalka taariikhda. Haddii Kaasi wax dhacay uu nafahaantiisa u dareensa-nyahay caddaalad muu dhaceen dad kale. Dadkuna may garteen ilaalinta iyo gumeysiga iyo wixii la mid ah ee ah qaababka wax lagu dhaco.

## XIKMADDAASI MAAHA MID UU ISLAAMKU RAALI KA YAHAY

Haddii ay Masar ka tallaabsatay xukunkii caqliga iyo sida ay arrimuhu ahaayeen ee lagu raadinayey xornimo iyo gobonimo, waxay islamarahaantaa ka tallaabsatay xukunkii Islaamka. Haddii ay madaxda Masar ku soo toosi lahaayeen fikradooda suubban,



yeelan lahaayeenna galbiyo Islaamnimada raacsan, waxay ku soo hanuuni lahaayeen xaqa iyo sawaabka.

Waxayna ogaan lahaayeen in jihaadka dhiigu ku daato uu yahay jidka xornimada. Dagaalka iyo dilmaduna ay yihiin jidkii gobonimada, qofna yaanu la yaabin haddii uu xukunka Islaamku noqdo mid waafaqsan xukunka caqliga iyo sida ay arrimuhu yihiin. Waayo Islaamka ayaa ah:

**« Fidradii Ilaahay ee uu Ilaahay dadka ku abuuray »**

## ISLAAMKU WUXUU U DIIDAYA MUSLIMIINTA DULINIMADA

Islaamku wuxuu u diidayaa kuwa haysta, in ay dulli noqdaan. Qalbiga Muslinkuna maba laha goob dullini-mo iyo dabagelid oon ahayn in uu walaalkiisa Muslinka ah u naxariisto. Wixii aan intaasi ahaynna kuma laha meel. Ee wuxuu leeyahay uun in uu cisi iyo sharaf arlada dusheeda ku yeesho.

**« Ilaahay iyo Rasuulkiisa iyo muuminiinta ayaa iska leh sharafta. Laakiin munaafiqiintu ma oga ».** Al-Munaafiquun – 8.

Waxaana ku waajib ah dadka Mu slimiinta ah in ay taasi rumeeyaan. Kana dhigaan taasi himiladooda kama danbaysta ah. Si ay ummadooda ugu diyaariyaan halkii uu Ilaahay u doortay. Taasi oo ah goobta waxbaridda, hanuuninta iyo hoggaaminta.

**« Waxaanu idinka yeelnay ummad dhexdhexaad**

**ah si aad dadka ugu noqotaan dhexdhexaad ».** Al–Baqara–33.

« **Waxaad tihiin ummad tii ugu khayrka badan ee dadka loo soo saaray. Wanagga faraya, xumahana diidaysa, Ilaahayna rumeeyey ».** Al–Cimraan: 110

Haddii uu qofka Muslinka ahi arko in aan goob-taasi loogu oggolayn sharafta, waxaa la gudboon in uu ka haajiro, oo naftiisa kala baxsado in la dullaysto. Waxaana qasab ah in uu helayo faraj iyo abaal.

« **Kii Ilaahay dartii u haajira wuxuu arlada ka helayaa waxyaalo farabadan iyo faalal ».**

Haddii uu dugsado waxa uu ku jiro, oo uu ka aamuso, isagoo ay suurtogelayso in uu haajiro, wuxuu markaasi dulmiyay naftiisii. Wuxuuna ka gaaloobay rabbigiisii. Waxbana uma faaiidaynayso Islaamnimada uu sheeganayaa. Waayo wuxuu naftiisii kala raali noqday in la dullaysto. Ilaahay iyo Islaamkuna waxay diidanyihiin in la dullaysto oo la yaraysto qofka Muslinka ah.

Wuxuuna Islaamku ka digtoonaaday in uu qofka Muslinka ah uu diido in uu ku dhexnoolaado dad aan Muslimiin ahayn oo ka xoog roon. Waayo ku dhexnoolaanshahoodasi waxay dareensiinaysaa dulinimo iyo tabaryari. Waxayna ku barbaarinaysaa ruuxnimo hoos iskudhigid. Waxay uga baaqaysaa wax wanaajin, iyo dabagelid ka danbaysa.

« **Kuwa ay malaaigtu dilayso iyagoo naftoodii dulmay. Waxay yidhaahdeen maxaad ahaydeen. Waxay dhaheen waxaannu ahaynu kuwii ku tabarta yaraa arlada. Waxay yidhaahdeen miyaanay arlada Ilaahay ballaadhnayn maxaad ugu haajiri weydeen? Kuwaas hooygoodu waa jahannama. Waxaana xumaaday gabagabadoodii, marka laga reebo kuwa tabarta yar ee rag, haween iyo carruurba leh een garanayan xeelad iyo jid ay ku toosaan toona. Kuwaasi waxaa laga yaabaa in Ilaahay u denbi dhaafo. Ilaahayna waa kii denbi dhaafa ».** Al–Nisaa-97–99.



Wuxuuna Rasuulku yiri: « Shuqul kuma lihi qof kasta oo Muslin ah oo ku dhexjira Mushrikiinta. Waxaa la weydiiyay: Rasuul Allow waayo? Wuxuu yiri: Naarta ayey ku wada jiraan. Wuxuunna yiri: Ka la jooga Mushrikiinta, ee la nooli waa sidooda oo kale. Wuxuu yiri: hijradu ma dhammaanayso ilaa ay tawbaddu dhammaanayso. Tawbadduna ma dhammaanayso ilaa ay cadceeddu ka soo baxdo galbeed.

## ISLAAMKU MA NABADGELIYO KUWA XADGUDBA

Mabaadiida guud ee Islaamku waxay ku waajibinaysaa qofka Muslinka ah in aanu ka aamusin ka xadgudubsan. Wixii xunna in aanu farah ka laaban. Waxaana ku waajib ah qofka muslinka ah inuu xadgudubka ugu jawaabo xadgudub. Xumaantana in uu xumaan ugu jawaabo. Mabaadiida guud ee Islaamku uma

oggola Muslimiinta in ay aamusaan haddii ay ku xadgudbaan wixii la mid ah Ingiriiska iyo Faransiisku, iyo haddii dalkooda la qabsadoba. Uma oggola mabaadiida Islaamku dadka Muslimiinta ah in ay is hoos dhigaan kuwa ku soo duulay. Ama in ay oggolaadaan dhulka laga qabsaday. Ama in ay raali ka noqdaan xukunka kuwa qabsaday. Ee waa in ay xadgudbka ugu jawaabaan xadgudub. Xumaantana xumaan. Halgamaan oo ay dagaalamaan. Diriraan oo ay wax laayaan ilaa ay dalkooda ka saarayaan kuwa ku soo duulay, oo ay cagaha wax ka dayayaan. Awooddana ay muslimiintu ku yeelato dalkooda gudihiisa.

« **Bisha xarrimani waa u bil xarriman. Kuwa xurmaduna waa qisaas. Kii idinku xadgudba ugu xadgudba si leeg sida uu idiinku xadgudbay** ». Al–Baqara – 194.

Wuxuuna yidhi: « **Xumaanta abaalkeedu waa xumaan la mid ah** ». Al–Shuura –40.

« **Ilaahay dartii ula dagaallama kuwa idinla dagaallamayaa.** Al–Baqra – 190.

« **La dagaalama ilaa ay fidnadu dhammaanayso, oo diinta Ilaahay iska yeelanayo. Haddii ay dhammaato, cadow kale oon daallimiinta ahayn ma jiro** ». Al–Baqara – 193.



## LA JIHAADKA CADOWGA ISLAAMKU WAA KU WAAJIB QOF KASTA OO MUSLIN AH

Uga danbayn, maaha mabaadiidaasi guud, wixii uu Islaamku la yimid oo idil. Ee waxaa meesha jira jihaadka Ilaahay dartii. Waajibkaasi uu Ilaahay ku waajibiyay qof kasta oo Muslin ah, ilaa maalinta qiyaamaha. Taasi oo uu ugu waajibiyay si loogu filaaliyo Islaamka. Laguna difaaco dalkiisa. Sharafna loogu yeelo Muslimiinta. Lagana yeelo erayga Ilaahay ka sarreeya, erayga kuwa gaaloobayna ka hooseeya.

Jihaadku waa dagaalka Ilaahay dartii ah. Iyo tiiyoo loo huro nafta iyo maalkaba sidii loogu difaaci lahaa Islaamka iyo Muslimiintaba. Taasi oo ah sidii sare loogu qaadi lahaa erayga Islaamka iyo Muslimiinta. Taasina waa mid faral ah oon laysku khilaafsanayn loona qoray Muslimiinta.

« **Waxaa laydiin qoray dagaalka idiinko neceb. Laga yaabaa in aad wax necbaysataan oo uu hadana khayr idiin yahay** ». Al–Baqara – 216

« **Ilaahay dartii ula dagaallama kuwa idinla dagaalamaya** ». Al–Baqara – 190

« **La dagaalama ilaa ay fidnadu dhammaanayso oo diinta oo idil Ilaahay iska yeelanayo** ». Al–Anfaal – 39.

**Waa in ay ilaahay dartii u dagaallamaan kuwa nolosha adduunyada ku iibsanaya aakhiro ».** Al-Nisaa-74

« **Maxaad Ilaahay dartii ugu dagaallami weydeen kuwa laga adkaaday ee rag iyo haween iyo carruurba leh** ». Al-Nisa-75.

« **Kuwa rumeeyey waxay u dagaallamayaan Ilaahay dartii. Kuwa gaaloobayna daaquudka dartii. La dagaallama awliyada shaydaanka. Shirqoolka shaydaanku waa mid tabar yar** ». Al-Nisaa-76.

« **U kaca fudayd iyo culeysba. Oo Ilaahay dartii ugu dagaalama maalkiinna iyo naftiinnaba** ». Al-Tawba-41.

« **Ula dagaallama mushrikiinta gebi ahaan sida ay gebigood idiinla dagaallamayaan** ». Al-Tawba-36.

« **La dagaallama kuwa aan rumeysanayn Ilaahay iyo maalinta aakhiro, een xaaraantimaynayn waxa ay xarrimeen Ilaahay iyo Rasuulkiisu** ». Al-Tawba-29

« **Kuwa rumeeyeyow maydiin tusaa ganacsi idinka nabad geliya cadaab kulul. Waxaydun rumeyn Ilaahay iyo Rasuulkiisa. Waxaydunna Ilaahay dartii ugu dagaallami maalkiinna iyo naftiinna. Taasi ayaa idiin khayr roon haddii aad wax garanaysaan** ». Al-Saf-10-11.



## JIHAADKU MA FARDAL-CAYNBAA MISE WAA FARDAL KIFAAYA

Waxay fuqahadu isku khilaafsanyihiin nooca faralnimada jihaadka. Qaarkood waxay u arkaan in uu fardal kifaaya yahay. Qaarkoodna waxay u arkaan fardal cayn. Fardal kifaayihu waa ka haddii qolo ka mid ah dadku ku filnaato, laga dhaafayo dadka intiisa kale. Haddii aanay u kicin in ku filanina ay denbaabayaan dadka oo idili. Laakiin fardal caynku waa ka dadka oo idil ku waajib ah ee aan cidna lagaga dhaafayn wax cid kale sameeysay.

Laakiin Fuqahada Islaamku waxay isku waafaqsanyihiin in jihaadka lagu magacaabi karo fardal cayn saddex meelood:

1. Haddii labada col iska horyimaadaan, waxaa ka xaaraan ah in uu qof ka tago. Taasi oo ay haysato aayadda ah: « **Kuwa rumeeyeyow haddii aad qolo iska hortimaadaan sugnaada** ». Al-Anfaal-45.

   « **Kuwa rumeeyeyow haddii aad iskaga hortimaadaan kuwa gaaloobay, dabada ha u jeedinina** ». Al-Anfaal-15.

2. **Haddii uu imaamku u qaylo dirsado qolo, waxaa ku waajib ah in ay la soo dagaal galaan.**

   « **Kuwa rumeeyeyeow haddii laydin yidhaahdo**

**kaalaya Ilaahay dartii u soo duula maxaad dhulka iskugu sii dhejisaan ».** Al-Tawba.

Wuxuuna Rasuulku yiri: – N.N.E.K.H.A – **Haddii laydiin soo qaylo dirsado, u kaca ».**

3. Haddii ay gaaladu ku soo duusho dal Islaam ah, waxaa dadka deggan oo idil ku waajib ah inay difaacaan, wuxuuna jihaadku ku yahay Fardal-cayn. Waayo waa dagaal lagu difaacyo diinta ee maaha dagaal duullaan ah. Soo gelitaankooduna waa dhibaato aan marnaba la hilmaami karin. Waxa ugu yar ee ay inoo keenaana waa fidno ».

**« La dagaalama ilaa ay fidnadu dhammaanayso ».**

**« Fidnadu iyadaa ka daran dilitaanka ».**

## GOORMA AYUU JIHAADKU KU WAAJIBAYAA DUQAYDA, HAWEENKA IYO BUKAANKA

Jihaadku asal ahaantiisa kuma waajibayo haweenka sidii ay inoo soo werisay Caashi ee ay tiri: Waxaan idhi: RasuulAllow haweenka ma lagu leeyahay jihaad? Wuxuu yidhi: « Jihaad aan dagaal lahayn. Waana Xajka iyo Cimrada ».

Dagaalkuna kuma waajibayo cid aan ahayn qaan gaadh, Maskax fayow, lab oo caafimaad qaba. Laakiin haddii ay gaaladu ku soo duulaan dal Islaam ah, wuxuu jihaadku ku yahay waajib qasab ah haween ka,



ragga, duqayda iyo dadka naafada ah iyo kuwa bukaba. Tusaale ahaan waxaa Masar iyo Ciraaq la gudboon rag, haween, duqay iyo dhallinyaro caafimaad qabta iyo kuwo naafo ahba inay si daran ula dagaallamaan Ingiriiska ilaa ay dalkooda ka soo furanayaan. Haddii kale waa denbiilayaal lumiyay faralkii jihaadka ee ay ku waajibiyeen dagaalkii kuwa ku soo xadgudbay. Kuwaasi oo uu u bannaanyahay dhiigoodu. Sidaasi iyo si la mid ah ayaa ku waajib ah dal kasta oo Islaam ah oo gaaladu cagaha soo saareen, Xataa haddii imaatinkoodu yahay mid kharriban.

## ISLAAMKU WUXUU WAAJIBINAYAA ISDIYAARIN IYO DIYAARGAROW

Wuxuu Islaamku ku waajibinayaa Muslimiinta in ay had iyo jeeraale noqdaan qaar ka digtoon weerarka cadowga. Waana in ay had iyo jeeraale diyaar u yihiin ka horteggisa. Waana in ay u diyaariyaan askar iyo qalab baqo ku ridaya cadowga oo iska hortaagaya in uu ku fekiro in uu ku xadgudbo Muslimiinta.

**« Kuwa rumeeyayow digtoonada ».**

**« U diyaariyaa intii kari kartaan ee ah xoog iyo qoob fardood, ood ku cabsi gelinaysaan cadowga Ilaahay iyo cadowgiinna iyo qaar kale oon iyaga ahayn ooyadaan garanayn ee Ilaahay garanayo ».** Al-Anfaal-60.

Si ay Muslimiintu u noqdaan qaar oogaya faralka jihaadka iyo sharafta diinta, wuxuu Islaamku ku waajibiyay in ay bartaan wax kasta oo u keenaya gacansarraynta xoogga iyo xeeladda. Taasi oo faaiido u leh bulshada xilliga nabadda iyo xilliga dagaalkaba. Waxaana weeye tartanka, baratanka fardaha, baretanka doonyaha baabuurta iyo dayaaradaha, iwm. Sida ciyaaraha, dhugtanka ku loollanka seefaha iyo ulaha. Iyo sida fuuridda fallaadhaha iyo hubka kale. Iyo sida legdanka, feedhaka iyo qaadidda miisaanada culus iyo dabbaasha iyo wixii la mid ah.

Asal ahaanta shariicada Islaamkuna waa in dhammaan wixii ku anfacaya ummadda diinteeda iyo addunyadeedaaba ee ah cilmi, fan iyo farsamo waa mid waajib ah oon shaki ku jirin. In la bartaana waa mid ku waajib ah ummadda ee lamaba gudboona kala doorashada in la qaato iyo in laga tago.

Sidaasi ayey fardafuulnimada iyo wixii hoos yimadda ee ah loollanka xeeladaha iyo xooguba ay yihiin qaar ku waajib ah ummadda. sida uu dhigayo Islaamku.

Samaynta Warshadaha dagaalka ee kala duwani waa mid waajib ku ah ummadda. Lamana gudboona in ay faraha ka qaaddo iyadoo faraha ka qaadda Islaamka mooyaane.

Waxay qodobadu caddaynayaan in lala yimaaddo dhammaan wixii loogu diyar garoobayo dagaal. Isdiyaarintaasi oo baqo gelinaysa cadowga, iyo kuwa



xaasidka ku ah ee u shirqoolaya Islaamka, qaar la ogyahay iyo qaar aan la ogeynba.

**« U diyaariya intii aad kari kartaan ee ah xoog iyo qoob fardood si aad ugu cabsi gelisaan cadowga Ilaahay iyo cadowgiinna, iyo qaar kale oon iyaga ahayn ooydaan garanayn ee Ilaahay garanayo ».** Al-Anfaal–60.

Wuxuuna Rasuulku yidhi: – N.N.E.K.H.A – « Xooggu tuurmada ayuu ku jiraa xooggu tuurmada ayuu ku jiraa ». Wuxuunna yiri: « Ilaahay wuxuu fallaadhii keliya ku geliyaa Jannada saddex ka sameeyay waxaan lagu tirinayaa samayntiisa Khayr, ka tuuraya iyo ka dhiibaya ».

Wuxuuna yiri: « Tuura oo fuula. Idinkoo tuura ayaa laga jecelyahay in la fuulo ». Wuxuuna yiri: « Ka barta tuurmada ee iskaga tagaa annaka naga mid maaha ».

Waa taasi sunnadii Rasuulka ee uu afka ka yidhi. Laakiin sunnihiisa u dhab ahaan u hirgeliyay, waxaa la sugay in uu tartanka hore ugu mari jiray. Wuxuu ku hormaray Awr. Wuxuunaa ku hormaray Fardo. Waxaana jirtay in tartan Fallaadho lagu tartamayo uu u yimid oo uu qolo la soo saftay. Halkaasi oo ay qolodii kale joogsatay. Oo ay tiri: Sidee ayaanu u tuurnaa adiga oo la jira? Wuxuuna yidhi: « Tuura aniga ayaa dhammaantiinba la jiree ».

## MAAHA IN AY QOFKA MUSLINKA AH LA CUSLAATO KA HORIMAADKA CADOWGU

Wuxuu Islaamku ka xaaraantimaynayaa Muslimiinta in ay la cuslaato ka hortagga cadowgu. Ama ay cabsadaan marka ay ka horimanayaan. Ama ay fududaystaan iska caabbigiisa. Ama ay dabada u jeediyaan. Ama ay nabad ugu baaqaan. Ee wuxuu ku waajibiyay in ay si daran uga hortagaan. Kuna jihaadaan maalkooda iyo naftooda. Kulana dagaallamaan intii karaan kooda ah iyagoo ka soo horjeeda een marnaba dhabarka u jeedinayn. Waa in ay kula dagaalaan dagaal iskugu jira xoog iyo adadayg. Waxaasi oo idilina maaha qaar laga dhaafayo, haddii ay tiradoodu ka yaraato tiradii cadawga. Imisa qolo oo yar ayaa ku jebiya qolo badan idanka Ilaahay awgeed. Taasi oo an Quraanku si cad innoogu sheegay:

« **Kuwa rumeeyeyow maxaad dhulka iskugu sii nabaysaan haddii laydin yiraahdo kaalayoo Ilaahay dartii u soo baxa? ma noloshii adduunyada ayaad ku doorsateen aakhiro? Raaxada adduunyadu waa wax yar marka loo eego aakhiro. Haddii aydaan u kicin wuxuu idin cadaabi cadab kulul. wuxuuna idinku bedeli qolo kale. Waxbana kuma dhibaysaan ilaahayna waa kii wax kasta awooda** ». Al-Tawbah-38-39.



« **Kuwa rumeeyeyow haddii aad qolo iska hortimaadaan sugnaada** ». Al-Anfaal-35.

« **Kuwa rumeeyeyow haddii aad kulantaan kuwa gaaloobay oo idinku soo socda, ha u jeedinina dabada. Ka maalintaasi dabadiisa u jeediya, haddii aanu ahayn mid xeel dagaal ay ka tahay, ama mid qolo kale u socda, cadho ayaa xagga eebbe kaga timid** ». Al-Anfaal-15.

« **Ha Baqanina hana murugoonina idinkaa kuwa sare ah e** ». Al-Cimraan.-104.

« **Ha baqanina, oo ha codsanina nabad, idinkaa kuwa sare ah. Ilaahayna waa kii idinka jira mana mooga hawlihiinna** ». Muxamed-35.

« **La dagaallama kuwa gaalada ah. Hana idinka arkaan qaallafsanaan** ». Al-Tawbah-123.

« **Imisa qolo oo yar ayaa Ilaahay idankii ku jebiyey qolo badan. Ilaahayna wuxuu la jiraa kuwa sabra** ». Al-Baqara-249.

## GUUBAABADA ISLAAMKA JIHAADKA IYO MUJAAHIDIINTA

Wuxuu Islaamku ka dhigay faralnimada Jihaadka ta ugu sarreeysa faralnimadiisa. Qofka Mujaahidka ahna wuxuu u diyaariyay ajarkii ugu weynaa. Taasi oo ka ah si Jihaadka loogu guubaabiyo Muslimiinta

oo ay u raadsadaan una jeclaystaan. Wuxuuna ka dhigay Jihaadka maalka iyo nafta jid uu Ilaahay ugu naxariisanayo, ugu denbi dhaafayo oo uu ku waarinayo Jannadiisa. Iyo mid sabab u ah labanlaabidda ajarka Mujaahidka. Iyo qaab lagaga guulaysto cadowga, wakiil laga noqdo arlada, Sarena loogu qaado erayga Ilaahay. Bal u yara fiirso aayadaha Quraanka ah ee micnahoodu yahay:

**« Kuwa rumeeyey, iyo kuwa haajiray, ee Ilaahay dartii ugu jihaaday maalikoodii iyo naftoodii waa kuwa Ilaahay agtiisa ugu darajada weyn. Kuwaasina waa kuwa liibaanay ».** Al-Tawba-20.

**« Haddii Ilaahay dartii laydiin dilo ama aad u dhimataan, waxaad Ilaahay agtiisa ku leedihiin denbi dhaaf iyo naxariis ka khayr roon waxa ay ururinayaan oo idil ».** Aal-Cimraan-157.

**« Ha u malaynina kuwa Ilaahay dartii loo dilay qaar mootan, ee way noolyihiin. Waxaana lagu risiqayaa Ilaahay agtiisa ».** Aal-Cimraan-169.

**« Kuwa haajiray, ee laga soo saaray guryahoodii, ee loo dhibay dartay awgeed, ee dagaalamay, ee ee la dilay, waxaan ka tirtiri xumaanahoodii. Waxaanan gelin doonaa jannooyin ay hoos cararayaan webiyo. Taasi oo ah abaalmarin xagga eebbe ah. Ilaahay agtiisana waxaa ah abaalmarin tii ugu fiicnayd.**



**« Ilaahay wuxuu kaga iibsaday muuminiinta naftoodii iyo maalkoodii janno ay leeyihiin. Waxay u dagaalamayaan Ilaahay dartii. Waxbay dilayaan waana la dilayaa ».** Al-Tawba-111.

**« Waxay la mid yihiin kuwa Ilaahay dartii wax u bixinayaa sida hal geedoo dhalay todoba madax, madax kastana ay ku yaallaan boqol midho ahi. Ilaahayna wuu u sii laban laabi kii uu doono ».** Al-Baqara-261.

**« Wuxuu Ilaahay ugu ballan qaaday kuwa rumeeyey ee idinka mid ah, wanaagna suubiyey, inuu wakiil uga dhigo arlada, sidii uu uga dhigay kuwii ka horreeyey, iyo inuu u suurtogeliyo diinta uu raalida kala noqday ».** Al-Nuur-55.

**« Wuxuu dhaxalsiiyey dhulkoodii iyo daarahoodii iyo maalkoodii iyo arlo aanay lugaba dhigin ».** Al-Axsaab-27.

Bal maqal hadal uu Rasuulkii yiri: « Ma idiin sheegaa ka dadka ugu khayr badan ». Waxay yiraahdeen haa Rasuul Allow. Wuxuu yiri: « Nin madaxa faraskiisa u haysta Ilaahay dartii ilaa uu ka dhimanayo ama la dilayo ».

Wuxuu kaloo yiri Rasuulku markii la weydiiyay hawsha uu Ilaahay ugu jecelyahay ayuu yiri: Salaadda waqtigeeda ah kadibna waalidka oo loo baarri noqdo. Kadibna Jihaadka Ilaahay dartii. Wuxuu kaloo yiri:

Ilaahay dartii oo maalin loo hawgalo ayaa dhaanta kun maalmood oo la mid ah oo guriga la joogo.

## XUKUNKA ISLAAMKA IYO TAARIIKHDII HOR

Waa kaasi xukunka Islaamku ka qabo Jihaadka cadowga. Waana kaasi jidkiisa uu ku soo celiyay xornimadii iyo madaxbannaanidii. Haddii uu jidka Islaamku yahay mid waafaqsan caqli galka fayow, lana soconayo dabeecadaha arrimaha, waxay taariikhdii la soo maray innooga marag kacaysaa in jidka Islaamku yahay, ka keliya ee keentay soo celinta xorriyadii la boobay, iyo madaxbanaanidii laga waayay caalamka oo idil, marka la indho indheeyo dhamman casriyadii kala geddisnaa ee taariikhda. Weligeedna kamay dhicin marxalad keliya oo ka mid ah marxaldihii la soo maray mid hore iyo mid cusubba, in dadweyne ka mid ah dadku uu ku helay xornimadiisa iyo madaxbannaanidiisa jid nabadgelyo ku raadis ah isagoo ku baaqaya xaq iyo caddaalad.

## MAXAYNU UGAGA DAYAYEYNAA REER GALBEEDKA GOBONIMODOONKA

Madaxda iyo duqayda u talisa Masar iyo kuwa talada u hayaba waxay ku waallanyihiin ku dayashada reer



Yurub iyo Maraykanka. Taasi oo ay wax kasta kaga daydaan. Ilaa ay gaadhay in ay kaga daydaan wax cunidooda, dhargashadkooda iyo qaabka ay u fekirayaan ee ay u hadlayaan. Sideebaanay markaasi ugaga dayanayn u hawlgalka xornimada iyo gobonimada?

Dhammaan dawladaha Yurub-badidoodu-waxay ahaayeen qaar dhulqabsi lagu helay. Sidaasi oo kale ayey ahaayeen dawladaha Maraykankuna. Bal dawladdee ayaa ka raali noqotay in ay u celiso dhulkii ay dhacday oo ay ku nabadgeliso, weydiisayna in ay qaataan gobonimo. Kuna guubaabiso xaqa iyo caddaaladda?

Dhammaan, Maraykanka, Faransiiska, Talyaaniga, Jarmalka, Giriigga, Roomanka, Bilqaarka, Jakosl lafaakiya, iyo Turkiguba waxay ahaayeen dhammaantood qaar la qabsaday casrigani cusub. Qaarkoodna waxaa la qabsaday qarnigan aan ku jirno. Ma aragtay mid keliya oo ay ugu suurtogashay in ay madaxbannaani iyo gobonimo ku hesho wax aan ahayn layn, dilmo iyo Jihaad qadhaadh oo ay gabagabadiisu noqoto guul ama guuldarro? Guuldarraduna marna ma ka joojisay in ay soo rogaal celiyaan oo ay isku diyaariyaan dagaal ilaa ay gobonimo helayaan?

## MAXAY MASAR KA HESHAY BARYADII

Sannadku markuu ahaa 1919 ayey Masar weydiisatay Ingiriiska in uu siiyo xornimadii ay ka boobeen. Waxayna ka codsatay in ay madaxbannaanidooda faraha kala baxaan ka dib markii ay sandulle kaga dhigeen. Bal hadaba maxay Masar ka heeshay baryadaasi?

Waxba kamay helin. Ee waxay lumisay uun sharafteedii. Dhallinteediina waxay ka dishay raganimadii. Waxayna iska lumisay laba iyo soddon sano oo ciidda wejiga loo daray. Taasi oo ay u sujuudaysay Ingiriiska. Dhunkanaysayna gacmahooda iyo lugahooda. Kuna baaqaysay akhlaaqda Ingiriiska ee heerka sare ah een aqoon wax aan ahayn iyo gumeysi. Taasi oo ay ku baaqaysay xaqii ay samaysay dawladdii wax dhacaysay. Weydiinaysayna caddaaladda ay oogeen hadalada gumeysigu.

Waxaa loo baahanyahay in aynaan illoobin in in ay Masar heshay arrin istaahisha xusuus. Taasi oo ahayd heshiiskii sannadkii 1936 ee lagu magacaabay heshiiskii sharafta iyo gobonimada. Taasi oo istaahishay in lagu magacaabo heshiiskii tuugsiga iyo moogaanta.

Markii uu Ingiriisku arkay in wax weydiisanaynu



ayuu ogaaday in aynu nahay qaar aan waxba kala ogeyn. Markaasi ayay gacantoodii inoo fidisay warqad aan ku doonaynno madaxbannaanideenna. Si aynu u ictiraafno in uu Ingiriisku xaq u leeyahay haysashadeenna. Warqaddaasi oo madaxbannaani inoo siinaysa wixii inna dhibaya. Innagana dhacaysa wixii inoo dan ah. Taasi oo moogaanteenni innoo sawirtay sidiiyoo Ingiriiskii inna siiyay xornimadeednnii iyo gobonimadeennii. Taasi oo aynu warqaddaasi ku dhejinnay gego kasta. Kuna magacownay heshiiskii sharafta iyo gobonimada. Markii xilligii la gaadhay ayeynu baadigoobnay Xornimadii. Taasi oo aynu aragnay dhallaan habaabis aan biyo ahayn iyo hadallo aan tirsi lahayn.

Heshiiskii sannadkii 1936, qodobadiisa iyo qaabka loo dabbaqay ayaa daliil cad u ah in ku dawaaqidda gobanimada iyo heshiisyo gaashaanbuureed oo la samaystaa tiiyoo ay sii jirto haysashadii dhulku, aanay ta ka xoraynaysa dadweynaha la haysto, addoonsiga iyo dabagelidda. Aanay ahaynna mid u suurogelinaya wixii la xidhiidha gudaheeda. Ee sida runtu tahay tiiyoo ay jiraan ku dawaaqsi gobonimo iyo heshiisyo la sameeyey, ayaanay dadweynahaasi awoodi karin in ay sameeyaan wax aan ahayn waxa ay ka raalli yihiin gaashaanbuurtaasi xoogani, oo u suurtogalinaya danaha madaxnimadeeda. Xataa haddii ay tahay mid dhibaysa danahooda. Waxayna gacmahoodu noqonayaan qaar ka xidhidhan nidaam-

kooda, siyaasaddooda, sharci-yadooda iyo dhaqaala-hooda. Taasi oo gaashaanbuurta xooggani ay ka raalli tahay uun in ay gaashaanbuurtani tabarta yari noqoto uun mid dabo gasha oo u hoggaansan amarkiisa. Umana oggolaanayso gobonimadaasi la sheegayaa, in ay dawladdaasi la qabsaday iskeed u doorato hab gaar ah ama madax gaar ah. Ee waa in ay raacdaa uun habkaasi ay raalida ka yihiin kuwaasi la haystaa iyo madaxdaasi ka raalida ah gumeysiga.

Kuwaasi gumaystayaashi ahina waa kuwii doorta uun hab raalli gelinaya danahooda. Waana kuwii oggolaado uun madax u adaygaysa oo raalli gelinaysa danahooda, una dhawraysa sumcaddooda iyo hayba-dooda.

Xaaladdii reer Masar iskumay beddelin uun gobo-nimadaasi lagu dhawaaqay. Ee waxaa isbeddelay uun qaabkii ay dalkani ugu talinayeen. Waxay berigii hore u xukumayeen si cad. Haatanna waxay u xuku-mayaan si qarsoon. Waxay hore u qaadi jireen denbi-yada iyo xumaanta ka timaadda xukunka. Haatan se innaka ayaa iska leh xumaanta iyo denbi oo idil, berigii hore wuxuu Ingiriisku iskii u xukumi jiray Masar. Haatan se madax Masaari ah ayaa xukumaya dalkii iyagoo u adeegaya Ingiriiska.



## SIDII LOO FULIYEY HESHIISKII SANNADKII 1936

Wuxuu Ingiriisku ka fuliyay heshiiskii sannadkii 1936 wixii la xidhiidayey uun danahooda. Waxayna farah ka qaadeen wixii u dan ahaa Masar oo idil. Waxaana taasi innagaga filan in ay Masaaridu ogaato in heshiiskaasi loo dejiyay si uu Ingiriisku aanu faraha ula soo gelin arrimaheenna. Isgargaarsina laysku dhaafsado xilliyada dagaalka. Taasi oo aanu Ingiriisku marnaba faraha kala bixin arrimaheenna. Waxaana tusaale cad u ah arrintii dhacday 4/2/1942 iyo codsigii xalkii **ikhawaanul-muslimiinta** (Muslim Brothers). Gar-gaarkii lays dhaafsanayey xilliga dagaalka haddii aynu soo qaadanno, waxaynu dagaalkii ku gargaarnay askarteenii iyo malkeennii. Maamulkii alaabadeenna oo idilna farah ayaan ka saarnay. Markii aynu Yu-huudda diriraynay waxay inoo diideen hub iyo Rasaas-tii ay hore ugu ballan qaadeen. Waxayna inoo diideen inay lacag innagaga iibiyaan. Sidaasi ayuu Ingiriisku u doonayaa in heshiiska la fuliyo haddii dani ugu jirto. Una caddilayaan fulinteeda haddii aanay wax dan ahi ugu jirin fulinteeda.

## WELI WAXBA MAYNAAN BARAN

fashilaadaasina ay innagu dhacday ayey madaxdeenni weli sii wadaan baryo iyo tuugmo. Gacantoodana

hoos dhiganayaan kii tegaya iyo kii imanaya ee Ingiriis ah. Iyagoo baryaya oon marnaba daynayn.

Waxaa ceeb ugu filan Masar in laga bilaabo sannadkii 1945 ilaa maantadani aynu joogno ay Ingiriiska baryayaan in uu hirgeliyo heshiiskii sannadkii 1936. Taasi oo aanay Ingiriisku dhegba u dhigin codsigaasi-una jawaabin kuwaasi waxbaryaya ee laga xidhay nimcadii caqliga iyo nimcadii diinta.

Heshiiskii sannadkii 1936 wuxuu noqday mid tirtirmay oo baaba'ay. Taasi oo bishii Febrayo ee sannadkii 1942 uu ka tallaabsaday Ingiriisku. Bal markaasi sidee ayey madaxdeenna Masaarida ahi ugu malayn karaan heshiiskani mid jira? Maxaanay ka rabaan dhismihiisa? Yaana ka horjoogsan kara Ingiriiska haddii uun buriyo oo uu ka tallaabsado?

Waxaa Masar u khayr badan in aanay ballani weligeedna dhex marin Ingiriiska. Taasi oo ah sida xaqiiqdu tahay, in aan iska taagno arrinta sida dhabta ah. Taasi oo ah in aynu ka dhigno qaar ku soo duulay arladeenii. Iskagana caabdinno awoodeenna iyo maalkeenna. Dhiigeena iyo dhiigoodana ku maydhno dhulkii ay ku wasakheeyeen lugahooda.

## XIKMAD LA YAAB LEH

Dadka qaarkii waxay ugu cudurdaaraan madaxda baryada ay gumaystaha weydiisanayaan gobonimo. Waxayna ku andacoodaan in ay arrintaasi dani ku



qasabtay, ka dib markii ay u caddaatay in diyaarsanaanta shacbigi aanay ka hortegi karin cadowga. Taasi oo ay dhamaan dhallinta Masaaridu ogyihiin in dhulkooda lagu qabsaday tabaryari awgeed. Gumeysiguna uu ku sii waaray tabaryaridaasi sii jirtay.

Haddii ay taasi tahay xikmada, madaxda meesha ka talinaysaa, waa xikmad runahaantii lala yaabo. Haddii ay sax tahay in sababta lagu gumeysanayo dadweynuhu ay tahay tabaryari, sababta gumeysigu u sii waarayna ay tahay waaridda tabaryarida dadweynaha, waxaa markaasi waajibka ugu horreeyaa yahay in dadweynuhu helaa awood. Waanay u fududahay sida uu awood ku helaan dadu halgaamaya xornimadiisa iyo madaxbannaanidiisa. Waana u siisahlantahay Masar oo kale oo ay dhammaan wiilasheedu garanayaan in la joogo xilligii laysku diyaarin lahaa gobonimadoon, garanayaanna in diinta rasmiga ah ee dawladdu ay ka doonayso dhallinta halgan joogto ah, iyo diyaargarow baqo geliya cadowga oo u diida in uu ku fekiro xadgudub.

Laakiin madaxdeennu iyagoo muddo soddon sano ah isku kala beddelayey kursiga talada, waxba kamay qaban sidii dadweynaha loo siin lahaa awooddaasi uu u baahaanyahay. Xataa dawladda lafteedu iskumay yeelin xoog. Taasi oo uu ciidanku tiroyaryahay, qalabyaryahay, aanu haysanna qalabka casriga ah si uu uga mid noqdo ciidamada la tirsan karo. Isagoo ku hoos nool diiqda uu gumeystuhu u soo fidinayo.

Taasi oo haddii ay doonaan ay wax ka siinayaan qalabkoodii ka gaboobay. Haddii kale aanay waxba helayn. Tiiyoo ay Booliskuna babidoodu haystaan hub duug ah oon ku habboonayn in la isticmaalo. taasi oo ay madaxdaasi ilaa sannadkii 1936 ay ku ballanqaadayeen in ay samaystaan warshado yar-yar oo hubka ah. Tiiyoo aanay waxba ka qaban ilaa xilligani aynu joogno. Iyagoo hadba mid hor lehi kursiga talada ku fadhiisanayo.

Waxaana layaab sii leh in Madaxda Masar ee ku andacoonaysa dhaqdhaqaaqa gobonimadoonka, aanay waxba ku heshiin. Sidii ay ugu heshiyeen in ay dadka u diidaan awoodda. Kuwaasi oo u diidan dadka Masarrida ah in ay qaadaan hubka nooc kasta ha ahaadee. Xataa waxay u diidaan makiinadaha yaryar ee dalka gudihiisa lagu sameeyay. Waxaana intaasi u sii dheer in ay Masaarida u diidanyihiin in ay isku tababaraan insticmaalka hubka. Waxayna ku sii adkaysanayaan fulinta qawaaniinta xaaraantimaysay haysashada hubka. Waxayna marwalba sii adkaynayaan denbiyada lagu qaadayo. Ilaa ay gaadhay in uu hubku noqdo waxa ugu daran ee lagu eedeeyo qofka Masriga ah.

Sidaasi ayey suubinayaan dawlada Masar ee Islaamka ahi, oo ay weliba ku sii adkaysanayaan. Tiiyoo ay ogyihiin in Islaamka, caqliga, iyo caqligalka arrimuhuba ay ku waajibinayaan Masaarida in ay isku tababaraan hubka, qaadaan oo ay kula dagaalla-



maana kuwa gumeysanaya. Ma waxaa hadaba lagu ciqaabayaa Masaarida ku dheggenaanta Islaamka iyo gudashada waxay farayaan diinta iyo caqligu. Iyo ta ay ku waajibinayso u niyad samaanta dalkooda, iyo ta ay farayso raganimadoodu? Mise waxaa lagu ciqaabayaa in hub qaadistooda iyo tababarkoodu uu werwer gelinayo raaxadii gumaystaha oo uu cudur ku ridayo?

## LAYAABKA AAN DHAMMAANAYN

Waxaa wax lala yaabo ah hawlaha madaxdeenna u halgamaysa gobonimadeenna sida ay ku andacoonayaan. Laakiin layaabku ka dhammaan maayo waxa ay madaxdaasi suubinayso maalinta ay taladu ka wareegto dawladdaasi gumeystaha ah. Fursadina u soo gasho in ay Masar qaadato xaqeedii oo ay ka erido dhulkeeda kuwaasi ku soo duulay. Maalintaasi ayey isku beddeli madaxda Masar, qaar u adeegaya Ingiriiska oo sii baro dheeraysiinaya Ingiriiska lafahaantiisa. Maalintaasi ayey Muhimada dawladda Masaaridu noqon mid ilaalinaysa nabadgelyada dadka Ingiriiska ah. Lana dagaallamaysa dadka dalka u dhashay. Tirtirina doontaa dhaqdhaqaaq kasta oo u jeeda inuu tirtiro awoodda Ingiriiska, maalintaasi ayaa albaabada loo furi Xabsiyada laga buuxinayo dadka Masaarida ah. Waxaana dadka lagu sii dayn basaasiin daba socda kuwa ka soo horjeeda Ingiriiska,

ama khatargelinaya nabadgelyadooda iyo awoodooda. Maalintaasi ayaa dadkii dalka u dhashay la wada tuhmi. Loona wada diyaarin maxkamada. Lagana wada buuxin Xabsiyada. Iyadoo laga wada aragudanayo wadaninimadooda. Loona diidanyahay raganimadooda iyo baniiaadminimadooda. Lana xayirayo firfircoonidooda, lagana takhallusayo rajo kasta oo laga qabo xoraynta Masar, loona suurtogelinayo gumaystaha inuu dusha ka saarnaado Masaarida.

Waxay taasi dhacday sannadkii 1914 iyo sannadkii 1918. Maalintaasi oo dagaal lagaga soo horjeeday Ingiriiska. Taasi oo ay Turkigu dulaydka Masar uga jireen bari, Sanuusiyiintuna galbeedka. Waxaana ku filnayd uun in ay Masaaridu samayso inyar oo dhaqdhaqaaq ah. Si ay uga farabaxaan gumeysiga Ingiriiska. Dhaqdhaqaaqoodana ay kaga faaiidaystaan xaaladda uu dagaalku ku dhammaaday. Laakiin madaxdii Masar ayaa u haysay caadifad weyn una janjeedhay xagga Ingiriiska. Kana doortay gobonimadii Masar iyo sharaftoodii. Waxayna kabuuxiyeen Xabsiyadii qofkasta oo liddi ku noqda Ingiriiska. Ama ku fekira wax ka soo horjeeda.

Waxayna sidaasi oo kale dhacday sannadihii 1940–1944, markii ay Ingiriisku jar ka sii laalaadeen. Maalintii ay Ingiriisku bilaabeen in ay iskaga cararaan Masar iyagoo cabsanaya oo quustay. Laakiin dawladda Masar oo keliya ayaa ka dejisay baqihii, kana dulqaadday quustii, una sii daysay awoodoodii.



Sannadkii 1948 ayuu kacankii ku liddiga ahaa Ingiriisku gaadhay heerkii ugu sarreeyay. Waxaana si weyn loo gilgilay tiirarkii uu Ingiriisku dalka ku lahaa. Waxaana waxaasi oo idil ugu wacnaa dhaqdhaqaaqii Walaalaha Muslimiinta. Wuxuuna Ingiriisku ku dhaqaaqay inuu dawladda ku diro walaalaha Muslimiinta. Waxayna dawladdii Masaaridu isku beddeshay mid dugaag ah oo si naxariis darro ah u laynaysa walaalihii. Kana buuxinaysa Xabsiyada iyadoo loo geysanayo cadaabta ugu fooshaxun. Lana bannaysanayo jidhkooda, iyo sharaftooda. Laguna samaynayo wax dugaaggu aanay samayn karin.

Madaxda Masaaridu waxay dadkoodii kula kacayaan kibirkaasi. Waxayna Ingiriiska wax uga celinayaan sidaasi naxariis darrada ah. Iyagoo ah u adeeyaan sidaasi naxariis darrada ah. Iyagoo ah u adeegayaal Ingiriis oo is jeclaysiinaya. Una sii oggol awoodaasi sharci laanta ah. Awoodaasi ay ka soo qaadanayaan awoodooda. Mustaqbalkiisana ku xidhaa yo mustaqbalkiisa.

## KUWAASI MA MUSLIMIINBAA

Madaxda Masar ee ku andacoonaysa in ay u jihaadayaan xornimada Masar awgeed, horta ugu horreyn waa Muslimiin. Waxay muslimiin ka yihiin ugu yaraan magacyadooda iyo aabayaashood. Xataa haddii aanay naftooda kala raalli ahayn in ay caqli ahaan iyo qalbigaba ka noqdaan Muslimiin. Mid

keliyana taariikhdiisa kuma jirto in uu mar keliya u adeegay Islaamka ama uu oogay xukun ka mid ah xukunka Muslimiinta. Ama uu colaadiyo nacabka Islaamka, ama uu gargaaray halyeeyada Islaamka.

Islaamku wuxuu si buuxda u xaaraantimaynayaa dabagalka wixii aan Muslimiin ahayn. Si ay hawsha qofka Muslinka ahi u noqoto mid u go'an Islaamka iyo Muslimiinta.

Saldhigga Islaamkuna waa in uu qofka muuminka ahi yahay ka u taliya qofka muuminka ah. Gaalkana uu gaal u taliyo. Muslimiintuna bari iyo galbeedba ay yihiin ummad keliya.

« **Waa tani ummaddiinnu waa ummad keliya** » Al-Mu'minuun-52.

« **Muminiintu waa walaalo** » Al-Xujaraat-10.

Gaal oo idilna waa isku millad keliya.

Wuxuu Islaamku diidanyahay in la dabagalo wax aan Muslimiin ahayn. Waayo taasi waxay keenaysaa fidno iyo fasaad. Waxaana lagu tirinayaa qofkii dabagala wax aan muslin ahayn mid ka baxsan diintii oo loogu abtirinayo kaasi uu dabagalay.

Umana bannaynayo Islaamku Muslimiintu in uu kalgacayl dhexmaro isaga iyo kaasi inkirsan Islaamka ee colaadinaya. Xataa haddii uu yahay aabihii ama wiilkii ama walaalkii ama tolkii. Wuxuuna Quraanku qofka caynkaasi ah ku tirinaya mid ka arradan iimaan-kii.

Umana diidana Islaamku dadka Muslimiinta ah



in uu kalgacayl dhex maro iyaga iyo kuwa aan ahayn Muslimiinta mar haddii aanay la dagaallamayn mus-limiinta oo aanay ku xadgudbayan. Ee waxaaba markaasi oo kale ku waajib ah muslimiinta in ay u roonaadaan. Laakiin wuxuu islaamku u diidayaa muslimiinta in ay jeclaadaan kuwa kula dagaallamaya diinta ee ka saaray dadkii muslimiinta ahaa guryahoo-dii ee caydhiyay.

## QAWAANIINTA LA DEJIYEY WAXAY KHATAR GELINAYSAA HAB-BULSHEEDKEENNA

*Hab bulsheedka Islaamka ah:* Hab bulsheedka dalalka Islaamka waxaa looga jeedaa habka Islaamka. Waayo Islaamku wuxuu xukumayaa dhaqdhaqaaqa muslinka iyo noloshiisa, hawlihiisa iyo hadaladiisa, mucaama-laadkiisa iyo hawgalkiisa, xidhiidhka uu ku leeyahay tolka iyo shisheeyaha, nacabka iyo saaxiibka. Wu-xuuna u sawirayaa akhlaaqdiisa iyo habkiisa nolosha. Islaamkuna wuxuu ku oogayaa bulshada oo idil saldhig Islaam soocan ah xaggan maamulka, xu-kunka, siyaasadda, cilmiga, Fanka iyo Suugaanta, bulshada, dhaqaalaha iyo qaybinta hantida xilliga dagaalka iyo nabaddaba. Gudaha iyo dibedaba.

Waxaa inoo suurtogelaya in aynu ku kala soocno dalalka Islaamka gudihiisa hab bulsheedka ah iyo nidaamka xukunka. Waxaynuna odhan karnaa hab-

bulsheedku waa ta ay dadweynuhu ugu dhaqmayaan lafahaantoodu. Xidhiidhka ay shisheeyaha la yeelanaysana xukumaya, iyo xidhiidka afraadda bulshada ka tirsan dhexdooda maraya. Laakiin nidaamka xukunku waa ka ay dadweynuhu u hoggaansanyihiin in lagu xukumo. Kaasi oo ah mid ay u doorayaan madaxda dawladdu. Waana nidaamka xadaynaya xuquuqda madaxda dawladaha iyo waajibaadkooda.

Laakiin kala soocaasi wax ahmiyad ah kuma laha dalalka Islaamka. Waayo hab-bulsheedka iyo nidaamka xukunka ee dalalkaasi waxay ku qotomaan Islaamka oo ay ku soo noqonayaan. Islaamkuna ma oggola kala goo'go Umana oggola muslimiinta in ay dhigaaladooda u dejiyaan wax khilaafsan Islaamka. Wax kasta oo ku khilaafsan Islaamka xagga bulshada iyo xagga xukunkaaba wuxuu ka baxsan yahay habka bulshada iyo nidaamka xukunka. Taasi oo ah Islaamkii oo laga baxayo. Taasi oon marnaba ku habboonayn Muslimiinta in ay oggolaadaan dhibaato kasta oo ay ku kallifayso.

Bal aynu soo bandhigno saldhigyada muuniimka ah ee uu ku qotominayo Islaamku nolol-bulsheedkeenna. Markaasi ka dibna aynu soo bandhigno dhigaallobulsheedkeenna, si ay innogu caddaato ilaa heerka ay inna gaadhsiiyeen qawaaniintaasi inoo degsani.



## SALDHIGYADA HAB-BULSHEEDKA ISLAAMKA AH

Wuxuu ku qotomaa hab-bulsheedka dalalka Islaamku saldhigyo Islaam soocan oon waxba tarrixin ah. Wuxuuna ka leeyahay muuqaal Islaamnimo marka dhinac kasta laga eego. Islaamkuna waa nidaamkii uu u dooray Ilaahay baniiaadmiga in ay noloshoodu ku qotonto. Kuna noolaysiiyo nolol fiican. Kuna badhaadheeyo If iyo Aaakhiraba. Waxaana ugu muhimsan hab-bulsheedka Islaamka kuwa soo socda:

### I
### SINAANSHO BUUXA EE BANIIAADMIGA

Wuxuu Islaamku ku qotominayaa bulshooyinka Islaamka ah saldhigga ah sinaansho buuxo ee baniiaadmi. Wuxuuna caddaynayaa sinnaansho buuxda oon waxba lagu xidhin, oo ka dhaxaysa afraadda, bulshooyinka, jinsiyada. Sinnaansho buuxa oo ka dhexeeya kuwa wax xukumaya iyo la xukumayo. Taasi oon ninna ninkale aan laga fadilayn. Mid cadna aan laga hormarinayn mid madow. Mid carab ahna aan laga hormarinayn mid Cajam ah:

**« Dadyahow waxaanu idinka abuurnay lab iyo dheddig. Waxaanuuna idinka yeelnay shacbiyo iyo**

**qabiilooyin si aad isku kala Garataan. Waxaa Ilaahay agtiisa idiinku sharaf badan ka idiinku cabsi badan** ». «I–Xujaraat – 13

Taasina waa mid uu Rasuulkii innoogu caddeeyay hadalkiisa:

« Dadku waxay u simanyihiin sida ilkaha shanlada oo kale. Carabina kama fadli badna Cajam. Waxaa lagu kala fadli badan yahay uun Alla-cabsiga ».

« Ilaahay wuxuu Islaamka ka saaray dhiidhigii jaahiliyadda iyo ku faanfaankii aabayaashood. Waayo dadku waxay ka yimaadeen Aadan. Aadanna waxaa laga abuuray dhoobo. Waxaana ugu sharfan kii ugu cabsi badan ».

Dadka oo idili way simanyihiin tiiyoo aan loo kala aabbo yeelayn kala geddisnaanta shacbiyadooda iyo iyo qabiilooyinkooda. Wayna u simanyihiin xuquuqda, waajibaadka iyo xilalka. Waxayna u simanyihiin sida Ilkaha Shanlada oo kale een Iligna Ilig ka weyneen. Iligna Ilig ka yarayn. Waxayna yihiin sidii carruurta ninka keliya iyo hooyada keliya. Taasi oo asalnimadooda isku midka ahi ay u oggolaanayso sinaanshaha xuquuqdooda, waajibaadkooda, iyo masu'uliyadooda.

Cabsiduna waa sida keliya ee lagu kala faddilo baniiaadmiga marka Islaamka la eego. Laakiin waa faddilaad leh soohdin go'an. Waa kala faddilaadda Ilaahay agtiisa oo kaliya. Waxa Ilaahay agtiisa ugu sharaf badan kii ugu cabsi badan.



Cabsida uu Ilaahay agtiisa sharafta ku leeyahay, maaha mid siinaysa xuquuq ka dheeri ah xuquuqda dadka kale. Cabsidu waa sifo ku xidhiidhinaysa baniiaadmiga Rabbigiisa. Taasi oo ka weyn ta xidhiidhka baniiaadmigu la leeyahay dadka kale. Kala faddilaadda ka imanaysa cabsiduna waa faddilaad macnawi ah ee maaha mid maaddi ah.

## II
## CADDAALAD BUUXDA

Wuxuu Islaamku ku qotominayaa Bulshada caddaalad buuxda oon wax xadhig ahi ku xidhnayn. Caddaalad ay u wada simanyihiin saaxiibada iyo nacabku. Una simanyihiin tolka iyo shisheeyuhu. Caddaalad aan oggolayn janjeedhsi iyo wax jeclaan.

Kana goni yihiin kuwa magaca iyo wejiga lehi. Caddaaladda siinaysa xaqa qofka leh. Waayo isaga ayaa ugu xaq leh. Kana qaadaysa xuquuqda kaan xaq u lahayn. Waayo isaga ayaa ugu xaq leh. Kana qaadaysa xuquuqda kaan xaq u lahayn. Waayo ma istaahilo. Caddaaladda ku tirinaysa ka tabarta yar ee xaqa leh mid xooggan ilaa ay xaqiisa u celinayso. Kuna tirinaysa ka xooggan ee xaqa boobay mid tabaryar ilaa laga soo Celinayo xaqa aanu lahayn. Caddaaladda uu Ilaahay amray:

« **Ilaahay wuxuu farayaa caddaalad iyo ixsaan** ». Kuma filna uun in uu qofku caadil noqdo ee waa in uu

intii tabartiisa ah ku dedaalaa sidii uu u wanaajin lahaa caddaaladdiisa.

« **Haddii aad dadka dhexdooda xukuntaan in aad ku xukuntaan caddaalad** » Al-Nisa-58.

« **Haddii aad wax dhahdaan caddaalad ha noqoto xataa haddii ay tol yihiin** ». Al-Ancaam-52

« **colaad aad qolo u qabtaan yaanay idinka leexin caddaaladda** ». Al-Maaida-8

« **Kuwa rumeeyeyow noqda qaar oogaya dhexdhexaynta oo Ilaahay u marag ah xataa haddii ay tahay naftiinna, waalidkiin iyo qaraabada. Haddii uu yahay mid maal qabeen ah iyo mid faqiir ahba. Ilaahay ayaa ka horeeya ee hawada ha ka raacina in aad caddaalad fashaan** ».

## XORNIMADA UGU BALLAADHAN

Wuxuu Islaamku qotominayaa bulshada saldhigyada xornimada ugu ballaadhan ee leh muuqaalka ugu fiican. Xornimada caqiidada, xornimada fekiraadda, xornimada hadalka, intaasi oo idil iyo qaar kaleba waa qaar uu oggolyahay Islaamku. Kagana dhigayo mid ku qasab ah bulshada Muslinka ah. Ahna saldhigyada nolosha ummadda Islaamka ah.

Wuxuu Islaamku qirayaa xornimadda caqiidada. Wuxuuna qof kasta u oggolyahay in uu qaato caqiidadii uu isagu doono, qofna laguma qasbi karo in uu



caqiido qaato ama in uu caqiido faraha ka qaado.

« **Diinta layskuma qasbayo** ». » **Haddii uu rabbigaagu doonayo, waxaa rumeyn laha waxaa arlada ku nool oo idil. Ma dadka ayaad ku qasbaysaa ilaa ay muuminiin noqonayaan** ». Yuunis-99

« **Rasuulka waxaa la gudboon uun gaadhsiin** ». Al-Nuur-54.

Wuxuu Islaamku qirayaa xornimada fikradda. Wuxuuna dadka ku guubaabinayaa in ay wax kasta u fiirsadaan. Wuxuuna Quraanku ugu talogalay in uu dadka ku jiito Islaamku fekiraadooda, iyo caqligooda ay kaga shaqaysiinayaan. Taasi oo uu ugu baaqayo in ay u fiirsadaan abuuritaanka Samooyinka iyo arlada. Iyo abuuritaanka naftooda. Iyo in ay u fiirsadaan waxa ku xeeran ee ay ishoodu ku daacayso, ama ay dhegahoodu maqlayaan si ay taasi u gaadhsiiso garashada kii abuuray. Iyo in ay kala sooci karaan xaqa iyo baadilka.

Qodobada Quraanka ku jira ee innagu baraarujiya in aan caqligeenna kaga shaqaysiinno oon si madaxbannaan u fekirno aad ayey u farabadanyihiin.

«**Miyaanay u fiirsan naftooda** »

« **Dheh' Eega waxa yaalla samooyinka iyo arlada** ».

Wuxuu Quraanku dadka ku ceebaynayaa in ay Caqliyadooda ka faaiidaysanwaayaan, oo ay caddilaan fekiraadooda. Oo ay ku dhegganaadaan caadooyinkookooda iyo dhaqankooda. Rumeeyaanna khuraafaadka

iyo beenbeenta. Wuxuuna kuwa sidaasi oo kale ah ku tilmaamayaa in ay xoolaha la mid yihiin. Kana sii liitaan xoolaha. Waayo iyagoon fekirin ayey dad kale iska raacayaan. Kuwaasi oon uga faaiidaysanayn Caqligooda waxa ay suubinayaan, ama ay leeyihiin ama ay maqlayaan.

« **Haddii lagu yidhaahdo soo raaca waxa uu Ilaahay soo dejiyey, waxay odhan maya eewaxaanu raaci wixii aanu ka barannay aabayaashayo. Haddii aabayaashood aanay waxba garanayn oonay hanuunayn** ». Al-Baqara-170.

« **Miyaanay arlada kor socon si ay u yeeshaan qalbiyo ay wax ku kala gartaan, ama dhego ay wax ku maqlaan. Indhuhu ma aragti beelaan, ee waxaa aragti beela qalbiyada laabta** ». Al-Xaj-46.

Wuxuu Islaamku caddaynayaa xornimada hadalka. Wuxuuna kaga dhigayaa mid uu xaq u leeyahay qof kasta oo baniiaadmi ahi. Wuxuu Islaamku waajib ka dhigayaa in laga hadlo dhammaan wixii taabanaya akhlaaqda, masaaliixda guud iyo nidaamkaba, iyo wax kasta oo lagu tiriyo in ay xumaan tahay.

« **Ha idinka mid noqoto ummad ku baaqaysa khayrka, wanaagga faraysa, diidaysana xumaha** ». Aal-Cimraan-104.

« **Kuwa haddii aanu arlada u sugno, oogaya salaadda, sakadana bixinaya, wanaaggana faraya, diidayana xumaha** ». Al-Xaj-41.



Wuxuuna Rasuulkii Ilaahay yiri: « Kiinnii arka xumaan, ha ku beddelo gacantiisa. Haddii uu kari waayana Carrabkiisa. Haddii uu kari waayana Qalbigiisa. Kaasi oo ah iimaanka ugu tabarta yar ».

Wuxuuna yiri: « Waxaa jihaad ugu fadli badan eray xaq ah oo laga hor yidhaahdo Imaam xadgudubsan ». Wuxuuna yiri: « Diintu waa waano ». Waxay yiraahdeen kuma Rasuul Allow, Wuxuu yiri: « Ilaahay, Rasuulkiisa, kitaabkiisa, madaxda muslimiinta iyo dadweynaha ».

Wuxuuna yir: « Shuhadada waxaa u sayid ah Xamsa Bin Cabdil Mudalib, Iyo nin ku kacay Boqor xadgudubsan oo uu faray, ka dibna uu diiday oo uu dilay ».

## IV
## WALAALNIMADA

Wuxuu Islaamku ka dhex samaynayaa bulshada Islaamka asaas xooggan oo walaalnimo ah. Wuxuuna ku tirinayaa muslimiinta walaalo ay isku xidhayso xidhiidhka walaalnimada Islaamku. Kuwaasi oo ay ujeedadooda midaynayso safafkoodana xoojinayso. Dushana ka saarayso in ay sameeyaan isgargaarsi, iyo isku naxariisasho.

« **Muumintu waa walaalo** ». Al-Xujaraat-10.

« **Nimcadiisii ayaad walaalo ku noqoteen** ». Aal-Cimraan-203.

Wuxuuna Rasuulku yiri – N.N.E.K.H.A –

« Muslimka qofka ahi waa walaalka qofka muslinka ah ». Ma dulmayo. Ka walaalkii u baahanina, Ilaahay ayaa u baahan. Ka qof muslin ah ka dulqaada kurbo, Ilaahay wuxuu ka saaraa kurbad ka mid ah kuwa maalinta Qiyaamaha. Ka qof muslin ah asturana, wuxuu Ilaahay asturaa maalinta Qiyaamaha ».

## V
## MIDOWGA

Ka dib markii uu Islaamku ku qotomiyay bulshada muslinka ah saldhigyada walaalnimada, ayuu ku waajibiyay muslimiinta midow iyo in ay ku soo dul xoomaan calanka Quraanka. Wuxuuna ka xaaraantimeeyay tafaraaruq iyo isdilid. Si ay u noqdaan gacan keliya iyo Carrab keliya. Wuxuuna ku waaniyay haddii ay arrin isku qabtaan in ay kula noqdaan Ilaahay. Si aanay meeshaba u soo gelin wax laysku diriro oo laysku khilaafo. Iyo si ay u jirto midnimo oo ay safafku u noqdaan qaar fayow. Iyo si aanay hawooyinka iyo danuhu aanay u yeelan daldaloollo.

**« Wada qabsada dhammaantiin xadhigga Ilaahay. Hana tafaraaquqina. Xasuustana nimcada Ilaahay ee korkiinna ay ee idinkoo col ah uu qalbiyadiinnii isku keenay. Taasi oo nimcadiisa awgeed aad ku noqoteen walaalo** ». Al–Cimraan–103.



**« Ha dirina, waydun fashili oo la waayi urtiinabb e. »** Al–Anfaal–46.

**« Ha noqonina sida kuwa tafaraaruqay ee is khilaafay** ». Aal–Cimraan–105.

**« Haddii aad arrin isku qabataan kula noqda Ilaahay iyo Rasuulkiisa haddii aad rumeysantiihiin Ilaahay iyo maalinta aakhiro. Taasi ayaa idiin khayr badan oo idin roon** ». Al–Nisa–59.

## ISGARGAARSI

Wuxuu Islaamku ku qotominayaa bulshada isgargaarsiga khayrka iyo samaanta. Ka dheeraanta wixii la xaaraantimeeyay. Iyo la dirirka xumaanta iyo fasaadka. Iyo tirtiridda denbiga iyo colaadda. Iyo dhismaha bulshada Islaamka oo laga ilaaliyo dhammaan cudurada Ijtimaaciga ee bulshada u keenaya xumaanta iyo baabaa'

**« Ha idinka mid noqoto ummad ku baaqaysa khayrka. Faraysa wanaagga, ee xumaha isku diidaysa ».** Aal–Cimraan–104.

**« Isku gargaara wanaagga iyo cabsida. Hana isku gargaarina denbiga iyo colaadda** ». Al–Maaida–2.

## VII
## KA DHEERAANSHAHA XAARAANTA

Wuxuu Islaamku ku qotominayaa bulshada in ay ka dheeraadaan xaaraanta. Lana xaaraantimeeyo faaxishada wixii muuqda iyo wixii qarsoonba, denbiga, xadgudubka aan xaqa ahayn. Lama gudboona in uu qof muslin ahi la yimaaddo sir ahaantiisa, iyo si caddaana ahba faaxishad uu xaaraantimeeyey Islaamku. Lamana gudboona in uu sameeyo wax aanu xaq u lahayn ama uu doono wax aanu lahayn.

« **Dheh, wuxuu rabbigay xarrimay xumaanta ta muuqata iyo ta qarsoonba. Denbiga, iyo kibirka aan xaqa ahayn. Iyo in aad Ilaahay ugu shariig yeeshaan, wax aanu awood siin. Iyo in aad Ilaahay ka sheegtaan wax aydaan garanayn** ». Al–Acraaf–33

« **Ka cabsada Ilaahay, waxbuu idin bari Ilaahay e.** Al–Baqara–282.

« **Ilaahay ka cabsada intii aad kari kartaan. maqla oo addeeca** ». Al–taqaabun–16.

« **Ku nabadgala wanaagga iyo cabsida. Kana cabsada Ilaahay aad ku soo ururidoontaan** ». Al–Mujaadala-9

« **Awliyadiisu waa kuwa cabsanaya uun. Laakiin intooda badani ma oga** ». Al–Anfaal–34.



## VIII
## OGGOLAANSHAHA WANAAGGA

Wuxuu Islaamku ku qotominayaa bulshada akhlaaqda suubban, iyo wanaagga baniiaadminada heerka sare ah. Wuxuu Islaamku ku wajibinayaa Muslimiinta in ay ku dhaqmaan akhlaaq wanaagsan. Kana dheeraadaan xumaan. Si ay bulshada Islaamku u noqoto bulsho tusaale fiican oo lagu daydo ah. Taasi oo haddii uu qofka muslinka ahi uga baaqayo dadka Islaamka, waa in ay bulshada Islaamku u noqoto bulsho tusaale fiican oo lagu daydo ah. Taasi oo haddii uu qofka muslinka ahi ugu baaqayo dadka Islaamka, waa in ay taasi noqotaa xikmad iyo wax isku sheegid suubban. Haddii uu cidkale la doodana in uu si fiican ula doodo.

« **Ku baaq jidka rabbigaaga xikmad iyo wax isku sheeg suuban. Kulana dood sida ugu fiican** ». Al–Naxal–125.

Lamana gudboona in uu qofka Muslinka ahi ku dhawaaqo hadal xun, isagoo la dulmo mooyaane. Qofkii aan la dulmini maaha in uu ku dhawaaqo xumaan.

« **Ilaahay ma jecla in lagu dhawaaqo hadal xumaan ah tiiyo la dulmo mooyaane** ». Al–Nisaa–148.

Mana ah in uu qof muslin ahi ku dheeldheelo qof ama uu ku yiraahdo naanays oo uu ugu yeero.

« **Kuwa rumeeyeyow, yaanay qolona qolo ku dheel-dheelin, waaba intaasi oo ay iyaga ka khayr badanyihiin e. Haweenna yaanay haween ku dheel dheelin waaba intaasi oo ay ka khayr badanyihiin e. Ha is caayina, hana iskugu yeedhina naanays** ». Al-Xujuraat-11.

Maaha in uu jofka muslinka ahi wax ugu maleeyo walaalkiisa muslin ah. mana aha in uu jaasuuso. Mana aha in uu xanto.

« **Kuwa rumeeyeyow, ka dheeraada in badan oo male ah. Malaha qaarkii waa denbi. Ha is jaasuusina, qaarkiinna yaanay qaar xaman** ». Al-Xujuraat-12.

Maaha in uu qofka muslinka ahi isweynaysiiyo oo uu is kibriyo.

« **Ma jecla kuwa is kibriya** ». Al-Naxal-23.

Maaha in uu qofka muslinka ahi sanka taago oo uu faanfaano.

« **Ilaahay ma jecla kuwa sanka taaga ee faan faana** ». Al-Nisaa-36.

Waxaa lagudboon qofka muslinka ah in uu iska dhaafo ka dulma, wax siiyo kii wax u diiday, wanaagga faro oo uu diido kuwa jaahiliinta ah.

« **Iska dhaaf, waanaagga far oo diid jaahiliinta** ». Al-Afcraaf-199.

Waxaana la gudboon in uu naftiisa u difaaco si san.



Waayo sidaasi ayaa u dhow in ay colaadda saaxiibtimino u beddesho oo ay qalbiyada isku soo dhoweyso.

Waxaa qofka muslinka ah la gudboon in uu dadka heshiisiyo.

« **Heshiisiiya walaaladiin** ». Al-Xujuraat-10

Waxaa la gudboon qofka muslinka ah in uu diido hadalka laqwiga ah.

« **Kuwa laqwiga diidayaa** ». Al-Muuminuun-3.

Maaha in uu qofka muslinka ahi dadka ka bakhso alaabadooda.

« **Dadka ha ka bakhsina alaabadooda** ». Al-Acraaf-85.

Mana aha in uu hawaysto waxa uu Ilaahay dadka qaarkii ku fadilay.

« **Ha hawaysanina waxa uu Ilaahay qaarkiinba qaar kaga fadilay** ». Al-Nisaa - 32

Waana in aanu illoobin qofka Ilaahay wax siiyay walaalkiisa muslinka ah.

« **Ha Illoobina fadliga dhexdiinna ah** ». Al-Baqara-237.

Taasi waxay ahayd in yar oo ka mid ah wanaagga heerka sare ah ee carahadan ee uu Islaamku la yimid. Taasi oo uu ku waajibiyay muslimiinta in ay ku dhaqmaan. Waxaana muslimiinta kaga filan akhlaaqda wanaagsan in uu Ilaahay uga dhigay tusaale lagu daydo oo fiican.

« **Wuxuu Rasuulka Ilaahay idiin yahay tusaale fiican oo lagu daydo** ». Al–Axzaab–21.

Ilaahay wuxuu ku sifeeyay Rasuulkiisa akhlaaq weyn. Wuxuuna yiri: « **Waxaad tahay mid akhlaaq weyn** ». Al–Qalam–4.

Wuxuuna yiri: **Raxmadda Ilaahay ayaad ugu jabsanaantay. Haddii aad ahaan lahayd mid qalbi adag agtaada way ka carari lahayeen. ee u denbidhaaf iskana dhaaf** ». Al–Cimraan–159.

Haddii ay muslimiintu ku socdaan jidkii Rasuulkii, oo ay ka dhigtaan ficiladiisa, hadaldiisii iyo akhlaaq-diisii mid lagu daydo way liibaaneen. Waxayna gaa-dheen fadligii ugu fiicnaa.

## WAKIILNIMADA HANTIDA ILAAHAY

Wuxuuna Islaamku ku tirinayaa arlada iyo waxa dusheeda ah oo idil hanti Ilaahay iska leeyahay. « **Ilaahay ayaa iska leh samooyinka iyo arlada iyo wixii dushooda ahba** ». Al–Maaida–120.

Wuxuu u cammiray dadka aadamiga ah oo uu u diyaariyay in ay ka faaiidaystaan.

« **Isgaa idiin abuuray arlada oo idin cammiray** ». Huud–61.

« **Isagaa ayaa idiin abuuray waxaa arlada yaalla oo idil** ». Al–Baqara–29.



Maalku waa malkii Ilaahay. Isagaana leh ee iyagu malaha. Laakiin waa u wakiil oo waa loo xilsaaray.

« **Wuxuu rabbigaagu ku yiri malaaigta waxaan arlada u yeelayaa wakiil** ». Al–Baqara–30.

« **Waa ka idinka dhigay kuwo arlada ka wakiil ah** ». Al–Ancaam–165.

« **Bixiya wixii la idiinka dhigay wakiil** ». Al–Xadiid–7.

« **Ka siiya maalka Ilaahay ee uu idin siiyey** ». Al–Nuur–33.

« **Ma moodayaan waxa aanu u fidinaynno ee ah maal iyo carruur aynu khayr ugu dedejinaynno** ». Al–Muuminuun–55

Wuxuu u cammiray dadka aadamiga ah oo uu u diyaariyay in ay ka faaiidaystaan.

« **Isagaa idiin abuuray arlada oo idiin cammiray** ». Huud–61.

« **Isaga ayaa idiin abuuray waxa arlada yaalla oo idiil** ». Al–Baqara–29.

« **Waxaanu idiin fidinnay maal iyo carruur** ». Al–Israa–6.

Haddii uu maalka kala geddisani yahay maalkii Ilaahay, dadkana wakiil looga dhigay, qofna lama gudboona in uu ka xayiro waxa gacantiisa ku jira

dadka kale, haddii uu aad ugu baahanyahay. Mana aha in uu ka xayiro masaaliixda guud. Mana aha in uu kaydsado tiiyoo uu Ilaahay u abuuray in laga faaiidaysto. Waana in aanu u malayn haddii uu wax ka mid ah maalkaasi wax ka bixiiyo in uu bixinayo wax uu isagu iska leeyahay. Ee waa in uu ogaadaa in uu yahay mid bixiyay wax maalkii Ilaahay ah. Sidii uu isba uga soo qaatay maalkii Ilaahay.

« **Wuxuu Ilaahay idinku kala fadilay risiqa. Kuwa lagu fadilay risiq hayntu ee ay gacantooda ku jirtaa way ula simanyihiin. Ma nimcada Ilaahay ayey diidayaan** ». Al–Naxal–71.

Taasi oo ah in Ilaahay qaarba uu qaar kaga fadilay risiqa, oo u qaaraba qaar uga dhigay adeegayaal. Qaarna uu ka dhigay kuwo wax leh. Kuwa lagu fadilay risiqa maaha kuwa risiqaya adeegayaalkooda iyo shaqaalahooda. Ee way u simanyihiin risiq helidda. Waayo dhammaantood waxay risiqa ka helayaan Ilaahay. Waanay u simanyihiin risiqa Ilaahay. Isaga ayaana risiqaya ka wax leh iyo ka laleeyahayba, Sayidka iyo adeegaha, boqorka iyo ka faqiirka ah.

« **Wax ka siiya maalka Ilaahay ee uu idin siiyay** ». Al–Nuur–33

Qodobkaasira wuxuu u gaar yahay kuwa addoomadaha ah ee qoraalada qoray. Waxaana looga jeedaa si looga gargaaro kuwaasi si ay iskaga bixiyaan daynta. Marka uu qodobkaasi farayo in la gargaaro kuwaasi



qoraaladaqoray, wuxuu xasuusinayaa dadka in aanay bixinayn maalkooda ee ay bixinayaan maalka Ilaahay, ee uu siiyay ugana dhigay wakiil.

Waxay taasi laga dhigaya maalka mid Ilaahay iska leeyahay oo ay dadkuna wakiil uun ka yihiin inna tusaysaa in ay dawladda Islaamku xaq u leedahay in ay hantida afraadda ka goyn karto wixii maslaxad guud ah iyo wixii baahi tiri kara kuwa baahan. Iyo in ay kormeerto sida hantidu u qaybsantay. Si ay u xadayso hantida kuwa maalqabeenka xad dhaafka ah, sarena ugu soo qaaddo heerka fuqarada saboolka ah.

## X
## BAAHINTA HANTIDA

Wuxuu hab-bulsheedka Islaamku ku qotomaa baahinta iyo qaybinta hantida. Taasina wuxuu Islaamku u suurtogelinayaa saddex siyaalood. Ta koowaad: **Dhaxalka:** Wuxuu keenayaa marka la raaco habka Islaamku in loo qaybiyo hantidii ka dhintay, waalidkiisa, ooridiisa, Carruurtiisa, Carruurtiisu kuway sii dhaleen. Mararka qaarkoodna waxaa wax ka qaata Casabadiisa iyo Qaraabaadiisa.

*Ta labaad: Cashuurta Sakada:* Taasi oo laga goynayo qayb ka mid ah maalka kaydsan. Een ahayn macaashka. Qaybtaasi oo dhan 2 1/2 % ee maalka kaydsan. Lagana qaadayo maalqabeenka. Lana siinayo Fuqarada.

*Ta saddexaad:* Xaqa ay dawladdu u leedahay in ay hantida ay afraadda ka goyso wixii danaha guud ah, ee isku soo dhaweynaya kala durugsanaanta dabaqadaha, sidii aynu horayba u soo caddaynay.

Waxaana jirta mid afraad. Taasi oo xaaraantinaynta. Islaamku wuxuu ka xaaraantimaynayaa qofka muslinka ah in uu ururiyo maalka oo uu caddilo, oo aanu ka faaiidaysan.

Waa kuwaasi afarta qaab ee uu Islaamku ku baahinayo hantida afraadda ee uu ugu diidayo in ay meel iskugu urunto. Waana qaabab qasab ah. Waxaa kale oo jira qaabab ikhtiyaari ah oo arrinkooda loo daayey afraadda. Sida sadaqada, Ilaahay dartii oo wax loo bixiyo. Wuxuuna Islaamku ku dedaalay sidii ay afraaddu ula iman lahaayeen qaababkaasi ikhtiyaariga ah. Waanu ugu baaqay. Wuxuuna ugu ballan qaaday in si fiican looga abaalmariyo, oo loo laban laabo ajarka. Wuxuu Islaamku ku baaqayaa in sadaqada loo bixiyo si cad iyo si hoos-ahaaneedba.

« **Haddii aad sadaqada bixisaan waa nimco. Haddii aad qarisaanna oo aad siisaan fuqarada way idiin khayr badantahay** ». Al-Baqara 271.

« **Kuwa wax sadaqadaysanaya rag iyo haweenba ee si san Ilaahay wax u daynsanaaya. Waa loo laban laabi** ». Al-Xadiid: 18

Wuxuu Islaamku ugu baaqayaa muslimiinta in ay wax bixiyaan. Wuxuuna u caddaynayaa in aanay



gaadhayn raalli ahaanshaha Ilaahay ilaa ay bixiyaan waxa ay jeceyihiin. Waxa khayr ah ee ay bixiyaana waa mid uu Ilaahay siin doono oo uu uga abaalmarin doono si weyn.

« **Ma gaadhaysaan wanaagga ilaa aad bixisaan waxa aad jeceshihiin** ». Aal Cimraan 92.

« **Waxaad bixisaanna waa kii idiin soo celiya** ». Saba 39.

« **Kuwa rumeeyey ee idinka mid ah ee bixiyey waxay leeyihiin ajar weyn** ». Al-Xadiid 7.

« **Wixii aad Ilaahay dartii u bixisaan waa laydiinka abaalmarin** ». Al Anfaal 60.

Sidaasi ayuu Islaamku u mamnuucayaa in ay hantidu meel iskugu ururuto. Inta uu ka soo qaado gacan ayuu gacmo badan faraha u gelinayaa. Wuxuuna dawladda siinayaa xaq ay u leedahay in ay ka jarto hantida afraadda wixii hagaajinaya danta bulshada ee sare u soo qaadaya heerka nolosha Fuqarada iyo kuwa saboolka ah.

Wuxuuna ka horjoogsnayaa kuwa maalqabeenka ah dheregga xad dhaafka ah ee fasahaadinaya afraadda iyo kooxaha. Wuxuuna maalkii ka dhigayaa mid ay u simanyihiin saboolkii iyo maalqabeenkii, ee kama dhigayo mid gacanta maalqabeenka oo keliya ku jirta.

« **Si aanay u noqon dawlad maal qaabeenka dhexdiisa ah** ». Al-Xashir 7.

Waxaa taasi innooga cad in siyaasadda Islaamka ee maalku ay ku qotonto mabaadiida soo socota.
A) Maalku inuu yahay mid uu Ilaahay iska leeyahay. Dadkuna ay yihiin qaar uga wakiil ah.

B) Haddii qofka maalka hayaa uu xaq u leeyahay. Kuwa kalena sidaasi oo kale ayey xuquuq ugu leeyihiin. Taasi oo ay qasab ku tahay in kaasi maalka hayaa ka bixiyo ha jeclaado ama ha necbaystee.

Waxaana muuqada dadka kale ay in go'an tahay oo aanay dhaafi karin in go'an

Waxay dawladuhu xaq u leeyihiin in ay maalkaasi ka qaataan wixii hagaajinaya danta bulshada mar allaale markii loo baahdo. Taasi oon loo yeelin wax xad ah oo go'an Taasi oon hadba ku xidhan sida ay danta guud tahay.

C) Islaamku wuxuu ugu baaqaya kuwa hantida gacanta ku haya in ay ugu bixiyaan si san dhammaan wejiyada kala duwan ee khayrka iyo faaiidada. Wuxuuna taasi ugu diyaarinayaa ajarka ugu weyn.

D) Wuxuu maalku wareegayaa kolba isagoo wata xuquuqdaasi oo idil. Isagoo ka wareegaya ka haya ee u wareegaya gacan kale si loo maamulo. Ama geliya gacanta kuwii dhaxlay.

## XI
## WANAAGGA IYO NAXARIISTA

Intaasi oo idil ka dib wuxuu bulshada ku qoto-



minayaa wanaag iyo khayr, naxariis iyo kalgacayl. Wuxuuna ku waajibinyaa dhammaan ka xooggan, ka tabarta yar, ka maalqabeenka ah, ka saboolka ah, ka sokeeyaha ah iyo ka shisheeyaha ahba in uu mid waliba wanaajiyo walaalkii, u naxariis leeyahay oo uu kalgacayl u hayo. Iyo inuu mid waliba la jeclaado walaalkii waxa u naftiisa la jecelyahay. Mid walibana uu ka shaqeeyo khayrka walaalkiis. Intii karaankiisa ahna uu naftiisa u huro walaalkiis. Midwalba oo ka mid ahina uu u baarri noqdo wallidkiisa, whelkiisa oo uu xidhiidiyo qaraabadiisa.

**« Waa in ay idinka mid noqoto ummad ku baaqaysa khayrka. »**. Al-Cimraan-104.

**« Isku gargaara wanaagga »**. Al-Maaida-2

**« Khayr malaha inbadan oo ay magansanayaan mid faray sadaqad, ama wanaag oo kala hagaajiyey »**. Al-Nisaa-114.

**« Dhexdoodana isku naxariisanaya »**. Al-Fatax-29.

**« Kuwa naftooda isku huraya »**. Al-Xashar.

Wuxuuna Rasuulku yiri « Kuwa naxariista waxaa u naxariista Ilaahay ».

Wuxuuna yiri: « Baarrinimadu waa akhlaaq wanaag denbiguna waa wixii laab taada cidhiidhaya ee aad necbaysatid in ay dadku arkaan ».

Wuxuuna yiri: « Ilaaha naftaydu gacantiisa ku jirto ayaan ku dhaartee midkiinna rumayn maayo ilaa

uu deriskiisa la jeclaado waxa uu naftiisa la jecelyahay ».

Wuxuuna yiri: « Raalli ahaanshaha Ilaahay waxay ku jirtaa raalli ahaanshaha waalidka. Cadhada Ilaahayna waxay ku jirtaa cadhada waalidka.

Wuxuuna yiri: « Kii jecel in loo fidiyo risiqa ha xidhiidhiyo qaraabada ».

Wuxuuna yiri: « Uma bannaana qofka muslinka ah in uu walaalkii ka maqnaado in ka badan cisho. Ay kulmaan oo kaasina diido ka kalena diido. Waxaana khayr badan koogii ku hor bilaaba Salaanta ».

Wuxuuna yiri: « Kii tilmaama khayr, isna wuxuu leeyahay in leeg oo khayr ah ». Wuxuuna yiri « Ka banneeya sunne fiican oo Islaamka ah wuxuu leeyahay ajarkeeda iyo ajarka kii ku camal fala ».

## XII
## WADA TASHIGA

Wuxuu Islaamku ka dhigayaa nidaamka xukunka ee bulshada mid wadatashi ah. Si ay bulshada ugu suurtogasho inay doorato madaxdeeda ku habboon in ay bulshada u qabato talada Ilaahay, uguna suurtogasho in ay caasido mar allaale marka ay ka soo bixi waayaan waajibkeeda. Ama ay ka xadgudbaan jidka toosan. Sidaasi ayaa habka wadatashigu ka dhigayaa mid ku kala dhex jira madaxda iyo amuuraha bulshada. Waayo wuxuu ka dhigayaa bulshada mid dabagalaysa



oo fiirinaysa madaxdeeda ay dooratay. Wuxuuna Islaamku la yimid habka wadatashiga oo uu dabbaqay tiiyoo aanay aqoonin dawladaha reer galbeedka ahi. Wuxuuna ka horeeyay ugu yaraan kow iyo toban qarni. Taasina waxaa lagu waajibiyay:

« **Arrinkooduna uu yahay mid ay dhexdooda ka ka wadatashadaan** ». Al-Shuuraa-38.

« **Kala tasho arrinka** ». Al-Cimraan-159.

## DHIGAALLO-BULSHEEDKEENNA MAANTA

Waxaynu kor ku soo aragnay qaar ka mid ah saldhigyada uu Islaamku ku qotominayo bulshada Laakiin saldhigyadaasi Islaamka ahi kuma qotomaan maanta bulshooyinka Islaamka. Tiiyoo ay ugu wacantahay Islaamkii oo ay caddileen hawooyinkii madaxda, iyo qawaaniintooda ay ka soo maanguursadeen dalal haysan diinta Islaamka. Qawaaniintaasi oo u jeedisay muslimiintii jiho aan Islaam ahayn. Kana leexisay Islaamkii ilaa ay meel madhan iska taageen Islaamkii.

Madaxdeenna, duqaydeenna iyo ragga inoo taliyaa may noqonin dad ah walaalo midaysan oo isgarabsanaya sida uu Islaamku dhigayo. Laakiin waxay yihiin xisbiyo iyo qolo qolo. Waxayna ku noolyihiin si kala tafaraaruq ah oo ay is colaadinayaan. Qaarkoodbana qaar ayey u shirqoolayaan. Waxayna isdhaafsanayaan cay iyo yasid. Halkii ay ammaani

ka dhaxayn lahayd. Mid walbana wuxuu isku dayayaa sidii uu u xaqiri lahaa ka kale. Mid walbana wuxuu isku dayayaa sidii uu hoos ugu dhigi lahaa sharaftida walaalkiis, si uu isagu sare ugu soo kaco, ama si uu fursadda ugu baneeyo. Waxayna ku dhegeen caadooyinkii uu diidanaa Islaamku. Dhammaantoodna way tartameen ilaa ay sharaftoodii jarjareen. Gooyeen xidhiidkii tolmimo, oo ay dumiyeen naftoodii. Facii ka danbeeyna ugu tageen foolxumo aan la arag oon la maqal.

Caddaaladii uu Islaamku ku qaybinaya miisaan quman. Ee uu u sinayey ka dhow iyo ka fog, nacabkii iyo saaxiibkii, caddaaladdaasi waxay noqotay mid ka guurtay dalalkii Islaamka. Maanta waxaynu caddaaladda ka garanaynaa uun magaceeda. Magacaasina waa mid colaadi uun ku dheehantahay. Taasi oo qolo waliba ay doonayso in ay qaadato xubnaha ugu farabadan. Xataa haddii ay tiradoodu tahay mid aad u yar. Haddii qolo xukunka laga qaadana, waxay qoladii ka danbaysay la imanaysaa mid ka sii daran tii hore. Haddii wax laga weydiiyana wuxuu cudurdaar ka dhigtaa kuwii hore. Sidaasi ayey dulmi ugu badlayaan dulmi.

Waxaa fasahaadday akhlaaqdeenii. Waxaana ka daciifay nafteenna iimaankeenii. Waxaynuna aragnaa madaxdeenii oo tusaale u ah dadweynaha, laguna dayaanayey, oo maalin walba weji hor leh la imanaya. Hadbana xidhayaya dharka xaaladdaasi. Maalin waxay taageerayaan xukunka dadka tirada yar. Maalinta kalena waxay ku baaqayaan xukun Distoornimo. Markaasi ka dibna kuwan iyo keerba way burinayaan.



Iyagoo dabarooraya qof aan haysan dad taageraya iyo xisbi dhisaya toona. Waxayna sidaasi oo idil u yeelayaan iyagoon la socon oon waafaqayn caqiidada ay haystaan. Aan u hoggaansamaynna mababaadiida ay dabbaqayaan. Ee ay daba yaacayaan hawooyinka iyo shahawaadka. Dabarooraya dano gaarahaaneed, kana cabsanya in wax la diido.

Taasi oo ah in ay naftooda ku xidhayaan madax kasta maadaama ay awood leeyihiin. Haddii ay arkaan madaxdaasi oo meesha ka sii socotana way ka leexdaan saaxiibkoodii oo ay sharaftiisa ku dheelaan, kuna jeesjeesaan. Kaasi oo ay hore inbadan caabudeen oo si ay raalli geliyaan dhaafsiisan jireen sharafta baniiaadmiga.

Sidaasi awgeed ayey had iyo jeeraale madaxdeenu u helaan dad taageera si kasta oo ay u gedgediyaan danahooda oo ay hadba weji ugu yeelaan. Waxaana u suurotgelaya in ay had iyo jeeraale hesho taagaarayaal aad u farabadan.

Waxayna dadweynihii kaga daydeen madaxdoodii islaweynaantii iyo nifaaqii iyo akhlaaq xumadii. Waxaana cammimay nifaaqii. Waxaa soo ifbaxay istuskii. Waxaana luntay akhlaaqdii iyo sharaftii. Dadweynihiina kuma hadhin wax ay ku sii hadhsantahay in yar oo damiir iyo akhlaaq ahi, inyar mooyaane.

Waxaana mid laga xanuunsado ah in inbadan oo ah dhallintii ummadda iyo faceedii cusbaa ay u arkayaan in dadkii waaweynaa ee sharafta lahaa ee ku dheggan akhlaaq wanaaggu ay yihiin qaar ku nool casriyadii laga tegay. Kuwaasi oo rumaysan in ilbaxnimada iyo reer magaalnimadu ay tahay tiiyoo wax kasta laysku xalaashado. Lagana tago akhlaaq wanaaggii, naxariistii iyo baniiaadminimadii.

In badan oo dhallinta maanta ahi waa qaar naftoodu madhantahay, qalbigoodu madhanyahay, maskaxdooduna madhantahay. Malaha Cilmi iyo camal toona. Mana laha diin iyo iimaan toona. Waxa keliya ee ay ku roonyihiin waa iyagoo si fiican u yaqaan isqurxinta. Iyo dhar fiican oo ay u dooraan kuwa wax jilaya. Hawshooda keliyina waxay noqotay uun in ay daba rooraan shahawaadka. In badan oo ka mid ahina waxay u gacan galeen shuuciyaddii. Waayo barbaarintoodii dugsiyada iyo noloshoodii guriga midna kumay jirin wax iska hortaagaya ra'yadaasi wax duminaya. Kumanay jirin wax ka horjoogsanaya fasahaadka.

Maantana dadku wax kasta way iska xalaashanayaan maadaama uu gaadhsiinayo dantooda. Tuugada, laluushka, sharaf iibinta, ka hortegidda danta guud

laluushka, sharaf iibinta, ka hortegidda danta guud
qarinta khiyaanada iyo fasaadku, joojinta hadalka xaqa ahi, intaasi oo idili way bannaantahay maadaama



lagu helayo hanti, magac iyo xukunba.

Qof kastaana wuxuu xasidayaa qofka kale. Doonayaana waxa gacantiisa ku jira. Ka wasiirku xigeenka ahi wuxuu xaasidayaa wasiirka oo uu doonayaa in uu meeshiisa galo. Beeralayda yari wuxuu xaasidaya beeralayda weyn. Shaqaaluhu wuxuu xaasidayaa ka maalqabeenka. Mid walibana wuxuu isla doonayaa in uu yeesho wax uu hanti iyo nimco uu leeyahay kaasi la xaasidayaa. Umana arko in ay wax dhibaato ahi ku jirto in uu yeesho waxaasi uu rajeynayaa isagoon u soo marin dhib iyo jid sharciyeysan toona.

Masar waxay leedahay maalqabeen dhereg dhaafay iyo fuqaro boggoodu isku dhegay. Laakiin kuwaasi dherg dhaafay ma oggola in ay fuqaradaasi iyo masaakiintaasi siiyaan xuquuqdooda badhkood. Xaquuqdaasi ay u waajibinayso diinti, waajibinaysana dabeecadda ijtimaaciga ahi. Qawaaniintiina way u taag heli weyday in ay wax ka qabato. Waayo ma suurtogelayso lamana fulin karo ilaa ay raalli ka noqdaan sidaasi maalqabeenka ahi.

Waxay Masar leedahay maalqabeen urursanaya maalka, lehna mashaariic aad y waaweyn. Kuwaasoo ka faaiidaysanaya shaqaale halgamaya iyagoo siinaya mushahar aad u yar oon goyin karin wax afka la geliyo iyo dher aan asturi karin cawrada. Masarna ma laha qaanuun ku waajibinaya kuwa maalqabeenka ah in ay shaqaaluhu kala qaataan faaiidadooda, sida uu dhigayo Islaamku oo kale. Sidaasi ayuu ka maal-

qabeenka ahi ugu urursanayaa khasnadihiisa dahab iyo dheemman. Ka shaqaaluhuna wuxuu ku sii biirsanayaa qalbigiisa mar walba cadho iyo xiqdi maalin walba ku sii kordhaya.

Nolosheenna ijtimaaciga ahi waxay ku qotontaa faaiido doon. Iyadoon lahayn wax xadhig ah haba yaraatee. Sidaasi awgeed aynuuna ka tabartayari u qadarinayn ka xooggan. Ka xoogganina ugu naxariisanayan ka tabarta yar. Ka maalqabeenka ahina waxba u siinayn ka saboolka ah. Riciyadduna aanay ixtiraamayn qoysaskii. Waxaana halkaasi ku go'ay xidhiidhkii ka dhexeeyay ninka iyo Ooridiisa, wiilka iyo aabihii, inanka iyo walaalkii. Taasina waa mid qasab ah in ay dhacdo maadaama ay nolosheennu ku qotonto faaiido doon iyo eex.

Taladii Masar way qudhuntay. Waanay caddilantay in ay jiritaankeedii micnaba yeelan weyday, in ay fasahaad uun sii kordhiso mooyaane. Wax kasta oo maanta Masar yaallaana waa qaar la iibsado. Kursiyada xukunku lacag ayey ku fadhiyaan. Ku sii waaritaankooduna lacag ayey ku fadhiyaan. Golaha sare oo laysku soo sharraxaana lacag ayey ku fadhidaa. Xilalkuna lacag kala geddisan ayey ku fadhiyaan. Isku gargaarka hawsha khayrka iyo sharkuna waa mid lacag ku fadhiya. Isku yeelidda muuqaalka xooggaanaanta iyo sharaftu waa mid lacag ku fadhida. Mana jiro arladani qof u qabanaya hawl si xaq ah isagoon helin lacag. Waxaa hoogay kuwa xaq wax u



leh een lacag ka bixin karin. Waxaana hoogay kuwa sharafta leh ee diidan in ay lacag bixiyaan.

Waxaa fasahaaday oo xumaaday taladii Masar. Ilaa ay Masar oo idil dhinac kasta fasahaadkii uga baxay. Waxaana, Masar soo maray muddo sannad keliya ah fadeexado uu ka khajilayo qof kasta oo Masari ahi, ilaa maalinta Qiyaamaha. Tiiyoo ay maalin keliya isugu soo uruurtay safxadaha Jaraaiidka sagaal denbi oo fadeexad weyn ah.

Tiiyoo fadeexad kasta oo kuwaasi la mid ahi ay sumcadda kharribayso. Laakiin fadeexadaha qaarkood ayaa kharribay sumcaddii Masar. Waxayna sugeen in dadka maamulka iyo denbi baarista hayaa ay ka lumeen iimaankoodii, khiyaameenna ammaanadoo dii. Lana yimaadeen hawlo aan cidna loogu denbi dhaafi karin.

Qofka la tuhmo waa mid ay bulshadu gacanta u gelisay ragga nabadgelyada iyo denbi baarista. Waxayna kuwaasi xaq u leeyihiin in ay wax weydiiyaan oo uu uga jawaabo. Laakiin xaq uma laha in ay u cagajugleeyaan, ama ay wax ku qasbaan, amay cadaabaan. Umana xaq laha in ay si xun u isticmaalaan xuquuqda ay bulshadu u xilsaartay. Haddii aanay sidaasi yeelin waxaa is dhalan rogay dhigaaladii. Waxayna caddaaladii ku luntay gacmaha kuwii oogayey.

Waa mid loo dulqaadan karo haddii loo cagajugleeyo qof, ama wax lagu qasbo ama la cadaabo, ama la xumeeyo, haddii ay arrintu tahay mid ferdi ah.

Kama madhnaanayso ragga denbiga baara in laga dhex helo qof dabeecad ahaan u denbiile ah, ama ay tabaryaridiisu ka xoog roonaato. Laakiin ta aan marnaba loo dulqaadan karin waa marka ay dawladda lafahaanteedu, ragga booliska iyo nabad sugiddu ay u tashadaan sidii loo xumayn lahaa kuwa la tuhmay, ee loogu cagajuglayn lahaa, looguna, qasbi lahaa iygoo loo geysanayo cadaab foolxun, oo si daran loo waxyeelaynayo.

Dadka edaysanayaasha la tuhmay oo ay cadaabaan ragga boolisku tiiyoo ay arkayaan, maqlayaanna madaxda dawladdu iyo maamulayaashu iyo ragga denbiyada baarayaa oo weliba lagu sii celcelinayo caddibaaddaasi saacadba saacadda ka denbaysa, iyo maalinba maalinta ka denbaysa, laguna celcalinayo todobaadyo iyo bilo, taasi micnaheedu waa in aanay, Masar jirin wax caddaalad ahi. Jirinaa wax nidaam ahi, Ee ay meesha isugu yimaadeen uun dugaag wax cunaya. Dugaaggaasi oo taladii gacanta ku haya. Sidaana miisaankii dadka dhexdooda caddaalad loogu samayn lahaa.

Fadeexaddaasi waxay Masar u geysatay dhaawac aanay ka soo waaqsan karin. Waxaana qof kasta oo reer Masar ah la gudboon in uu sare u kaco oo aanu salka dhulka dhigin ilaa la xaqiijiyo fadeexaddaasi weyn. Iyo ilaa uu ka abaal mariyo eedaysane kasta, iyo khaain kasta denbigii uu geystay. Laga abaal mariyo wixii uu ka qayb qaatay iyo wixii uu galabsaday.



Waxaa Masar dhex yaalla fasahaad looga cabsiqabo in uu dumiyo. Waxaana y aalla leexsanaan looga cabsi qabo inay tirtirto. Waxaana yaalla dulmi aan naxariis lahayn iyo caddaalad aan wax tarayn. Iyo hawo wax kala soocaysa, iyo jihooyin wax kala googoynaya.

Masar waxaa jira colaad dhex taalla fuqaradii iyo maalqabeenkii shaqaalihii iyo kuwii loo shaqaynayey. Colaad dhex taalla kuwii tabarta yaraa iyo kuwii xoogganaa, waalidkii iyo carruurtoodii, madaxdii iyo dadkii loo talinayey.

Waxay ummaaddi Masar noqotay meel ay iskugu soo urureen wixii kharribnaa oo idili. Aanay jirinna caddaalad iyo nidaam tooni. Dadka dhexdiisana aanay jirin isgargaarsi, wanaag iyo naxariisi.

Masar waxay ka sii laalaadaa jar. Waxa keliya ee jarkaasi ka celin karaana waa iyadoo ku soo noqota Islaamkii. Waayo isaga ayaa kafiil u ah in uu soo nooleeyo nafaha, nadiifiyo qalbiga, hagaajiyana dhigaalada, mideeyo xoogga. Isaga ayaana kafiil u ah in uu ummadda u hoggaamiyo wanaag, nabadgelyo iyo iyo nabadguud.

## MAXAA KU KALA JIRA MUSLIMIINTA IYO ISLAAMKA

Waxaynu kor ku soo aragnay sida aynu ugu nool nahay wax aan islahayn. Iyo sida aynu u fasahaadnay

ee ay mushkilado inoo kharribeen. Qof kasta oo Muslin ahina wuu ogyahay in daawada keliyi ay tahay Islaamka. Kaasi oo daaweyn kara waxyaalaha aynu ka cabnnaynno ee fasahaad ahi, iyo waxyaalaha ina soo foodsaaraya ee mushkilada ah. Islaamkaasi oo ay ku jiraan waxa wada raalli gelinaya doonisteenna. Kulminayna jihooyinka oo idil. Laakiin hadana innakoo taasi og, oo aynu doonaynno in la dabbaqo axkaamta Islaamka, ayey hadana wax ku kala dhex jiraan innaka iyo Islaamka aan doonaynno. Kaasi oo aynu la doonaynno xukunka iyo siyaasadda iyo wixii kale. Mar kastana aynu Ilaahay ka rajeynaynno in aan dartii u dhimanno.

Haddii hadaba ay muslimiintu ahaan lahaayeen qaar tiradooda lagaga badanyahay dalalka Islaamka gudahooda, suurtogal ayaabay ahaan lahayd in la kala dhex galo iyaga iyo Islaamka. Laakiin tiiyoo ay Muslimiintu yihiin dadka ku nool dalalka Islaamka, oo ay dhammaantoodna sheeganayaan Islaam, oo ay weliba dawladaha Islaamka badidoodu sheeganayaan in ay diintooda rasmiga ahi tahay Islaam, ayaa hadaba wax lala yaabo ah in la kala dhex galo muslimiintii iyo axkaamtii Islaamka, dal ku andaccoan ya Dimogqraadiyad, lehna distoor sheegaya in xukunka iyo dhigaalada qaanuunka ay iska leeyihiin dadka badidiisu.

Waanay sahlantahay in aan garanno waxa innagu kala dhex jira innaka iyo Islaamka, haddii aan garanno



kuwa iinagu kala dhex jira laftooda ee inna kala jaraya. Waxa keliya ee innaka iyo Islaamka innagu kala dhex jira waa Gumeystaha uun. Waxaana innaga goynaya Islaamka dawladaha Islaamka ah ee ka taagan dalalka Islaamka.

## I
## GUMEYSTAHA

## CADAAWADDA UU GUMEYSTUHU U HAYO ISLAAMKA WAA MID ISKU DABIICI AH

Cadowga ugu horreeya ee uu Islaamku leeyahay waa gumeysiga. Waayo isaga ayaa diyaariyay in la buriyo axkaamtiisa oo la beddelo qawaaniintiisa u degsan. Waana cadowtinimo iska dabiici ah. Waayo gumeysigu lugihiisa ma soo dhigi karo dal lagu dabbaqayo axkaamta Islaamka.

Waayo Islaamku ma oggola in uu gumeysigu wasakheeyo dalalka Islaamka. Umana oggola in ay dalka Islaamka sare uga kacdo wax aan ahayn erayga Islaamka.

Islaamkuna wuu u diidayaa qofka muslinka ah in uu is hoos dhigo qof aan muslin ahayn. Wuxuuna ku waajibinayaa muslimiinta in ay la jihaadaan gumeysiga ku soo duulay, oo ay la diriraan ilaa ay ka saarayaan dalka Islaamka.

Islaamku wuxuu qofka muslinka ah u bannaynaya

dhiigga ka wax gumeysanaya iyo maalkiisa. Waayo gumeystuhu waa mid soo xadgudbay oo dagaalsan. Sidaasi ayuu dhiig kasta oo ay muslimiintu ka daadiyaan gumeystuhu uu u noqonayaa dhiig bannaan. Wax kasta oo ay ka qaataan maalkoodana waa maal u bannaan. Waxaasi oo idilna waxay noqonayaan mid ay Ilaahay ugu sii dhawaanayaan haddii ay la yimaadaan niyad khaalis ah.

Islaamku wuxuu u diidayaa qofka muslinka ah in uu dabagalo gumeystaha oo uu jeclaado. Wuxuuna ku waajibinayaa in uu diido oo uu nacbaysto. Sidee ayuu hadaba gumeystuhu ula noolaan karaa dad aan dabagelayn, aan jeclayn, diidan oo karahsan.

Islaamku wuxuu ku waajibinayaa muslimiinta arlada ku nool oo idil in ay dhammaantood isku bahaystaan ka soo weerara dal Islaam ah. Axkaamta Islaamka oo la oogaana waxay keenaysaa in ay is bahaystaan muslimiintu oo ay noqdaan xisbi keliya oo ka soo horjeeda gumaystaha Gumeystahana uma suurtogeleyso inay iska caabiyaan midow keliya oo ay isku midaystaan dalalka Islaamku.

Islaamku uma oggola muslimiinta in ay heshiisyo la galaan gumeystaha inta uu Islaamku tabar leeyahay. Taasi oo ah in uu dagaal joogta ahi jirayo inta uu gumeysi jiro.

Islaamku wuxuu u bannaynayaa muslimiinta marka ay tabarta yarayihiin in ay la galaan heshiis ku meel gaadh ah oo yar. Si ay isku diyaariyaan oo ay u diyaar garoobaan. Haddii ay ka cabsadaan in la waxyeeleeyo muslimiinta ama ay ka baqdaan khiyaanadda gumeysiga way burinayaan ballankiisa. Waxaynana ku noqonayaan la dagaallankiisa ka dib marka ay u digaan. Axkaamta Islaamku waxay diidantahay in nabad lala noqdo gumeystaha ilaa xilli go'an Waxayna bannaynaysaa in la buriyo heshiiska oo lagu noqdo dagaal mar allaalle marka ay taasi dani u tahay muslimiinta iyo Islaamka.



Islaamku sidoo kale, wuxuu xaaraantimaynayaa cunoqabataynta. Wuxuuna xaaraantimaynayaa kor ku noolaanshaha. Wuxuuna diidayaa Ribada iyo wejiyadeeda kale duwan. Gummeysiguna wax aan intaasi ahayn kuma taagnaan karo. Haddii aanay meesha jirin cunaqabatayn, Ribo, kor ku noolaansho maxaa uga faaiido ah gumeysiga in uu wax gumeysto?

Sababahaasi awgeed, iyo qaar kale oo jira ayuu gumeystuhu ugu dedaalay sidii uu muslimiinta uga dheerayn lahaa axkaamta Islaamka. Dalna ma soo gelin ilaa uu diyaariyo sidii uu uga dheerayn lahaa Islaamka. Dalna kuma sugnaan ilaa uu ka dheereeyo awoodda Islaamka.

## QAABABKA UU GUMEYSTUHU ULA DIRIRO ISLAAMKA

Gumeystuhu wuxuu leeyahay qaabab uu ku kala dhex galo muslimiinta iyo islaamka, oo uu ugaleexiyo

jidka. Waxaa ka mid ah in uu ka leexiyo madaxda muslimiinta ah Islaamkii. Una qurxiyo in ay halkiisa soo geliyaan qawaaniinta degsan. Uguna sheekeeyo in ay qawaaniintaasi gaadhsiinayso ilbaxnimo, xooggaanaan iyo horumar. Tiiyo dhabtu siday tahayna u horseedaysa uun tabaryari, leexsanaan, fasaad iyo burbur. Waxaasi oo idilna waxa uu gumeystuhu uga jeedaa uun in uu iska joojiyo weerarka uu Islaamku ku hayo. Iyo in uu ka jaro muslimiinta gargaaraaha keliya ee ay muslimiintu ka helayaan xooggooda ee ku guubaabinaya in ay iska caabiyaan gumeysiga. Waxaana laga yaaba in ay taasi ka mid tahay wexyaalihii uu uga jeeday Wasiirka Ingiriisku (Galadstone) markii uu isa soo hortaagay golaha guud mudda laga joogo tobonaan sano, isagoo leh. « Lug ay boqortooyada Ingiriisku leedahay kuma waari karto dalalka Islaamka maadaama ay Quraanka haystaan ».

Gumeystuhuna sida uu ugaga faaiidaysanayo madaxda muslimiinta marka uu rabo in uu waxyeeleeyo muslimiinta, ayuu sidaasi oo kale uga faaiidaysanayaa Baadariyaashii fidinayaa diintooda ee arkay in ay adagtahay in laga kaxeeyo qofka muslinka ah. oo laga beddelo diintiisa, si degdeg ah oo toos ah. Markaasi ayey u qorsheeyeen khiddad aad u daran oo muslimiinta lagaga leexinayo diintooda si qunyar qunyar ah oon toos ahayn ee dadban. Haddii ay muslimiintu tallaabo ka leexdaan diintoodana waxaa suurtogal ah in ay ka sii leexdaan tallaabo kale. Siiba haddii



ay leexashadu tahay mid aan toos ahayn. Ilaauu yimaaddo xilli ay muslimiinta oo idili ka leexdaan diintooda. Noqdaana qaar la diriraya diintooda.

Khiddadaasi ay gaaladu dejiyeen waxay ku qotontaa in musulimiinta lagu baro dugsiyadooda in ay diintuna tahay arrin, cilmiguna arrin kale. Diintuna ay colaadiso cilmiga oo ah aasaaska horumarka baaniiaadmiga ee ugu wacan ilbaxnimadaba.

Tusaalaha arrintaasina waxay ku jirtaa taariikhdii kinniisadda Masiixiga. Waxay sidaasi oo kale barayaan muslimiinta in dib u dhacooda ay ugu wacantahay ku dhegganaanta diinta ee ay ku maamulayaan arrimaha adduunyadooda. Sidaasina ayna weligood hore u marayn ilaa ay kala soocaan xukunka iyo diinta oo ay yeeshaan dawlad la mid ah kuwa Yurub.

Sidaasi ayey kuwii fidinayey gaalnimada iyo gumeysigii u raaceen jid kaliya oo ay isku bahaysteen sidii ay meel keliya u abbaari lahaayeen.

Taasina si weyn ayay ugu guuleysteen kuwii gaalnimada fidinayey. Waayo dugsiyadoodii waxaa ka soo baxay in badan oo ah madaxda muslimiinta iyo qorayaalkooda. Kuwaasi oo raacay uun tallaabadii macallimiintoodii. Sumeeyeyana fikraddii muslimiinta. Una jeediyay isla jihadii ay la doonayeen gumeystayaashu iyo kuwa gaalnimada fidinayaa.

Waxay gumeystayaasha iyo gaaladu iibsadaan qalimada muslimiinta qaarkood. Taasi oo ay ku iibsadaan lacag yar si ay ugu weeraraan diinta. Iyo

in ay u yeelaan weji ah in aanay diinta waxba uga shan iyo toban ahayn wixii la xidhiidha arrimaha adduunyada. Iyo in lagaga daydo reer Yurub kala soocidda diinta iyo dawladda. Sidaasi ayuu ku waari karaa gumeysigu oo uu cagaha iskugu taagi karaa mar haddii uu kala dhexgalay muslimiinta iyo diinta.

Waxaana sii caaweiyay gumeystihii iyo gaaladii dawladihii Islaamka oo diidan in diinta lagu barto dugsiyada. Kutubta wax laga barto oo idilna waa qaar laga soo tarjumay Kutubtii reer Yurub. Waxaana hore u maamuli jiray dugsiyada waxbarashada reer Yurubkii gumeystaha iyo gaalada ahaa. Waxayna muslimiintii qunyar qunyar u qaateen dabcigii gaalada iyo gumaystaha. Waxayna dugsiyadii ka soo baxeen iyagoo waxa keliya ee ay garanayaan tahay uun, in diintaasi ayna baranin aanay ku habboonayn arrimaha xukunka iyo siyaasadda. Loona baahanyahay in uu faraha kala baxo arrimaha adduunyada. Noqoto diintuna cilaaqad ka dhexeeya dadka iyo Rabbigooda. Taasi oo markii laga sii farabaxo axkaamta diintaba, ay shacbigu tallaabo ugu sii dhawaanayaan ilbaxnimada iyo horumarka. Wixii ka danbeeyana, muslimiintaasi ayaa qabtay taladii iyo xukunkii iyo wixii la mid ah ee arrimaha dadweynaha. Waxayna noqdeen qaar fulinaya wixii ay macallimiintoodu soo bareen uun. Waxa keliya oo ka leexday uun kii ay duruuftu u saamaxday in uu diinta derso, wax



naqdiyo oo uu isku miisaamo. Markaasi ka dibna gartay in uu ahaa mid u adeegayey gumeystaha oo gacanta ugu jiray gaalada.

## KALA SOOCIDDA DIINTA IYO DAWLADDA

Si weyn ayey u habaabeen markii ay muslimiintu ufahmeen in sababta ay reer Yurub hore ugu mareen ay tahay kala sooციddii diinta iyo dawladda. Waayo diinta Masiixiga ee ay haystaan reer Yurub lamay iman mabaadii iyo axkaam uu ku qotonsado nidaamka xukunku, maamulka, siyaasadda, mucaamaladka iwm. Waxayna diintani timid casrigii dawladdii Roomanka. Dawladdaasi oo gacanta ku dhigtay kuna faafisay dadkii. Waxayna dawladdaasi lahayd qaanuun dhammaystiran. Kaasi oo ahaa qaanuunkii Roomanka ee lagu tirinayey aasaaskii iyo halkii ay ka so unkameen qawaaniinta Yurub ee Casrigani oo idili. Sidaasi ayaynа diintu u lahayn meel sharciyenyah. Diinta masiixuguna lamay iman sharciyeyn gaar ah. Laakiin dawladdii gacanta ku dhigtay diinta cusub ee fidisay ayey la gudboonayd in ay qaanuunka ku darto qodobada la soconaya horumarka. Waxaana xigay xilli ay baadariyadii Kinniisaddu ay si foolxun u isticmaaleen awoodoodii iyo kalsoonidii dadweynaha. Kuwaasi oo iska dabagalay hawooyinkoodii. Daba roorayna wixii ay jeclaysteen oo idil. Waxaasi oo idilna u geliyay

huga diinta. Si sahlanna uga guulaystaan kuwa awoodooda kula loolamaya ee ah siyaasiyiin iyo mufakiriin. Laakiin raggii kale ee la tartamayey ayey guushu raacday. Waxayna dirirtii ku dhammaatay in raggii diinta laga casilo xukunkii iyo taladii.

Tartankaasi dhex maray raggii diinta iyo raggii siyaasadda muu ahayn mid ku lug leh diin iyo siyaasad toona. Ee wuxuu ahaa uun talo iyo awood raadin. Dirirtii Yurub ka dhacdayna may ahayn dirir diinta iyo dawladda ah. Ee waxay ahayd dirir dhexmartay hawada ragga diinta iyo hawada ragga siyaasadda. Dagaal dhexmaray dad sheeganaya magaca diinta iyo dad sheeganaya magaca dadweynaha. Waxayna intaasi oo idili ku dhammaatay in la kala sooco raggii diintii iyo awooddii dawladda. Taasi oo la yiraa kala soocidii diinta iyo dawladda. Waxaana taasi innooga marag kacaya in qawaaniintii Yurub ay weli sideedii tahay. Oo aanay waxba lug ku yeelan kala soocii diinta iyo dawladdu. Waxaana laga saar y uun qodobada qaarkood oo casriyadii dhexe la dejiyay markii ay Kinniisaddu xukunkii xayuubsatay. Welina qawaaniinta Yurub ee Casrigani way ka geddisantahay ujeeddo ahaan, sidii uu ahaa qaanuunkii Roomanka ee casriyadii Masiixiga ee koowaad. Marka laga reebo heerka uu horumarka dabiiciga ahi u keenay caadooyinkii iyo dhaqanadii.

Wixii xigay kala soocii diinta iyo dawladda waxay ku egyihiin uun laba natiijo:



*Ta kowaad:* Raggii Kinniisadda oo loo diiday in ay yeeshaan awood adduunyo si ay ugu ilaashadaan awoododa diineed. Waayo waxay u arkayeen in looga baahanyahay oogidda diinta in ay awood ku yeeshaan xukunka si ay ugu suurotgasho gudashada waajibkooda.

*Ta labaad:* Ku dhawaaqidda xornimo diineed. Waxay ragga diintu ku qasbi jireen dadka in ay qaataan caqiido gaar ah. Markii awoodoodii la waayey ayey dadkii iska rumeeyeen mid walba wixii uu doono.

Labadaasi natiijo ee dhacay ma laha kala soocid dhab ah ee diinta iyo dawladda. Waayo haddii ay dawladdu oogto diinta kuma qasab aha in ay ragga diintu yeeshaan awood u gaar ah. Kuma qasbayana in ay dadku qaataan caqiido go'an. Tusaalaha ugu fiican ee kaasina waa Islaamka. Islaamku wuxuu waajibinayaa in ay dawladdu ku qotonto asaaska diinta Islaamka. Wuxuuna waajibinayaa in xukunka, siyaasadda, maamulka, sharciyenta iyo wixii lug uunn ku leh nolosha dadweynaha ee ka soo unkamay diinta Islaamka ee ku qotoma. Tiiyoo ay taasi jirto, Islaamku ma siinayo culimada Islaamka iyo ragga diinta ku xeeldheer wax awood ah. Kamana soocayo dhinac walba marka laga eego fardiga caadiga ah. Waxaana intaasi sii dheer in uu Islaamku aad u ilaalinayo xornimada diinta. Wuxuuna xaaraantimaynayaa in qof lagu qasbo haysashada caqiidadiisa, ama in lagu qasbo diin gaar ah.

« **Diintu qasab maaha** ». Al-Baqara-256.

Wuxuuna yiri Rasuulku - N.N.E.K.H.A - « Waxaa nala faray in aan u dayno wixii ay diin ka dhiganayaan ».

## MAAHA IN DALALKA ISLAAMKA LAGU QIYAASO YURUB

Haddii ay sidaasi ahayd xaqiiqda dhabta ah ee jirtay Yurub, dalalka Islaamku si weyn ayey uga geddisanyihiin Yurub. Waayo waxay haystaan diinta la timid qodobbo cad, oo ay waajib tahay in dhinac kasta oo nolosha kamid laga raaco. Qodobadaasina waxay noqonayaan shariicad dhama ystiran oo bisil. Taasi oo ah shariicada Islaamka. Waxayna shariicadaasi u xukumaysay dalalkaasi wejigii ugu fiicnaa ugu yaraan saddex iyo toban qarni. Hadaba haddii diinta Islaamka laga sooco diinta, tiiyoo ay dawladdu tahay qayb ka mid ah diinta, lana tirtiro sharicaddii Islaamka ee ay muslimmintu doonayaan in la dabbaqo, lana xalaalaysto qawaaniinta la dejiyey oo meesheedii la soo gashado, waxay taasi tahay uun diintii oo laga baxay ama laga saaray quluubtii muslimiinta.

Mana habboona in dalalka Islaamka lagala mid dhigo dalalka Yurub. Waayo diinta Islaamku waxay la timid shariicad dhammaystiran oo ay waajib tahay dabbaqaadeedu. Diintaa masiixiguna waxba taasi lamay iman. Diinta Islaamkuna waxay ka dhigaysaa dawladda qayb ka mid ah diintii. Diinta masiixiguna



sidaasi oo kale maaha. Kinniisadda oo laga sooco dawladduna ma keenayso in la caddilo diintii masixiga. Kumana waajibinayso masiixiyiinta in ay qaataan qaawaaniin aan ahayn qawaaniintooda. Laakiin markii diintii iyo dawladdii lagu kala soocay dalalkii Islaamkii, waxay taasi keentay in uu caddilmo Islaamkii. Muslimiintiina waxaa qasab ku noqday in ay qaataan qawaaniin ka baxsan axkaamta Islaamka. Dalalka Islaamkuna malaha awood diineed iyo awood dawladeed oo ku diriraya xukunka iyo talada sida Yurub oo kale. Ee waxay dalalku Islaamku leeyihiin awood keliya oo ay gacanteeda ku soo ururayaan arrimaha adduunyada iyo diintu. Waxayna dawladdu ku qotonsanaysaa aasaaska Islaamka ee isku dhex daraya diinta iyo dawladda. Kana dhigaydawladdii diin, diintiina dawlad.

## DIINTU DIB UMA DHIGAYSO DADWEYNAHA

Ta ay ku andacoonayaan gumeysta yaasha iyo gaaladu ee ah in ay diintu tahay ta dib u dhigtay dadweynaha, waxaa burinaya in ay gumeystayaasha dhammaantood ay dalalkooda ku haystaan diinta. Dalalka gumeysigana ma jiro dal keliya oo iska tuuray diinta. Waxaa kale oo taasi beeniinaya in dalalka Yurub ee gumeystaha ahi, iyo dalalka Maraykanka ee kor ku noolaanshaha ahi, ay sannadukasta ku bixiyaan

boqolaal malyuun oo gini ku faafinta diinta Masiixiga ay dalalka Islaamka. Haddii ay diintu tahay ta dib u dhigaysa dadweynaha, sida ay ku andacoonayaan, waxay ka tirtiri lahaayeen dalalkooda si ay u dhammaystiraan horukaca iyo horumarka. Kumay bixiyeen fidinta diinta maal farabadan oo ku habboonaa in ay waxyeelo kale oo faaiido leh ku bixiyaan.

Haddii ay diin kale oo diimaha ka mid ah ay ku jirto wax dib u dhac keenaya, diintani kuma jiraan wax aan ahayn horumar iyo horukac. Waxay ku waajibinaysaa qofka muslinka ah in uu la yimaaddo sababaha keenaya xoogga, sharafta, horukaca iyo madaxnimada. Wuxuuna ku waajibinayaa qofka muslinka ah in uu shaqeeyo ee aanu gacmaha laaban. Wuxuuna farayaa khayrka, wanaagga, isgargaarka, iyo isku naxariisashada. Wuxuuna bulshada ku qotominayaa aasaaska sinnaanshaha buuxa iyo walaalnimada is caawinaysa, iyo caddalad buuxda. Wuxuuna dadka ugu baaqayaa in uu iska xoreeyo baqaha, jahliga, tabaryarida faqriga. Wuxuuna diidanyahay isasarraynsiinta, eexda, cunoqabataynta, korku noolaanshaha, xumaanta iyo duldulmiga. Haddii loo dabbiqi lahaa Islaamku siduu yahay, wuxuu caalamka oo idili ka heli lahaa Islaamka wax xallila mashaakilkiisa, mideeya hababkiisa, kulmiga eraygiisa, kana daafaca wixii uu ka cabanayo ee dhib ah.



## KU NOQOSHADA GUMEYSIGA

Gumeystuhu ka dib isagoo ilaa heer weyn ka gaadhay hadafkii uu ka lahaa dalalka Islaamka, ayuu hadana si weyn u rumeysanyahay in aanay wax nolol ahi ugu sugnayn nolosha Islaamka gudaheeda. Awoodna aanu ku lahayn awoodda Islaamka. Sidaasi awgeed ayuu si weyn uga cabsanayaa Islaamka. Taasi oo werweriyo walaac gelinaysa marka uu arko jimciyad Islaam ah oo yar oo abuurantay. Walaacaasi oo kaga xooggan xisbi siyaasadeed oo weyn oo ku kacsan. Waayo gumeystuhu wuxuu si weyn u ogyahay in ay xisbiyada doonayaan dano gaarahaaneed oo ay ku jiraan gacan gaar ahaaneed. Laakiin muslinka dhabta ahi wuxuu doonayaa shahiidnimo. Taasi oo ku jirta in lala diriro gumeystaha.

Kadib markii uu baraarugay wacyigii Islaamka ee dalalka Islaamku, muslimiintiina ay garteen sida uu gumeysigu ugu ciyaarayo, ayey u suurtogashay gumeystaha marar badan in uu ka faadidaysto dawladaha Islaamka, si uu uga adkaado kuwa ku baqaya Islaamka, oo uu jidkiisa uga leexiyo. Laakiin way diideen in ay is dhiibaan. Waxayna u sabreen dagaalkii gumeysiga iyo dulmigii ay dawladaha Islaamku ku hayeen. Waxeyna dagaaladaasi joogtada ah iyo dulmigaasi fooshaxumi u fureen indhihii dadweynaha xaqaaiqdii. Waxayna ogaadeen in uu gumeystuhu

ka cabsanayo Islaamka. Taasi oo keliya ayaa ku filan in ay inbadan oo Muslimiin ahi isku beddelaan qaar ku baaqaya fikradda Islaamka.

## DAGAALKA QADHAADH

Dagaalka dhex socda Islaamka iyo gumeysigu wuxuu maanta marayaa marxaladdii ugu qadhaadhayd. Ilaahay idinkiisana, waxay ku dhammaan, haddii Eebee yidhaa, in uu Islaamku hirgalo oo la jebiyo gumeysiga.

Maanta wuxuu gumeysigu ku jiraa halkii ugu kululayd ka dib markii ay u caddaatay waxa ay shuuciyaddu kula soo socoto. si buuxda u ogyahay in aanay ka takhalusi karin shuuciyadda dalalka Islaamku wax aan ahayn Islaamka.

Gumeystayaashu waxay ku dhex jiraan laba arrimod oo kala daran. Waayo waxay si buuxda u ogyihiin in haddii ay shuuciyaddu ka taag roonaato aanay laf iyo jiidh toona uga tegayn, gun iyo laan toonana ayna dhaafayn. Taasi oo uu baabi'yo gumeysiga iyo awooduba. Kii la raacsanaana uu noqonayo mid wax dabagelaya. Kuwii talin jirayna ay noqon addoommo. Halkaasi oo ay ku baabayaan dalalkii la gumeyisan jiray. Lana gumeysan doono dalalkii uu gumeysigu ka soo abuurmay. Waxay sidoo kale si buuxda u ogyihiin in haddii ay mabadgeliyaan Islaamka, oo iskii faraha uga qaadaan inuu waxuu doono sameeyo, in aanu u hakanayn sidii uu uga takhalusi lahaa



gumeysiga. Markaasi ka dibna lagu xidhi doono gumeysiga dalkiisa aan waxba lahayn. Halkaasina ay ku dili doonto gaajo iyo macaluul. Halkaasina ay ku waayi doonaan wejigoodii iyo awoodoodi.

Gumeystuhu wuxuu ku riyoonayaa in uu hubeeyo muslimiinta iyagoo ku hoos nool si ay ula diriraan shuuciyadda. Wuxuuna isku dayayaa in uu muslimiinta tusa khatarta kaga soo fool leh shuuciyadda ee ah ilxaadnimo. Waa riyo u macaan gumeystaha, laakiin ilaahay idankii marnaba kama suurtogelayso dhinaca muslimiinta.

Islaamku wuu necebyahay gumeysiga, wuxuuna necebyahay shuuciyadda. Nacaybkooduna heer ayuu wada gaadhsiisanyahay. Waayo waxay neebyihiin Islaamka. Mid walibana wuxuu ka kale ula dagaalmayaa si uu u qabsado dalka Islaamka. Islaamkuna wax khayr ah kama helayo haddii uu yara janjeedhsado mid labadooda ah. Waayo khasaaruhu waa mid dhab ah haddii uu ula diriri labada cadow midkood. Wax helidduna waa mid aan la hubin tiiyoo uu cadowgii kale harsanyahay. Laakiin Islaamka wanaag ayaa agu jira, waxbana khasaari maaya haddii uu cadowgiisa meel iska taago oo uu iskii u shaqaysto. Iskana lumin fursad kasta oo soo marta.

Gumeysiga iyo Shuuciyadda oo iska horyimaadda weeyaan fursadda keliya ee u suurtogelinaysa Islaamka in uu labadoodaba ka farabaxo Ilaahay idankii. Gumeysiga iyo shuuciyadda dagaalkooduna wuxuu

la mid yahay laba tuug oo isku diriraya in ay xadaan qof og waxa uu tuug waliba ka doonayo. Haddii uu qofku doono in uu hirgeliyo tuugada, wuxuu gargaari midkood. Haddii uu doono in uu nabadgeliyo midkoodna wuu isku dayn ha is dirireen eh. Wuxuuna naftiisa u baaran meel uu uga baxsadoo oo uu kaga nabadgalo dhibtooda.

Muslimiinta dhabta ahi ma hoossasinayso dhalanteedka gumeysigu. Kamana aamusayaan. Suurtogalna maaha in ay ku kalsoonaaddan gumeysiga maadaama ay awood ku leeyihiin dalka Islaamka. Iyo inta ay awoodaasi u sii waarayso. Ha dejiyo gumeysigu naftiisa. Hana ka nastaan muslimiintu dhibtiisa. Waxaana muslimiinta kala joogta bari iyo galbeedba la gudboon in ay isku diyaariyaan maalintaasi la sugayo. Waanay soo dhawaatay. Maalin ay noqotaba mar ayemuslimiintu farxi. Waxayna ogaan gumaystayaashu waxay arrintu ku danbayso.

## II
## DAWLADAHA ISLAAMKA

### MAXAA KU KELLIFAYA DAWLADAHA ISLAAMKA IN AY LA DIRIRAAN ISLAAMKA

Waxaynu hor ku soo aragnay sida ay dawladaha Islaamku ula dirirayaan Islaamka. Una cidhiidhi gelinayaan muslimiinta u halgamaya sharafta Islaamka. Waxaynuna soo aragnay sida ay dawladahaasi u bannaynayaan waxa uu Ilaahay xaaraantimeeyay. Una xaaraantimayaan waxa uu Ilaahay xaxlaaleeyay. Waxaynuuna soo aragnay sida ay u caddileen ardayda uguna baxeen xuduuddii Ilaahay. Waxaynuna soo aragnay sida ay ugu dedaalayaan in ay socodsiiyaan waxa uu doonayo gumeystuhu ee ay uga celinayaan Muslimiinta. Intaasi oo idilba kor ayeynu ku soo aragnay. Waxaynuna u soo qaadanay tusaalooyin badan oo caddaynaya sida ay dawladahaasi uga arradanyihiin Islaamka ay sheeganayaan. Iyo waxa hawlo ah ee ku liddi ah Islaamka ee ay ku kacayaan. Loomana baahna in aan soo sheegno wax cusub, ee intii aynu soo sheegnay ayaa innagaga filan. Laakiin halkani waxaynu dayeynaa in aan soo yara taabanno waxa dawladda ku keliifaya in ay la yimaadaan waxyaalo aanu Islaamku bannaynin. Ama in ay ka aamusaan waxa uu diidanyahay Islaamku. Arrimahaasina si kasta oo ay ku kala geddisanyihiin waxay iskugu soo biyo shubanayaan uun laba arrin:

*Ta kowaad:* Aqoonta aan loo lahayn axkaamta Islaamka.

*Ta labaad:* Cabsi laga qabo in xukunku ka lumi.

### AQOONTA AAN LOO LAHAYN AXKAAMTA ISLAAMKA

Waxaa runahaantii arrin laga xumaada ah in ay madaxdii ka talinaysay dalalka Islaamku noqdaan

qaar aan garanayn Islaamkii oo ka jaahil ah. Iyagoo u talinaya dalalkii Islaamka, bari iyo galbeedba. Iyaguna ay yihiin kuwii ka socday muslimiinta iyo ummadaha muslimiinta marka ay dawladuhu shiraa-yaan.

Madaxda dawladaha Islaamka badidoodu waxay ku abtirsadaan qoysas ay ku qotodheertahay Islaam-nimadu. Madaxda muslimiinta badidooduna waa rag diineed oo si weyn oo qotodheer u rumaysan diinta. Kuwaasoo ka gudanaya cibaadooyinka inta ay ka garanayaan. Laakiin waxay Islaamka ka garanayaan uun qolofta sare. Islaamnimadooduna ma dhaafsiisna ta kuwa juhalada iyo cawaamka.

Waxay Islaamka ka yaqaaniin uun inuu yahay iimaan, soon, Salaad, Xaj. Wax intaasi ka danbeeyana waxba kama garanayaan.

Ma garanyaan in uu Islaamku kulmiyay if iyo aakhiro. Iskuna dhex daray diintii iyo adduunyadii, iyo masaajidkii iyo dawladdii.

Ma garanayaan in uu Islaamku yahay shariicad dhammaystiran, Iyo in uu la yimid qodobbada xukun-ka, maamulka, siyaasadda, dhaqaalaha iyo mucaam-laadka. Iyo in uu la yimid axkaamta dagaalka iyo nabadda iyo wixii la xidhiidha arrimaha adduunyada oo idil. Iyo in uu waajibinayo dabbaqaadda qodoba-diisa, iyo axkaamtiisa oo uu uga dhigay aasaas xukunka iyo habkii madaxda.

Ma garanayaan in tiirka ugu horreeya ee Islaamku



yahay in uu qofka muslinka ahi rumeeyo waxa uu Ilaahay soo dejiyay. Iimaankuna aanu ku ekayn uun hadal iyo rumeyn ee loo baahanyahay in lagu daro camal. Waxaana run sheegay Rasuulkii – N.N.-E.K.H.A – markuu yari: « Iimaanku maaha iska yeelyeel, ee waa kii qalbiga ka daadaga ee camalkuna rumeeyo. Dad ayaa adduunyadii ka teggay iyagoon mid wanaag lahayn. Waxayna yiraahdeen waxaanu nahay qaar malahoogu xagga Eebee ku fiicanyahay. Waanay been sheegeen. Haddii uu malahoodu fiicnaan lahaa, waxaa hagaagi lahaa camalkooda ». Sidaasi ayaa qof kasta laga doonayaa camal. Waxaana la weydiin doonaa camalkiisa. Haddii uu fiicnaado iyo haddii kaleba isaga ayaa iska leh. Qofna jannada ku geli maayo wax aan ahayn camalkiisa oo la kulma wixii eebee faray.

« **Dheh shaqeeya Ilaahay iyo Rasuulkiisa aya arki hawshinnae** ». Al–Tawba – 105

**Rabbigaaga ayaan ku dhaartee, waxaynu dham-mantood weydiin wixii ay suubinayeen** ». Al–Xijr – 93

« **Jannadani aad ku dhaxasheen wixii aad suubinay-seen** ». Al–Zukhruf – 72

Ma garanayaan in uu Ilaahay innagu waajibiyey in aan raacno shariicada Islaamka aan la inoo oggolayna in aan raacno wax aan iyada ahayn.

« **Waxaanu kaa dhignay mid arrinkiisu shariicada yahay ee raac** ». Al–Jaasiya – 18.

**« Raaca wixii idinka soo degay rabbigiina hana raacina wax aan isaga ahayn oo aad talo saarataan ».** Al–Acraaf–3

Wuxuuna Ilaahay ka dhigay diinta Islaamka diinta keliya ee jirta.

**« Diinta Ilaahay agtiisa ahi waa Islaamka ».**

Ilaahaynaa ma aqbalayo in diin laga dhigto wax aan diinta Islaamka ahayn.

**« Kii wax aan islaam ahayn ka dhigta diin laga aqbali maayo ».**

Ma garanayaan in xukunka dalalka Islaamku uu noqdo mid ku qotoma asaaska wixii uu Ilaahay soo dejiyay. Taasina ay tahay mid uu Ilaahay si cad oo go'an inoo faray.

**« ku xukun dhexdooda waxa uu Ilaahay soo dejiyey ».** Al–Maaida–49.

**« Waxaanu kitaabka kuugu soo dejinnay si xaq ah si aad dadka dhexdooda ugu xukuntid waxa uu Ilaahay ku tusay ».** Al–Nisaa–105.

Ilaahayna wuxuu ka dhigay kii aan wax ku xukumin waxa uu Ilaahay soo dejiyay mid gaal ah.

**« Ka aan wax ku xukumin waxa uu Ilaahay soo dejiyey, kuwaasi waa gaalo ».** Al–Maaida–44.

Ma garanayaan in uu Islaamku yahay tiiyoo loo raaco diinta Ilaahay si dhab ah. Qofka muslinkuna aanu noqon karin muslin ilaa uu daacad u yahay



Islaamka, oo aanu rumaysnayn wax aan isaga ahayn, u shaqaynaya isaga oo keliya isagoo keliyana adeeca-yo ».

**« Lama farin wax aan ahayn in ay Ilaahay u caabu daan iyagoo ay diintu ka dhab tahay ».** Al–Zumar–11

Waxay moogyihiin in axkaamta Islaamku aanay oggolayn qayb qaybin. Taasi oo ay qodobbadoodu ay diidanyihiin in lagu camal falo badh, layskana hil-maamo inta kale. Sida ay u diidantahay in badhna la rumeeyo badhna laga gaaloobo.

**« Ma Waxaad rumeynaysaan kitaabka badhkii, ka gaaloobaysaanna badhkii. Abaalka ka sidaasi yeela waa hoog nolosha adduunyada iyo maalinta qiyaamaha oo ay helaan cadaabta ugu kulul ».** Al–Baqara–85.

**« Ka digtoonow in ay kaa fidneeyaan waxaa uu Ilaahay soo dejiyey badhkood ».** Al–Maaida–49.

**« Kuwa qarinaya waxa uu Ilaahay ku soo dejiyay kitaabka, ee ku iibsanaya lacag yar, kuwaasi kuma cunayaan calooshooda wax aan ahayn naar ».** Al–Baqara–174.

Waxay moogyihiin in waxa ay dusha ka saarayaan muslimiinta ee ah dhigaallo reer Yurub qawaaniin la dejiyay ay yihiin qaar aanu oggolayn Ilaahay.

**« Waxay u sharciyeeyeen wax aanu Ilaahay u oggolaan ».** Al–Shuuraa–21.

Jaahilnimadooda awgeed, ayey ku waajibinayaan muslimiinta waxaasi aanu Ilaahay oggolaan. Waxayna, ka doonayaan in ay isku xukumaan qaanuunaadaasi la dejiyay, iyagoo uga dhigaya qiil inay ugu fiicanyihiin. Yihiinna jidka horumarka iyo horukaca. Taasi oo ah beentood. Waxayana qabsaday uun hadalka Ilaahay ee micnihiis yahay:

« **Miyaanad arag kuwa ku andacoonaya in ay rumeeyeen wixii hortaa soo degay, ee doonaya in ay isku xukumaan daaquudka, tiiyoo la faray in ay diidaan. Shaydaankuna wuxuu doonayaa in uu si weyn u lumiyo** ». Al-Nisaa-60.

Aqoon daridooda ay Islaamka ka qabaan awgeed, hadii lagu yiraahdo ku noqda Ilaahay, iskuna xukuma kitaabkiisa, way diidayaan.

« **Haddii loogu baaqo Ilaahay iyo Rasuulkiisa in ay dhexdooda isku xukumaan, qaar ka mid ah ayuunbaa diidi** ». Al-Nuur-48.

Diidamadooda waxaa uu sii dheer in ay ka sii leexiyaan jidka Ilaahay. Kuna andacoodaan in ay u jeedaan isugeynta muslimiinta iwm.

« **Haddii lagu yiraahdo u kaalaya waxa uu Ilaahay soo dejiyey iyo Rasulkiisa, waxaad arki doontaa munaafiqiinta oo Iskaa hortaageysa. Sidee weeye marka ay masiibo ku haleeshay wixii ay gacmahoodu Galabsadeen, ayey kuu imanayaan iyagoo ku dhaaqanaya waxaanu kuwa uu Ilaahay ogyahay waxa**



**qalbigooga ku jira, ee diid, waanina, kuwa dheh naftooda hadal gaadhsiin ah** ». Al-Nisaa-61-63.

Waxayna ogyihiin in qawaaniinta degsani ay tahay uun hawooyinka dadka iyo shahawaadka xisbiyada, iyo waxay madaxdu doonayso. Laakiin waxay moogyihiin in Ilaahay diiday hawda oo la raaco, iyo in dadka dusha laga saaro. Waayo waa hallow, iyo jidka Ilaahay oo wax laga luminayo.

« **Ha raacin hawada, waxay kaa lumin jidka Ilaahay** e.

« **Yaa ka hallowsan ka u raacay hawadiisa hanuunka hanuunka eebbe la'aantiis** ». Al-Qasas-50

Waxayna u malaynayaan in qawaaniintaasi faasiqa ah ee hallaysani, ay tahay ta ugu wacan reer Yurub horumarkooda iyo xooggooda. Waana male aan meelna kaga jirin xaqa iyo runta. Waayo waa isla qawaaniintii jirtay ee ay haysteen markii uu Islaamku soo baxay. Kana saaray wixii ay hasyteen. Dabadana uu kaga dhacay saliibiyiintii. Gacantana uu ku dhigay Yurub. Reer Yurbna ay bixiyeen Gibirkii markii laga adkaaday. Lamana gudboona qof muslin ah ha ahaado madax ama riciyad ee in uu faraha ka qaado amarkii Ilaahay oo uu iska raaco male.

« **Maluhu xaqa meelna kama buuxiyo** ».

Lamana gudboona qofka muslin ah in uu iska raaco dadka badidiisa. Waayo xaqu maaha tiiyoo la raaco dadka badiddisa, iyo aadeecidooda ee waa

waa addeecidda Ilaahay.

« **Baddidoodu waxay raacsanyihiin uun male** ». Yuunis–36.

« **Haddii aad addeecdid dadka arlada badidooda, waxay kaa leexin uun jidka Ilaahay** ». Al–Ancaam–116.

Qofka muslinka ahi wuxuu ku xidhxidhanyahay amarada Ilaahay. Lamana gudboona in uu dhinacna uga leexdo. Mana aha in uu wax sameeyo isagoo raacaya hawooyinka dadka iyo cadowga Islaamka.

« **U toos sidii lagu faray, hana raacin hawooyinkooda** ». Al–Shuura–15.

« **Raac waxa lagu farayo, diidna mushirkiinta** ». AlXijir–94

Lamana gudboona in uu dadka ka cabsado. Waayo cabsidu waa ta Eebbe uun:

« **Ha ka cabsanin dadka ee iga cabso** ». Al–Maaida–44.

Haddii ay madaxdeenn u haystaan aayadda ah « **Kuwa rumeeyeyow addeeca Ilaahay, addeecana Rasuulkii, iyo kuwa talada idiin haya ee idinka mid ah** ». Waa in ay sidaasi oo kale u dhawraan aayadda in teeda danbe « **haddii aad wax isku qabataanna ku celiya Ilaahay iyo Rasuulka haddii aad rumeysantihiin Ilaahay iyo maalinta aakhiro. Taasi ayaa idiin khayr roon** ». Al–Nisaa–59.



Haddii uu kaasi yahay xukunka Ilaahay, sidee ayey madaxdu u rajaynayaan in ay muslimiintu ku addecaan macaasidda Ilaahay, iyo wixii uu Ilaahay xaaraantimeeyey ee ah hawo raacid, daaquud adeecid, qaanuunada gaalada iyo hallowga.

Waa kuwaasi madaxdeenna muslimiinta ahi. Waana kuwaasi qaar ka mid ah axkaamta Islaamka ee ay moogyihiin. Haddii aanay garanaynin sida aan rumaysannahay, waxaa laga yaabaa in ay ogaadaan in aqoon laantoodii ay dhibtay Islaamkii, kuna halaagmeen muslimiintii. Haddii ay ogyihiin axkaamta Islaamka ee ay isgarab marinayaan way buriyeen ballantii Ilaahay. Waxayna gooyeen wixii la faray in ay xidhiidhiyaan. Waxayna fasahaadiyeen arladii. Joojiyeenna cibaadadiisii. Wayna isweynaysiiyeen ka dib markii la sharrifay, loona suurtogeliyay inay madax u noqdaan muslimiinta.

« **Kuwa burinaya ballantii Ilaahay ka dib ballankiisii, jarayna wixii uu Ilaahay faray wax xidhiidhiyaan, fasahaadinaya arlada, kuwaasi waxay leeyihiin lacnad. waxayna leeyihiin guri xumo** ». Al–Raacad–25.

« **Ka is diidsiiya cibaadiisa ee isweyneysiiya dhaammaantood waa la soo ururin** ». Al–Nisa'a–172.

« **Kuwa joojiyey cibaadadiisa, ee is weyneysiiyey waxaa la cadaabi cadaab daran. Mana helayaan wax aan Ilaahay ahaynoo ah weli iyo gargaar toona** ». Al–Nisa'a–173.

## CABSIDA TALADA OO KA WAREEGTA

Madaxda muslimiinta ee bari iyo galbeedba, waxay soo gaadhaan xukunka iyagoo ka cabsi qaba in uu xukunku ka wareego. Waxayna si xoog leh ugu foojignaadaan sidii uu xukunku ugu sii waari lahaa. Waxayna inbadan ku huraan sidii ay u ilaashan lahaayeen xukunka. Waxay u huraan sharaftooda iyo sharafta dalkooda. Waxayna u huraan Islaamkii si ay u raalli geliyaan cadowga Ila ahay iyo cadowga Islaamka.

Waxay dabagalaan cadowga Ilaahay iyo cadowga Islaamka ee Ingiriis, faransiis iwm leh.

Waxayna is jeclaysiiyaan si ay u raalli geliyaan cadowga Ilaahay, oo uu ugu hayo caadifad iyo jecayl. Waxayna intaasi oo idil u samaynayaan uun si ay u ilaashadaan xukunka iyo talada, iyo wixii soo raaca ee ah hanti iyo magac. Waxaana laga yaaba aqoonlan'toda axkamta Islaamka, ee la xaaraantimaynayo in la dabagalo cadowga Ilaahay, ayaa u sahashay in ay ilaashadaan dabageliddaasi oo ay si cad ugu dhawaaqaan, kuwa dhegganaadaan xilli kasta.

Madaxdunna inoo talinaysaa waxay addeecsiinayaan muslimiinta wax aanay galabsan. Waxayna u xalaalaynayaan waxa uu Ilaahay xarrimay. Waayo waxay iska caabiyayaan gumeysiga iyo kor noolaanshaha. Lanq dagaallamaya cadowga Ilaahay iyo cadowga Islaamka. Waxaana laga yaaba in ay madaxdaasi moogyihiin in uu Ilaahay faray in aanay addecin gaalada.



« **Kuwaa rumeeyeyow haddii aad addeecdaan kuwa gaaloobay, waxay idiin jeedin dabadiinna, oo aydun iskurogi, qaar khasaaray. Ilaahay ayaa mawlihiinna ah isagaana ugu roon wax gargaara** ». Al-Cimraan – 149–150.

« **Kuwa rumeeyeyow haddii aad addeecadaan qaar ka mid ah kuwa reero kitaab ah, waxay iimaankiinna dabadii idiin rogi gaalo** ». Al-Cimraan – 100.

Waxaa laga yaabaa in ay madaxdaasi moogyihiin in inbadan oo reero kitab ahi ay la jecelyihiin in ay gaalo ku soo noqdaan iimaankooda ka dib. Ilaahayna wuxuu ka xaaraantimeeyay qofka muslina ah in uu ku kalsoonaado qof aan muslin ahayn. Ama ugu rumeeyo wax aan ahayn mid diintiisa raacsan.

Madaxdeenuna ma jecla mana soo dhawaynayaan qof muslin ah oo u adeegaya Islaamka. Waayo waxay doorayaan in ay dawladda u yeelaan weji aan Islaam ahayn. Si ay isugu dhaweeyaan cadowga Ilaahay. Una raalli geliyaan kuwa Ilaahay la dagaalmaya. Si aan loogu tuhmin inay yihiin qaar aad ugu dheggan Islaamka. Waxba markaasi ka dib lama aha in ay lumiyaan Islaamka oo ay tababaryarayaan. Haddii ay ogaan lahaayeen xaqiidada Islaamka inay yeeleen sidaasi. Haddii ay si run ah u garan lahaayeenna Islaamka, may yeeleen sidaasi. Haddii ay si run ah

u rumayn, laahaayeena waxay ogaan lahaayeen in uu iimaanku yahay jecayl iyo cadhow. Qofka muslinka ahina rumeynayn ilaa uu u dhiidhiyo Islaamka.

Sidaasi ayey xukun dhowrashadii u dullaysay kuwii xukunka doonayey. Islaamkii jaahilka laga ahaana uu u lumiyay axkaamtii Islaamka. Muslimiintiina lagu ibtileeyay dawlado hammigooda oo idili yahay xukun qabasho iyo haysasho. Kuwaasoon marnaba ku hammiyayn Islaamka, iyo dabbaqaadda axkaamta Islaamka.

## MUSLIMIINYAHAY HAWLGALA

Muslimiinyahay! waa kuwaasi dawladihiinnii gacanta ugu jira gumeystihii. Kaasi oo gacanta ku haya arladoodii, samadoodii, oo boobaya khayraadkoodii. Waxa keliya ee ay doonayaanna waa in ay xadaan hantidiinna, dhacaanna quudkiinna, tuujiyaan dhiiggiinna, ku ciyaaraan sharaftiinna, ku dheelaan caqiidadiinna, idinkana leexiyaan diintiinna.

Muslimiinyahay! Waa kuwaasi qawaaniintiinu idinkuma soo noqonayaan. Laydiinkumana abtirinayo. Waxa ku jira uun wax dhibaya dareenkiinna, iyo wax weeraraya waxaa aad rumaysantihiin. Iyo wax fasahaad idinku dhex faafinaya. Waxayna idiinka yimaadeen gumeystaha si ay idiinku addoonsiiso. Oo ay gacmaha idiinka xidho. Kana dhigto mid dalkiinna ku sugan. Kor ku noolaanshihiisana mid sharaysan. Amarkiisana mid aad u hogaansantihiin.



Muslimiinyahay! Waa kuwaasi oo dawladihiinnii waxay xallaalaynayaan wixii uu Ilaahay xaaraantimeeyay. Waxayna xaaraantimaynayaan wixii uu Ilaahay xalaaleeyay. Waxay caddilayaan Islaamka. Waxayna dhibayaan qof kasta oo u adeegaya Islaamka. Waxayna ka erayayaan dadkii iyo dalka u dhashay iyo muslimiintii. Taasi oo ay ugu wacantahay u hoggaansanaanta amarada gumeysiga, iyo wixii uu doonayo oo ay u yeelayaan. Gumeustahaasi ay ku anddaccoonayso in ay la dirirayso. Tiiyoo runahaantii dabagelayso oo isku dhiibaysa.

Muslimiinyahay, waa kuwaasi dhigaaladiinnu ay diidanyihiin carrabkiinnu. Necebyihayna qalbigiinnu. Laakiin waxaa idinku waajibinaya gumeysiga isagoo ka faaiidaysanaya awoodiisa iyo u adeegayaalkiisa. Islaamkuna wuxuu doonayaa in ay dhigaaladaasi meesha ka baxaan oo ay tirtirmaan. Mana tirtirmayaan Ilaa la burburiyo gumeysiga oo uu meesha ka baxo. La Jihaada hadaba gumeysiga waa cadowga ugu horeeya ee Islaamka iyo cadowgiinna. Jihaadkiisana ku bixiya naftiinna iyo maalkinna. Iskuna gargaarsada sidii aad arladiinna uga saari lahaydeen. Idiinkoo isgarabsanaya isku kaashada sidii aad u saari lahaydeen. Mideeyana safafkiinna iyo hababkiinna. Iskuna diyaariya maalinta guusha way soo dhowdahay e.

**« Ilaahayna waa kii guuleeya kuwa u hiilinaya ».**

**« Ilaahayna waa ka arrinkiisu socdo, laakiin dadka badidoodu ma oga ».**

# TUSMO


- Cudur daarka qaynuunka .................... 5
- Qaanuunku wuxuu inoo diidayaa hadalka .... 5
- Sidee buu garsooruhu uga faramadhnaanaya .... 6
- Garsooruhu ma ka faramadhnaan karaa ummad la haysto .......................... 7
- Garsooruhu kama fara madhnaan karo ummad wada kharriban ...................... 8
- Garsooruhu ma ka faramadhnaan karaa ummad ka leexatay diintii iyo akhlaaqdii ............... 10
- Goorma ayey u suurtogeleysaa garsooraha in anu lug ku yeelan ........................ 10
- Ciddii doonaysaa ha cadhooto .............. 11
- Garsoore ayaan ahay laakiin muslinbaan a hay .. 12
- Maaha inuu muslinku adeeco macsida Ilaahay .. 14
- Waxaa la gudboon qofka muslinka ah wanaagga oo uu faro iyo xumaha oo uu diido ............ 15
- Waa kaasi xukunka Islaamku ................ 18
- Qof kasta oo muslin ah waxaa la gudboon in uu guto waajibkiisa ...................... 18
- Hawsha qaanuunka ........................ 20
- Qodobada qaanuunka ...................... 23
- Qaanuunka ummad kastaa waa qayb ka mid ah .. 25
- Qawaaniinteennu waa mid shisheeye .......... 27
- Qaanuunku wuxuu Ilaaliyaa caqiidada: ...... 28
- Qaanuunka khayrka ayuu ku addiyaa shacbiga .. 30
- Qaanuunka wuxuu shacbiga u diidayaa korkunoolaansho ...................... 31

- Qawaaniinta masaaridu waa qaar u adeeaya gumeysiga ..... 34
- Goorma ayuu qaanuunku yeelanayaa awood .. 39
- Qawaaniintii ka hor kacaankii faransiiska iyo ka dib: ..... 49
- Dibudhaca muslimiinta aguma wacna sharcigu .. 57
- Qawaaniinta la dejiyo wuu burinayaa Islaamku 60
- Qawaaniinta la dejistay waa qaar baadil ah .... 70
- Dis toorku wuxuu burinayaa wixii khilaafsan Islaamka ..... 70

II – **Qawaaniinta oo shariicada khilaaftaa waxay burinaysaa qawaaniinta** ..... 72

- Qawaaniinta oo ka tagta hawshoodii iyo tiirarkoodi waa mid burinaysa ..... 73
- Maxay ino geysteen qawaaniinta la dejiyey .... 74
- Waxay qawaaniintaasi inna dhaxalsiisay iska horimaad iyo khalkhal ..... 74
- Bal tusaalle aan u soo qaadanno masarta muslinka ah ..... 75
- Masar waa dal islaam ah oo ku qotodheer Islaamka ..... 76
- Maxay masartii muslinka ahayd ku samaysay Islaamkii ..... 78
- Dawladda masar waxaa u diin ah Islaamka waxaanay caddilaysaa Islaamka ..... 79
- Dawladda masar ee muslinka ahi waxay bannaysay xaaraantii ..... 81
- Dawladaha Islaamku wax ay diidanyihiin barashada diinta Islaamka ..... 84





- Dawladaha Islaamku waxay eryayaan kuwa Islaamka ku baaqaya ..... 86
- Dawladihii Islaamka oo ka leexday Islaamkii .. 87
- u dagaalankii gobanimada iyo Islaamkii oon ka leexannay ..... 88
- Sideebuu ingiriisku u soo galay masar ..... 89
- Xikmaddii madaxda ..... 90
- Xikmaddaasi maaha mid uu Islaamku raali ka yahay ..... 90
- Islaamku wuxuu u diidaya muslimiinta dulinimada 91
- Islaamku ma nabadgeliyo kuwa xadgudba .... 93
- La jihaadka cadowga Islaamku waa ku waajib qof kasta oo muslin ah ..... 95
- Jihaadku ma fardal-caynbaa mise waa fardal kifaaya ..... 97
- Goorma ayuu jihaadku ku waajibayaa duqayda, haweenka iyo bukaanka ..... 98
- Islaamku wuxuu waajibinayaa isdiyaarin iyo diyaargarow ..... 99
- Maaha in ay qofka muslinka ah la cuslaato ka horimaadka cadowgu ..... 102
- Guubaabada Islaamka jihaadka iyo mujaahidiinta 103
- Xukunka Islaamka iyo taariikhdii hor ..... 106
- Maxaynu ugaga dayayeynaa reer galbeedka gobonimodoonka ..... 106
- Maxay masar ka heshay baryadii ..... 108
- Sidii loo fuliyey heshiiskii sannadkii 1936 ..... 111
- Weli waxba maynaan baran ..... 111
- Xikmad la yaab leh ..... 112
- Layaabka aan dhammaanayn ..... 115

– Kuwaasi ma muslimiinbaa .................... 117
– Qawaaniinta la dejiyey waxay khatar gelinaysaa hab-bulsheedkeenna .................... 119
– Saldhigyada hab-bulsheedka Islaamka ah ...... 121
**I – Sinaansho buuxa ee baniiaadmiga** ............ 121
**II – Caddaalad buuxda** .................... 123
– Xornimada ugu ballaadhan .................... 124
**IV – Walaalnimada** .................... 127
**V – Midowga** .................... 128
– Isgargaarsi .................... 129
**VII – Ka dheeraanshaha xaaraanta** .......... 130
**VIII – Oggolaanshaha wanaagga** .............. 131
– Wakiilnimada hantida Ilaahay .............. 134
**X – Baahinta hantida** .................... 137
**XI – Wanaagga iyo naxariista** .............. 140
**XII – Wada tashiga** .................... 142
– Dhigaallo-bulsheedkeenna maanta .......... 143
– Maxaa ku kala jira muslimiinta iyo Islaamka .. 151
**I – Gumeystaha cadaawadda uu gumeystuhu u hayo Islaamka waa mid isku dabiici ah** ............ 153
– Qaababka uu gumeystuhu ula diriro Islaamka .. 155
– Kala soocidda diinta iyo dawladda ............ 159
– Maaha in dalalka Islaamka lagu qiyaaso yurub .. 162
– Diintu dib uma dhigayso dadweynaha ........ 163
– Ku noqoshada gumeysiga .................... 165
– Dagaalka qadhaadh .................... 166
**II – Dawladaha Islaamka maxaa ku kellifaya dawladaha Islaamka in ay la diriraan Islaamka** ............ 168
– Aqoonta aan loo lahayn axkaamta Islaamka .... 169
– Cabsida talada oo ka wareegta .............. 178
– Muslimiinyahay hawlgala .................... 180

**International Islamic Federation of Student Organizations**

P. O. BOX 8631

SALIMIAH - KUWAIT